Xulashada Guurka



Somali Library

Buugaan iyo Buugaag kale ee

ku qoran Luqadaada Hooyo ee **Af-Soomaaliga**

waxaad ka heleysaa

Somali Library

Fadlan Booqo Boga Telegram-ka

https://t.me/Somalilibrary

liibaanwaasuge


Xulashada Guurka
2018


Guryo
Samo

Diyaarinta Buugga

Buugga Xulashada Guurka waxaa diyaarisay Guryosamo, waxaana diyaarinta buuggaan qiimaha badan fududeeyay Gudoomiyaha Guryosamo "Axmed Abshir Geedi" oo waqti dheer & dhaqaalo intaba ku bixiyay sidey bulshadu ku heli lahaayeen, waxaana buuggaan daabacday Yalax Printing Baar Ubax.

Guryosamo Horumarinta Qoyska: waa xarun loogu talo galay in lagu horumariyo arrimaha qoyska sida: siinta talooyin dhaxal gal u ah qoysaska, samaynta tababarro lagu tayaynaayo qoysaska & soo diyaarinta dood cilmiyeedyo qiimo badan, wax-tar weynna u leh qoysaska Soomaaliyeed meelkasta oo ay joogaan.

Guryosamo waxaa la aas aasay 01-Julay-2016 maalinta xoriyadda dalkeenna hooyo ee Soomaaliya, waxaana hoos yimaada "Tabantaabo Kaalmada Guurka" oo ah sanduuq ay samaysay Guryosamo kaas oo loogu talo galay in lagu kaalmeeyo dhallinta guurdoonka ah & "Xafiiska Galbiska Guryosamo" oo ah xafiis loogu talo galay inuu u adeego dadka guurdoonka ah markasta & meelkasta, wuxuuna ku yaallaa laba dhagax, Xarunta Machadka Gursosamo waxay ku taallaa isgoyska Howl-wadaag, faah faahinta (Xoghayaha) 0615-241028.

MAHADSANIDIIN



GUUL & GOBONIMO

Tusmada Buugga

Hordhac 6

Ahmiyadda Guurka 7

Faa'iidada Guurka 19

Guurka & Islaamka 48

Guurka & Dhaqanka 63

Xulashada Guurka 116

Gunaanad & Guubaabo 176

Hordhac

Ugu horeyn waxaan uga mahdinaynaa Allaah (Sw) dhammaan nimcooyinkiisa oo qof soo koobi kara aanu jirin, waxaana weydiisanaynaa Allaah (Sw) inuu naga dhigo kuwa mahdiya isaga markasta & meelkasta, sidoo kalana ha inagu hago hanuunkiisa, waxaan kaloo amaanaynaa suubanaheenna Nabi Muxammad (Scw) oo jacaylkiisa & raacistiisa aannu ku gaareyno wanaag aduun & mid aakharo intaba Insha Allaah.

Buugga Xulashada Guurka muhiimadda ugu weyn ee laga leeyahay waa in dhallinta guurdoonka ahi ay helaan meel ka kaalmeysa hanuunka & hogaansanka laxiriira gaarista nolosha wanaagsan ee guurkooda mustaqbalka & hagaajinta hankooda Insha Allaah.

Sababababaha keenay in buuggaan Guryosamo diyaariso waa dhibaatooyinka dhallinta guurdoonka ah ka haysata ku hagidda helitaanka qof qiimo badan oo ku taageera guurka & guud ahaan nolosha oo idil.

Ugu dambayn wuxuuna buuggu koobayaa inta badan tilmaamaha ugu wanaagsan ee inanka ama inantu ay si sax ah ugu xulan karaan qofka ay rabaan iney lawadaagaan nolol guur oo qiimo badan, una horseedda hanuun & horumar sare.

Ahmiyadda Guurka

Guurku waa waa guntan adag oo ka dhaxeeya lab & dhadig (gabar & wiil) si ay u wada gaaraan nolol bili'aadam gaaro tan ugu qiimaha badan taasoo ku dhisan Jacayl, Ixtiraam, Kalsooni, Amaano, Ismaqal & Qanaaco ka dhaxeysa labada qof ee guurka ku heshiiya.

Guurku waa nolol ku dhisan Naxariis & Jacayl taas oo dhexmarta laba qofood lab & dhadig, waxaana ka dhasha Xuquuq & Waajibaad koraya labadooda, si ay u xaqiijiyaan hadafka guurka oo ah nolol wanaagsan Aduun & Aakharaba, taasoo u horseedda hagaagsan.

Guurku waa guntan qiima badan kaasoo kulmiya lab & dhadig, Allaah (Sw) ayaana jideeyay, waxeyna gaaraan labadaa qofood ee guurku dhexmaro nolosha ugu qiimaha & qadarinta badan taasoo ah daganaansho, Jacayl & Naxariis waarisa abid inta ay noolyihiin.

Guurku waa nolol u horseedda labada qofood ee Islaamka ah daganaansho Maskaxeed & mid Jireed intaba, taas oo sababeysa iney hantaan ama ay haleelaan nolosha ugu qiimaha badan dunida.

Guurku waa guntan adag oo Islaamku nafaray kaas oo noo horseedaya raalli ahaanshaha Allaah (Sw) isla markaana guurku waxaa weeyaan Sunnadii Anbiyada.

Allaah (Sw) wuxuu naleeyahay Aayaadkeyga waxaa kamida Naftiina inaan ka abuurnay Xaasaskiinna si aad ugu xasishaan, waxaana yeelnay dhexdiisan Kalgacayl & Naxariis, daliisha (Qur'aanka, Ar-ruum, Aayadda 2).

Sidoo kale Allaah (Sw) wuxuu naleeyahay "u guuriya adoomadeyda wanaagsan oo idinka idinka mid ah; hadeysan xoolo haysanin Allaah (Sw) ayaa ka deeqaya dheeraadkiisa, ogaadana Allaah (Sw) waa ogaal badane deeqdiiso badantahaye" (Suurada Al-nuur, Aayada32).

Suubane Nabi Muxammad (Scw) wuxuu nagu yiri: "Dhallinyarooy ninkii kara ha guursado, maxaa yeelay guurku araggaaga & cowradaada ayuu xumaha ka ilaalshaa, kiinna aan awoodinna ha Soomo, sababtoo ah Soonku waa difaacaha xumaha dhamaantii".

Sidoo kale Nabiga (Scw) wuxuu nagu yiri: "anigu waan guursadaa, guurkuna waa Sunadeyda qofkii Sunadeyda diidana igama mid maahane ha ogaado".

Wuxuu na tusiyay Nabigu (Scw) ahmiyadda guurka.

Ahmiyadda Guurka**:** guurka ahmiyadiisu maahan wax lagu soo koobi karo buug ama buugaag, balse waxaan soo gudbin doonnaa annagoo Allaah (Sw) kaashanayno qoraallo kooban oo kaga hadlayno Ahmiyadda Guurku noo leeyahay hadaan nahay guud ahaan Umadda Islaamka ah, gaar ahaan Bahweynteenna Soomaaliyeed.

Ahmiyadda Guurka waxaa ka mida dhismaha Qoys Muslim ah kaas oo hantiya ama hela nolosha ugu wanaagsan ee uu ku noolaado qof bili'aadam ah oo aaminsan ama yaqaana Allaah Subxaanahu Watacaalaa & Subanaha Muxammed Ibnu Cabdullaahi Ibnu Cabdi Mudalib Nabadgalyo & Naxariisi korkiisa ha ahaatee.

Dhismaha Qoys Muslim ah waxaa ku sugan faa'iido waaweyn sida dhowrsanaanta labada qof ee nolosha wadaagaya, taranka dadka muslimiinta ah oo si aad uga bata meesha uu maanta joogo, joogsashada xumaha sida Zinada, Khamriga, Daroogada, Sigaarka, Jaadka & Balwadda noocyadeeda kala duwan kuwaas oo saameyn xun ku reebay mudooyinkii dambe dalka.

Sidoo kale dhismaha Qoys Muslim ah waxaa ka dhalanaya in lahelo Awlaad qiima badan kuwaas oo leh Akhlaaq & Tarbiyo Wanaagsan oo ay wehliso dhowsanaan & dhaqan suuban, tilmaamahaas waxey keenayaan in Ubadku wanaagsanaado oo qiimoobaan.

Waxaa kaloo ka mida muhiimadda Dhismaha Qoyska Muslimka ah helitaanka Bulsho ka caafimaad qabta dhinackasta kuwaas oo ilaaliya qiyamka Islaamka, waxey kaloo difaacayaan Islmaamka & arrimihiisa, waxaa qiyaamaha ku faani tirabadnaanshaha Islaamka Suubane Nabi Muxammed (Scw), waxey noqonayaan ducaad wanaagsan oo dadka ugu yeera Allaah (Sw).

Allaah (Sw) isagoo noo digaya wuxuu nagu yiri: "dadka Iimaanka lahoow naftiina & ehelkiinaba ka ilaalsha Naar, taas oo lagu shiday Dad & Dhagaxaan".

Nabigu (Scw) wuxuu nagu yiri: "qof walboow waxaad tahay Mas'uul, waana lagu weydiin waxaad Mas'uulka ka tahay, inantu waxeey Mas'uul ka tahay Guriga Ninkeeda waana laweydiinaayaa Mas'uuliyadaas".

Sidoo kale Nabiga (Scw) wuxuu yiri: "waxaad guursataan gabdhaha dhalmada badan, maxaa yeelay waan idinku faanayaa tiradiinna maalinta qiyaamaha".

Ugu dambeyn guurka ahmiyaddiisa oo aad u badan siidaan sheegnana aan halkaan lagu soo koobi Karin waxaa ka mida: guurku wuxuu sababaa imaanshiyaha dadka qiimaha weyn u leh bulshada sida cuulimada ah ama ducaadda dadka ugu yeera xagga Allaah (Sw), wuxuuna naleeyahay Allaah (Sw) oo arrinkaas

wanaagsan noo tilmaamaaya "yaa ka oraah wanaagsan qof dadka ugu yeeraaya xagga Rabbi isaguna sameynaya camal aad u wanaagsan oo qiimo badan".

Guurka xaqqa & xalaasha ee labada qofood oo daacadda isku ah waxaa ka dhasha halyeyga, geesiga, xaafidka diinta Rabbi, xaakimka, caadilkaa, caalimka, caabidka, samafalaha, saabirka, kaatibka, Imaamka, Macalinka, abwaanka & wadaniga dhabta ah ee dareenka & damqashada badan ee samata bixiya dalka.

Tusaalaha ugu weyn ee dadkaas qiimaha badan een soo sheegay waxaa kaliya een ka soo qaadaneynaa oo ku dayasho wanaagsan kuugu filan qiso yaroo kooban oo ku saabsan Amiirkii 2-aad ee Muslimiinta Saxaabigii qaaliga ahaa ee Cumar Binu Khadaab (Rc).

Qisadu waxay ahayd Boqorkii Furus ayaa fariin u diray Saxaabiga Cumar, waxaana fariintii qaaday ninkii ka socday Boqorka, markuu gaaray magaaladii Cumar joogay ayuu dadkii waxa uu warsaday aaway Boqorkiinii Cumar? Waxeey ugu jawaabeen inagu Boqor malihin balse waxaan leenahay Amiir; wuxuu ku yidhi dadkii aaway Amiirkiina? Waxeey u tilaameen geed magaalada banaankiisa ah uu jiifay Amiirku, markii uu gaaray meeshii loo tilmaamay ayaa wuxuu arkay Amiir Cumar oo hoos jiifa geed warankiisiina

laan ka mida geedka uu suranyahay, markiiba ninkii waa saamoobay qalbigiisiina waa is badalay wuxuuna yidhi weedh aad u qiima badan ilaa & maantana lagu saamoobo marka ladareemo qof sida Amiir Cumar Cadaalad dadka u sameeya, waxeyna ahayd weedhu: "waa cadaalad fashay, markaas baad nabad gashay kadib ayaad huruday Cumarow, intaas markuu yidhi ayuu Islaamay ninkii fariinta u keenay Cumar (Rc).

Allaah (Sw) isagoo wanaaggaas noo tilmaamaaya ayaa waxaa uu nagu yiri: Allaah (Sw) "wuxuu idin faray dadoow Cadaaladda, Wanaagga, Qaraabada oo laxiriiriyo, Xumaha & Xad-gudubka oo lareebo Waansanku waa kaa" (Suuradda, A-naxli, Aayadda90).

Allaah (Sw) wuxuu nafihiina ka abuuray ooryo, ooryahaana wuxuu ka abuuray wiilal & qaar aad awoowe u tihiin oo labaduba ubixii ishu ay ku raaxaysanaysay ah" hadaba Allaah (Sw) wuxuu inoo sheegayaa ahmiyadda guurku leeyahay iney ka mid yihiin carurtaas ladhalay oo meel aan guurka xalaashaa ahayn aan laga helin si kasta oo loo raadiyo ubadkaas.

Allaah (Sw) wuxuu kaloo xusay markale noloshaas labaadii doonayee sacaadada & qiimaha leh ee in fara bandanna gaaladu ay waayeen iney guurka ku jirto oo wuxuu yiri: "aayaadkeyga waxaa ka mid ah inaan

idinka idinka abuuray ooryo si aad u weheshataan, kalgacal & naxriisna wuu idin dhex dhigay, arrintaana aayad (calaamad) weyn baa ku sugan ciddii fikireysa.

Aayaddu waxa ay tilmaamaysaa in guurka sharcigaa uu wato barko, shucuur & dareen gaar ah oo Allaah (Sw) uu ku abuuro quluubta adoomaha, waayo labadaan qof is meey aqoonin oo kala qolo ayay ahaayeen, isku abtirsiimo ineysan ahayna waaba laga yaabaa, mar alla markii guurku dhaco ayaa waxaa imaada kalgacayl & naxariis, isaguna indhihiisa ayuu ka jeclaanayaa xaaskiisa iyaduna indhaheeda ayey ka jeclaanaysaa seygeeda, waxa arrintaas qiimaha badan ee ahmiyadda weyn u leh lamaanaha sababayna waa naxariista Allaa (Sw) oo meesha timid waana guurka.

Ahmiyadda guurka sharcigaa uu leeyahay waxaad ka garan kartaa Allaah (Sw) amar ayuu bixiyay oo uu ku amraayo agjoogayaasha, ehelka, madaxda & maalqabeenka amarkaas oo faraya in loo guuriyo oo lagarab galo oo lakaaliyo cidda guursanaysa rag & dumarba, Allaah (Sw) wuxuu yiri: “u guuriya ragga & dumarka aan xaaska lahayn, haddii aysan waxba haysan Allaah (Sw) fadligiisa (dheeraadkiisa) ayuu siin doonaa”, waxaan ka fahmaynaa aayadda marka hore amar baa dhacay; kaas oo muujinaya in la iskaashado oo dadka guursanaya halkii wax laga dooni lahaa

inagu waa inaan wax siinaa, sidey soomaalidu barigii horaba oran jireen waa lakaalinayaa qoyskaan udub cadda ah ee cusub, marka kaalaa la inaga rabaa ee maahan inaan lacagaha faraha badan ee magacyada badan loo yeelay in guurka lagu xiro, marka xigana ballan qaad uu Allaah (Sw) siiyay dadka guursanaya.

Allaah (Sw) wuxuu kaloo tilmaamay isagoo ahmiyadda guurku leeyahay sheegaya in guurku uu yahay sunadii Anbiyada Ilaaheey, wax cusubna aanu ahayn, haddii cidi guurka iska deyneysee ka maarmeysana aabaheenii u weynaa ee Aadam (Cs) ayaa iska fariisan lahaa, markii Allaah (Sw) uu abuuray Nabi Aadam (Cs) kaligiis buu ahaa agtiisana cidi may joogin oo cidlo ayuu ahaa, hadaba markuu guur la'aan joogi waayay oo cid uu weheshado waayayna Allaah (Sw) islaantiisii ayuu ka jeexay oo lamaantiisii ayuu ka abuuray.

Marka Allaah (Sw) Anbiyadiisii ayuu ku amaanay guurka, ahmiyadiisana wuu kasii hadloo wuxuu yiri: "rasuulkasta oo aan soo diro waxaan u yeelaayay ooryo & ubad" marka Anbiyada Ilaaheey mid mid naadir ah maahine waxay wada lahaayeen ooryo & ubad, waxayna ku tusinaysaa ahmiyadda guurku leeyahay.

Rasuulka (Scw) amar buu bixiyay oo uu kula hadlaayo dadka mas'uulka ka ah hablaha isaga oo guurka inagu

dhiirigalinaya, wuxuu yiri: “hadduu idiin yimaado qof aad diidtiisa & dadnimadiisa raalli ka tihiin oo idin - qanciyay u guuriya gabadhiina, hadaad u guuri weydaana fitno & balaayo weyn ayaa dhici, oo Zino, foolxumo, dhaliil & ceeb ayaa dhici doonta, digniintaasna waa uu bixiyay Nabigu (Scw).

Nabiga (Scw) waxaa u yimdi niman da’ yara oo jidbeysanoo asxaabta ka mid ah, warkooda ayuu maqlay iney qaarkood yiraahdeen anagu guursan mayno oo cibaado un baan wadaynaa, Nabigu (Scw) wuxuu ku yiri nimankii “guurku waa sunadayda & hadyigeyga & hanuunka aan marayo, qofka nacaana anigii ayuu i nacay oo igama mid ahan” wuxuu Nabigu (Scw) nagu dhiirigalinayaa oo noo sheegayaa ahmiyadda weyn ee guurku leeyahay & qiimihiisa.

Sidoo kale Nabigu (Scw) wuxuu na leeyahay “lama arag labada qof ee xaaska ah jacaylka ka dhex maras ciduu dhex maro” haddii labo is jeclaanayso waxaa isugu jacayl badan ama jacayl waxa keena waxaa ugu badan waxaa weeyaan nikaaxa & guurka ayuu yiyi Nabigu (Scw), wixii kaloo intaa aan ahayn waaa laga yaabaa iney dhexda ka dhacaan, laakiin labada qof ee guurku ka dhaxeeyo way isku sabrayaan xitaa wixii soo kala dhex gala oo waa isku qaadanayaan.

Nabigu (Scw) isaga oo guurka saxdaa nagu abaabulaya oo najecleysiinaya wuxuu yiri: "aduunyadiinaa aad haysaan anigu labo ayaan ugu jecelahay, waana ooryaha & udgoonka, oodgoonkaas qiimaha badan & ooridii gaarida ahayd ee soo shideysay, labadaas oo isku qoofalan ayaan jeclahay buu yiri Nabigu (Scw), isheyduna waxay ku qabawsataa oon ku raaxaystaa oon ku dagaa waliba cibaadada oo salaaddu kow tahay.

Marka Rasuulku (Scw) wuxuu cadeeyay jirkiisa & ruuxdiisa labaduba iney sacaadada & raaxada ka helaan oorida wanaagsan, udgoonkeedii & cibaadada Allaah (Sw) oo hormuud ay ka tahay Salaadda.

Saxaabada Rasuulka (Scw) iyaguna waxay ka hadleen ahmiyadda guurku leeyahay & qiimahiisa, Saxabiga Cabdullaahi Ibnu Mascuud (Rc) wuxuu yiri: "cumrigeygaba haday ka hareen toban cisho oo aan heli karayaba waxaan ku guursado horay baan ka sii guursan lahaa buu yiri Cabdullaahi (Rc)" Saxaabigu (Rc) wuxuu nadareensiinayaa ahmiyadda uu leeyahay guurku, xitaa haddii maalmo la ii qabto oo dhimashadaada ayey ka dhimantahay la igu yiraahdo waan guursan lahaa buu yiri si aanan fitno ugu dhicin.

Abuu Bakar (Sadiiq) (Rc) wuxuu yiri: "Allaah (Sw) waxaad ku adeecdaan inaad amarkiisa qaadataan oo

aad guursataan, guursada & u guuriya labadaba Qur'aanka waa ku sugantahay oo amarku waa ku yimid, marka Saxaabiga Abuu Bakar (Rc) waxa uu leeyahay Allaah (Sw) amarka ka qaata; isaguna arrinkuu ballan qaaday ayuu idiin fulin doonaaye"

Cumar Ibnu Khadaab (Rc) wuxuu isana yiri: "ciyaalka badiya oo dhasha kordhiya magaranaysaan cidda la idinku arzaaqayee, waayo arzaaqaddu oorida & ubadka waa ku badataaye iska guursada walaaca & walbahaarka iska daaya". (faa'iidada guurka waaye).

Ibnu Cabaas (Rc) wuxuu yiri: "qofka cibaadeysanaya cibaadadiisu ma dhamaystiranto jeer uu iska guursado oo uu xaas yeesho ayuu leeyahay Saxaabigaan (Rc).

Qazaali wuxuu leeyahay "arrimaha nolosha qoyska wanaajiya keenana xaasku inuu aad u sii jiro oo muddo dheer labada qofi ay wada noolaadaan waxaa ka mid ah sideed arrimood iney kulmaan; diin labada qofi ay leeyihiin oo cibaadadooda & camalkoodu uu wanaagsanyahay, akhlaaqdoo fiican, quruxdii labada qof, meherkii fududaa, iyaga oo isku dhalaya, bikaaranimadii, nasabadeedii wanaagsanayd & inaaney ahayn qof aad u fogoo shisheeyaa ahoo qofka aanan ka naxayn", Cutubka Xulashada ayaadna ugu tagaysaan.

Ibnu Qayim (Rh) wuxuu yiri: "qofka inuu dumarka jeclaado oo uu guursadaa insaanka dhamaystirkiisa ayay ka mid tahay buu yiri, hadduu xaggaa u dhaqaaqi waayana waxbaa ka dhiman ayuu leeyahay, waana ahmiyadda guurku leeyahay ayuu ku tusinaayaa.

Ibnu Cabaas (Rh) isana wuxuu yiri: "umadaan kuwa ugu kheyrka badan waa kuwa ugu ooryo badan, mana ahan ubadka kuwa dhedig in laga naxo'e oori badanidu iyaga ayayba ka imaysaa , marka umadda kuwo ugu dhedig badan oo ugu xaasas badan ayaaba ugu kehyr & wanaag badan". in laga naxo ubadka kuwooda dhedigga ahna waa caado dadkii hore ee jaahiliga ahaa.

Marka ahmiyadda guurka sharciga ah aad bey u badantahay oo laguma soo koobi karo weedh ama qoraal koban, qofku markuu lamaanihiisa helana wixii uu tabayay ayaa meesha ka baxaya waanu farxayaa waxaana uu dareemayaa inuu helay lamaanihiisii uu mudada dheer raadinayay, markuu helana waxaa u bilaabanaysa nolol aduun midda ugu qiimaha badan.

Faa'iidada Guurka

Mowduucaan guurku dadka dhan waa wada khuseeyaa umana kala soocna, dumarka & raggaba, dhallinta & waayeelada intaba waa wada taabanaayaa, dadkuna waxa ay u qeybsamaan saddex nooc oo kala ah: dad soo tijaabiyay islamarkaana garanaaya guurku wuxuu yahay isla markaana guurka & arrimhiisa ladoonaayo in laga hadlana garanaaya & qeyb wali u heelan guurka oo hadda maskaxda ku haaya kuna taamaya maalin ay ahaataba inuu gaaro noloshaas macaanida & daganaanshaha badan ee laga dhaxlo wanaagyada faraha badan, qolyaha ugu dambeeya ee sadexaad oo ah dad laga yaabo wali inaaney gaarin guurka & xaaladihiisa, balse dadka gaaray guurka wadwaditaankooda & wixii markii horaba Allaah ku abuuray oo fidra ah iska jecel ka sheekeentiisa guurka & guud ahaan arrimaha qoyska laxiriira.

Guurku hadaba qeybaha kala duwan ee dadka rag & dumar intaba waa wax ay wada doonaayaan gaaritaankiisa mar ay ahaataba sidaan horay u soo sheegnay walibana aad u wada xiiseynaayaan, sababtoo ah marna waa fidra bashariya oo Allaah Subxaanahu Watacaalaa dadka ku abuuray, marna waa dalab sharciya oo Allaah Subxaanahu Watacaalaa

Sharciyadii & Diimuhii uu soo dajiyay ayuu ku daray waxyaabaha aasaasigaa ee aadka u weyn sida guurka.

Labadaa arrimood oo sida weyn isku kaashaday ayaa waxey keeneen in dad aad u fara badani ay ka hadlaan guurka & arrimihiisa, waxeyna isugu jiraan dad uga hadlaaya dhanka aragtiyada kala duwan ee sharciga & kuwa kale oo uga hadlaaya caadifadda bashariga ah ee aaneey sharci & diini xakameyneynin aaney jirin.

Intaas kadib Shucuubta & qeybahooda & deegaanada kala duwan ay ka soo jeedaan & waliba xilliyadii kala duwanaa ee la soo maray waxaa ka dhashay tijaabooyin aad qiimo weyn u leh oo laxiriira guurka & arrimihiisa kala duwan si loo gaaro guushiisa oo faa'iidada ku jirta qof walba u xaqiijiyo.

Sidaa daraadeed qiimaha guurka & ka sheekeyntiisu leeyahay waxaa nooga filan dadka intiisa badan waxa ay aad u jecelyihiin akhriska inta badan buugaagta ka hadasha guurka & xaaladaha gaarka ah ee soo mara qoysaska ku nool aduunka kuwaas oo isugu jira qaar noloshoodu hagaagtay & kuwo caqabado kala duwan soo wajaheen intii ay wada noolaayeen, midkasta oo ka mid ahna waxaa laga dhaxlaa faa'iidooyin isugu jira ku waantoobid & ku dayasho ku gaarsiin karta nolosha aadka u wanaagsan ee guurka laga helo.

Guurka tilmaamaha wanaagsan ee lagu garto waxaa ka mida dadku aad beey u wada faraxsanyihiin marka guur laga hadlaayo, goobaha guurka looga hadlayo waxaa aad u soo buux dhaafiya dhallinyarada kuwaas oo si aad u daneynaaya ka hadalka arrimaha guurka.

Hadaba waxa dadku intaa oo dhan ka hadlayaan loogama wada hadli karo ama baahidiisa loogama bogan karo qoraal ama sheeko gaar ah, balse waxaan ku soo koobi doonnaa qormadeenaan qiimaha & ahmiyadda weyn ee guurku u leeyahay bulshadeenna.

Wax waliba oo dunidaan lasameynaayo dan & ujeedaa laga leeyahay, qofka ganacsiga galay waxa uu doonayaa inuu faa'iido weyn ka helo, qofka siyaasadda galaya oo intaas xoolo ku bixinaya wuxuu hiigsanayaa kursi & jago lacago badan wadata oo mas'uuliyad weyn & magac u horseeda & horumar wanaagsan.

Qof waliba oo howl galaya gaar ahaan howl aan sahlaneyn sida guurka oo kaleeto waa inuu jiraa wax uu culeyskaas oo dhan u xambaarayo, jidkaas dheerna uu ugu sabrayo oo faa'iido & natiijo lataaban karo uu hiigsanayo waa iney jirtaa si uu isku giijiyo markasta.

taasi waa arrinka koowaad ee faa'iidada guurka laga dhaxlayo, tan labaad guurku waxa uu kaga

duwanyahay arrimaha kale oo dhan waxaa ka mida 99% hadafkii laga lahaa faa'iidooyinkiisa wax baa laga gaaraa, halka ay dhacdo aduunyada howlaha kalee lagalaayo in badan oo ka mida inaan waxba laga gaarin oo khasaarooyin badan lagala kulmo markasta.

Sidaa darteed odayaashii Soomaaliyeed wey soo uruuriyeen oo waxa ay dhaheen "wax lagu talo xumaado guurka ayaa ugu fiican" waayo wax kale hadaan laga helin oo reerkii dhamaa uu burburo laakiin ilmo kuu dhasho waa faa'iido aad u weyn, sidaa darteed guurku badanaa faa'iido darro manoqdo oo wax badan ayay ka faa'iidaan ciddii guursata.

Hadaba guurka ugu yaraan shan faa'iido ee uu leeyahay ayaan rabaa inaan halakaan ku soo gudbiyo haddii Allaah (Sw) inoo ogolaado waxayna kala yihiin:

Faa'iidada koowaad ee guurku waa ilmo inuu Allaah kuu hibeeyo, waayo faa'iidada ilmo inaad dhasho ama yeelato wax sahlan maahan, ilmo inaad dhasho lafteeda waxaa ku jirta shan faa'iido waxaana ka mida Allaah Subxaanahu Watacaalaa oo raalli kaa ahaada, waana arrin dadka badankiis aaneey garanaheyn sida ay raalli ahaanshaha Rabigood ugu raadin lahaayeen ilmaha ay dhaleen, waana muhiim inuu qofku uu barto arrinkaas.

Tusaale ayaa jira aad u qiima badan oo culimadeenna qeybo ka mida ay ku soo qaataan arrinkaan, waxaana weeyaan tusaalahaasi haddii lagu siiyo dhul aad beerato waxii aad ku beeran lahaydna laguugu daro, waxaad adeegsan lahayd oo kuu fududeyn lahaa dhulkaas inaad beeratana lagu siiyo, hadaba ciddii intaas kuu diyaarisay waxey jeceshahay inaad sida saxdaa uga faa'iideysato oo aadan khasaarin fursadda.

Hadaba beertu waa dumarkii waxaa kuu abuuray Allaah, miruhuna waa shahwadii ilmuhu ka dhalanayeen, Rabbigaa yaa kuu abuuroo kugu beeray, risiqii & asbaabtiina waa uu ku siiyay, marka haddii intaa la isugu kaa dubariday inaad meel banaana oo cidlaa aad waxaaga ku khasaarisaahi waa kuu doqonimo & nimcooyinka Rabbigaa ood dafireyso.

Tusaale kale oo kugu filan, qofkii raashin & hilib inta loo diyaarshay qaadadii & mindidii uu ku cuni lahaana lasiiyay ee ciidda darsaday waa dhib, meelkasta oo aad joogto gabdhihii baa jooga oo u diyaarsan wiilal fiicanoo dhistoo dhaqda oo reer ay u noqdaan, oo ilmo ay u dhalaan oo soo dhaweeyaan ama kool kooliyaanoo nolol wanaagsan oo aad u saraysa siiyaan.

Hadaba gabdhihii waa diyaar oo Allaah (Sw) ayaa beer noogu tilmaamay, beertaasna waxey kaga duwantahay

beeraha kale een naqaano waxaa weeyaan beeraha kale bariis, ganleey, masago, qamadi & wax lamida ayaa ka soo baxa, laakiin beertani waa beer bili'aadam ka soo baxayo waana warshadda ugu qaalisan ee aduunyada waxa ugu qaalisan soo saarta, waa warshad iyada oo kale aadanuhu aaneey sameyn karin haddeey isku wada tagaan ama xitaa qalbiyadooda aaney kusoo dhaci karin iney sameeyaan warshadaas qiimaha badan oo bili'aadamka soo saarta, Allaah (Sw) ayaa gaar la ah.

Beertii waa diyaar gabdhuhuna naga badan, markaad aragto madaarista iyagoo kasoo yaacaya waad ku indha diraandiri, waxaana kugu soo dhacaya oraahdii abwaankeenii qiimaha badnaa Allaaha u naxariistee Abshir Bacadle oo ahaa "qof waloow hal ama laba ka qabo yaan lagaa qadine" oraahdaas waxaan ka fahmi kareynaa sida ay noogu heelan yihiin hablaheennu & sida uu Allaah (Sw) inoogu diyaarshay wixii ku saabsan ama laxiriira nolosha guurka oo idil.

Hadaba beertaas oo sidaan horay u soo sheegnay Allaah (Sw) uu inoo diyaarshay & mrihii beertaas lagu tacbi lahaa oo ah shawada dhabarkaaga ku jirta oo aan shaqo weyn kaaga baahneyn inaan beertaas la aado maahine inaad ka faa'iideysan weyno waa inoo doqonimo, shahwaduna waa waxa habeen & maalin kuleylkeeda laga fadhin la'yahay oo hadaanan meeshii

Allaah (Sw) ugu talagalay aan lagu gudan ay ka dhalaneyso cuduro & ciqaab aan ka kabsasho lahayn & fasaad aad noogu faafa oo fidneeya nolosheena oo idil.

Waxaa kaloo jira dad heysta xoolihii & xeeladihii kale ee guurka looga baahnaa oo caafimaad qaba, hadana war-wareeg & waxaan Rabbi ka rabin ku rafaadsan, Allaah (Sw) waxa uu ku siinayo xikmadda uu ka leeyahayna waxaa weeyaan inaad wax ku qabato weeye, waayo aadanahaan ilaaheey caabudaya ee jiraya waligooda Allaah (Sw) aabe & hooya la'aan waa wada abuuri karay, laakiin iney taran yeeshaan oo ay is dhalaan, dadkii sii jiro oo Allaah (Sw) dariiqa saxdaa lagu wada caabudo oo loo hogaansamo ayuu doonayaa, arrinkaasna waxaa lagu gaaraa guurka.

Sidaa daraadeed marka aad guursaneyso ood ilmo doonayso waxaa lagaa rabaa adigana wixii uu ku siiyay Allaah (Sw) oo nimcooyinkiisa ka midkaa kuuna diyaariyay inaad ka faa'iideysato ood raalli ahaanshihiisa ku raadiso markasta & meelkasta.

Sidoo kale faa'iidada guurka ku jirta gaar ahaan ilmaha waxaa ka mida in Suubane Nabbi Muxammad (Scw) lagu raalli galiyo oo waxuu jecelyahay laga wada shaqeeyo, waayo Suubanuhu isagaa sheegay oon qarin.

Waxaa u yimid nin xilligiisii sida Xadiith Macqal Ibnu Yasaar (Rc) ay ka warinayaan Abii Daa'uud & qeyrkii, wuxuu yiri ninkii: "Rasuulkii Ilaaheeyoow qof dumara ayaan helay taas oo saaxiib u ah Qurux & Nasab wanaagsan oo qoyska ay ka dhalatay waa dad lagu sheego sharaf & wanaag oo idil, waana qoyskii gabar laga guursan lahaa sidoo kalana quruxdeeda waa Maasha Allaah laakiin hal ceeb bey leedahay gabadhu waana madhasho oo loogama fadhiyo in ay dhasho.

Nabigu (Scw) wuxuu ku yiri ninkii iska daa, sidaa daraadeed qofku isaga oo qurxoon ayuu ceebo badan yeelan karaa, qofaan ceebo lahayna ma jiro aduunkaan.

Tusaalaha labada oday ee Soomaaliyeed hadaan soo qaadano Ow Yuusuf Barre aan ku horeyno "gabadhu iyadoo qurxoon ayey noqon kartaa basari ama araajo" "Qamaam Bulxanna wuxuu leeyahay "gabadhu iyadoo qurux badan bey fudeyd aad u daran oo buubaya noqon kartaa" markaas bey labadaas gabdhoodba ka dayriyeen odayaashaan Soomaaliyeed.

Oday Qamaam Bulxan hadaan ku hormarno wuxuu doonay gabar qurux badan isagoo ka bixiyay lacag aad u fara badan kadibna waa ku fududaatay, isagoo xoolihii faraha badnaa kashalaysan baa dhibaad loo soo doontoo walaalkeed u soo galbaday, waagii hore marka

lacasheynayo si dadban & sarbeeb baa wax la isugu sheegi jiray, waana la is fahmi jiray waliba, hadaba hadaladii Qamaam waxaa ka mid ahaa "baal goronyo waa lagu ogaa inuu bidhaamaaye, barbara maalintuu tagay waxaa bi'iyay miisaane, bir koley ku tahay sheyga fudud beeso lagu waaye, boos waxaan jeclaadaba markaan baayacaan nacaye, wada ba'an bili'aadamkii midkaad waayo barataaye".

Wuxuu leeyahay Oday Qamaam gabadhiinu aad bey u qurxoon tahay waana middaan ku guursaday quruxda laakiin aad bey u fududahay, fudeydkaasna kumaan ogeyn gabadhiinna, waase iga hoos baxday arrinkaas.

Ninkii gabadha ladhashay markii habeenkii laseexday dhagihiisuna sarbeebtaas ku dhaceen meeluu joogo uma taal isla habeenimadiiba meesha wuu isaga tagay.

Ow Yuusuf Barrana dhalinyaro yar yara oo galabtii intey caraabaan shukaansi & haasaawe tagaya buu wuxuu siiyay kalimado dardaarana oo aad u qiima badan wuxuuna ku yiri: "guduud looma raaco haween gabalba waa ceyne, isu gaadhay gabadhaad tiara meel un baa go'ane, gaboodleyda gaashidu ku taal labada goon yoodba, ey maradu geyn geyn mantahay guur aan ka la'aado" ayuu ku war oo dhan ku soo idleeyay.

Wuxuu leeyahay Ow Yuusuf Barre tan maradeedaba wasaqda ka dhaqan la' ee areebanimada & arrimahaas kale een soo sheegay ku tilmaaman guur aan ka la'aado oo aan iska joogo gurigeyga inataan reer wasakhaysan ku dhex noolaan lahaa, waayo wasakhdu waa cudur.

Hadaba Xadiith-kii Macqal Ibnu Yasaar (Rc) kana hadlayay ninkii Subanaha u yimid ayaan daba joognaye ninkii wuxuu ku yiri Rasuulkii Ilaaheeyoow inantu waa qurux badantahay laakiin meel bey la'dahayoo waa madhasho, Rasuulku (Scw) wuxuu ku yiri gabadhaas iska daa, ninkana qalbigiisa yaa aad u raacay inanta meel bey kaga dhaganeyde inta Suubanaha ku soo laabtay buu ku yiri Rasuulkii Ilaaheeyoow gabdhaas maguursadaa, markaas buu Nabigu (Scw) yiri iska daa gabadhaas guurkeeda.

Ninkii mar sadexaad ayuu Nabiga (Scw) ku soo laabtay ileen wax ka tan weyn baa wada ninka oo riixayee markaas buu Suubanuhu (Scw) wuxuu yiri iska daa oo waxaad guursataan gabdhaha dhalmada badan maxaa yeelay Qiyaamaha Nabiyada nin waliba umaddiisa ayuu tartan ku gali, anigana waxaa doonayaa inaan noqodo midka ugu umad badan maalintaase guursada gabdhaha dhalmada badanoo nimankooda aad u jecel...

Sidaa daraadeed Suubanuhu (Scw) waxa uu hiigsanayay oo Anbiyada kula tartamayay oo ah umaddiisa inaad badiso wuxuu jeclaa markastana aad ka shaqeyso Nabi Muxammad (Nnkh) iyada nafteedu hadaf yar maahane taas waa in la ogaadaa guurdoon.

Wali waxaan ku jirnaa faa'iidada ilmaha laga helaayo, waxaa jirta faa'iido saddexaad oo ilmo in ladhalo laga helo, taas oo ah hadii aad dhimato oo tii Allaah kuu timaado oo Aakharo aad aado, haddii ilmo wanaagsan ee kuu soo duceeyo uu Rabigaa ku siiyo waa faa'iido aad u weyn oonan qofkastaahi heli karin qof Allaah (Sw) uu hibo u siiyo oo uu u qadaro maahine.

Xadiith-kii Abuu Hureyra (Rc) ee Muslim & Qeyrkii warinayeen ayaa wuxuu ahaa "hadduu dhinto Ibnu Aadamku waxaa go'a oo dhamaada camalkiisa ilaa saddex qof maahine" waxaa ka mid ah saddexdaas qof walad saalix ah oo kuu soo duceeya markaad dhimato ducadiisuna Aakhara kuugu timaadoo qabriga laguugu nuuriyoo miisaanka xasanaadka laguugu badiyo, marka faa'iidadaas weyn maahan wax sahlan, waana wax wanaagsan oo qof walba laga doonayo inuu raadiyo si uu u gaaro faa'iidadaa qiimaha weyn.
Hadaba ilmaha aad dhasho adigu hadaad ka soo baxdo waajibkaagii tarbiyada waxaa laga dhaxlaa faa'iidadaas qiimaha badan ee weyn taas oo ah inuu kuu soo

duceeyo markaad dhimato oo tii Rabigaa kuu timaado, waxaa kaloo jira dhamaan wixii wanaaga ay sameeyaan ilmahaagu wax baad ku leedahay maxaa yeelay Suubanuhu (Scw)) wuxuu leeyahay qof wuxuu cuno waxaa ugu xalaalsan wuxuu shaqeystay, caruurtiinuna waxay ka mid yihiin waxa aad shaqeysateen waayo Allaah (Sw) ayaa idinka beeray.

Sidaa daraadeed ilmahaagu waa waxaad adigu shaqeysatay, kheyr, wanaag & darajo fiican hadduu gaarana waa wax adiga ku anfacayo, balse hadduu xumaado oo adigu aad ka soo baxdo waajibkii barbaarinta wax dambi ah kumaad lihid oo bari yaad ka tahay wixii uu haleeyay oo isagaa loo qabsan doonaa mas'uulna ka ah wixii ka halaaba isaga.

Faa'iidada afaraad ee ubadka waxaa weeyaan haddii ay kaa saqiiraan waa kuu shafeecayaan Aakharo ilaa laga aqbalo shafeecadooda sida Imaamu Muslim & qayrkii warinayaan, taasina waa faa'iido qiimo badan.

Faa'iidada shanaad ee ubadka waxaa weeynaa Aduunka yaad ku intifaaceysaa, mar waa quruxda & qanaacada qalbigaaga; sababtoo ah markaad ubad dhasho qalbigaagu aad buu u qanci, quruxna waa kuu sii dheertahay sababtoo ah waxaad dareemeysaa inaad hooyo ama aabe aad noqotay oo naftaadu aad bey

kalsooni weyn & caafimaad u heleysaa, halka marka labada qofood ilmo isku dhali waayaan ay dareemayaan nolol aan qanaaco badan lahayn oo laga yaabo iney kala tagaan oo qofba qofka kale ku yiraahdo aan kala daneysano, waxaa laga yaabaa ineysan qorneyn inaan wax isku dhalno oo markaan kala tagno qofkasta Allaah (Sw) uu siiyo ubade.

Waana wax dhaca laba qof oo ilmo isku dhali waayay markey kala tagaan in Allaah (Sw) uu meelo kale ubad ka siiyo & sidoo kale kuwo isku sabra oo Allaah (Sw) uu siiyo, ujeedaduna maahan haddii ayaan inta la isla joogo ubad lakala heli waayo in lakala tago ee waxa qofku raadinayo waxaa weeyaan ilmo uu dhalo inuu mar uun arko, si uu u dareemo nolosha aduun raaxadeeda & il qabowsigeeda.

Tusaale gabar baa dhakhtar u tagtay markaas buu ku yiri waxba dhalimeysid waayo ugxaantaada ilmuhu ka abuurmaan waa daciif, sidaa daraadeed waxaad ku dhali kartaa in islaan kale ugxaanteeda inta laguu soo qaado oo biyihii ninkaaga lagu daro in lagugu beero, gabdhii waxey weydiisay culimo iney banaantahay, waxeyna ku dhaheen culimadii gabdha kuuma banaana waayo calooshaada ayaa lakireystaye ilmahaan adigu malihid, hadaba qofkaan maxaa ku qasbaya in dadaalkaas oo dhan uu sameeyo? wuxuu

dooni ilmo uu dhalay inuu arko, marka inaad ilmo dhasho waa quruxda aduunyada & qanaacada qalbigaaga, waxaana dareemi kara qofkii wax dhalay.

Sida dharka & shey kasta oo aad u qurxoon loo fiirfiiriyo ka daran ayaa ilmaha loo fiirfiirshaa, tusaalana waxaa kuugu filan waalid waxaan aragnaa markasta ilmhiisa koolkoolinaya oo marna qaadaya marna dhigaya, marna dhunkanaya marna laciyaaraya oo hadduu ka ordo ka daba ordaayo, intaa waxaa kuu dheer waad adeegsan biyaha ii soo qabo, kabahaas ii soo qabo, adeegaas iiga doon meel hebla, waxaadna tahay qof malik ama boqor ah oo awaamiir bixinaaya ciidana hoos joogo, marka faa'iidada ilmuhu mayara.

Adeegga caruurtu waa manfaca aduun oo aad u weyn lana soo koobi karin, waayo adigu markasta makici kartid oo howsha ay ubadku qabtaan maqaban kartid, ilmo yarna wax ka adeeg fudud kana shaqo badan lawaa, madaalo, macajiso, fag intuu dhaho yuu daqiiqad kuugu keeni wixii aad u baahneyd, ilmaha yari inuu baahdo oo calooshu marantahay maahine kub daala malahan, marka ilma yar oo adeegyadaas oo dhan kuu qabto waa manfac aad u weyn oo qiimo leh.
Haddii aad weynaatana qof ku haya oo ku biila oo markaad xanuunsatana isbitaal ku geeya kaana war qaba buu kuu noqoyanaa, markaad yarayd sidaad u

daryeeleysay ood ugu dulqaadaneysay buu kuu daryeeli kuuguna dulqaadan markaad duqowdo, waxaa laga yaabaa inaad aragtay waalid weynaaday oon wax ilmaa dhalin, markuu yaraana ku hamin jiray inuu arko ubad uu dhalo, markuu weynaadana waayay wax haaya oo u adeega, marka inaad hesho awlaad kuu adeegta kuna il qabowsato oo qurux & qanaaco qalbina aad ka hesho maahan wax sahlan, waana wax Allaah (Sw) looga mahdiyo markasta & meelkasta oo lajoogo.

Hadaba isku soo uruuriyoo inaad guursato oo guurkaas Allaah (Sw) uu kaa siiyo ilmo ayaa kaligeed faa'iidaa, ilmahaas faa'iidadaa ayaa waxa ay yeesheen kaligood shan faa'iido oo kale oon horay u soo sheegnay, marka ilmo inaad dhasho kaliya ayaaba wax loo gursadaa, oo ku gaarsiin faa'iidooyinkaas badan.

Arrinta sadexaad ee guurka laga faa'iidaayo waxaa weeyaan nafta & qalbiga oo in loo raaxeeyo oo ladajiyo u baahan, nafta bili'aadamku dhib & mashaqo joogtaa kuma jiri karto, waxay u baahantahay mararka qaar in ay nasato oo cayaarto oo ay haasaawdo (sheekeysato), waxaad aragtaan inta badan in dowladaha waaweyn ay ka hadlaan dalxiis & meelo lagu nasto oo nafta lagu qalbi dajiyo waayo shaqo maantoo dhan kuma jiri kartid, maantoo dhan casharo kuma jiri kartid, maantoo dhan siyaasad kuma jiri kartid, markaad soo

daasho shaqadaad doonto haaye waxaad u baahantahay meel wanaagsan oo aad ku nasatoo nafta ugu raaxeyso oo aad ku hawa badalato, meesha ugu wanaagsan ee lasoo ogaaday in lagu hawo badashano oo lagu nastana waaxa weeye reerkaaga & gurigaaga.

Sidaad u daalantahay ood shaqo & howlo kale ugu jirto markaad gurigaaga timaado oo soo dhaweyn wanaagsan laguu sameeyo, oo lagu kool kooliyo ayaad wixii dhib & mashqo ahaa halmaameysaa, hadaba soo dhaweyntaas ay xaaskaaga wanaagsani kuu samayneyso ayaa waxaa ka mid ah hadal dabacsan oo aad u qabow una naxariis badan, cunto diyaara oo macaan badan oo laguu diyaarsho, sheeko qosol & muuso (waji furnaan) wadata oo lagugu soo dhaweeyo.

Intaas & ka badan marka qofka lagu soo dhaweeyo waxaa ka dagaya culeyskii & haddii caro haysatay taasoo uu ka soo qaaday goobtii shaqada ee uu ka yimid & hadduu wax baranayay amuu dad wax barayay, qofkaas loo sameeyay intaas oo soo dhaweyn & qalbi dajinta wanaagsan wuxuu isaga dhan galayaa jawi dagan oo aad u macaan, kana duwan goobtii uu ka yimid oo dhibta & mashaqada badnayd, markuu xoogaa aan badnayd reerkiisa & caruurtiisa lajoogo waxaad arkaysaa qofkii oo aad u dagay, una fur

furmay oo haddii shaqo cusub loo diro si fiican u soo qaban kara isla markaasba, waana faa'iidada guurka.

Marka sidaa daraadeed inagu markaan soo daalno waxaan inta badan tagnaa goobaha sheekada maalaa yacnigaa & fadhi ku dirirka, waxaadna ogaataan hamiga qofku aad buu u kala duwan yahay una kala fogyahay oo u kala dareen badanyahay marka gurigiisa & reerkiisa uu joogo & marka goobaha kale uu joogo.

Banaanka markaad joogto waxaad ku hamineyso amaad ka fakarayso & fakarka guriga yaallaahi waxba isaga dan maahan oo waa kaaf & kala dheeri, markaad gurigaaga joogto waxaaba laga yaabaa hadaad damacdo inaad wax kale samaysato in lagu yiraahdo xaaji waa xilligeenii ee jooji waxaad hayso, markaas baad sheeko & laciyaarid caruurtaada & xaaskaaga galaysaa, sidoo kalana waxaad dareemeysaa qalbi wanaagsan & daganaan, taas oo aadan dareemeynin marka meelaha kale aad joogto, waxaa kaloo kuu sii dheer daganaanshihii Allaah (Sw) uu ku tilmaamay kitaabkiisa qiimaha badan ee idiin dhaxeeyay adiga & xaaskaaga ee faa'iidada ugu weyn ee guurka laga helo.

Hadaba haweenkii waxaa Allaah (Sw) uu inooga dhigay meel aan ku xasilno oo aan ku dagno markaan mashaqo & dhib lakulano, iyagana sidaas oo kale.

Sidaa daraadeed daganaanshahaas qiima badan & xasilitaankaas waxa uu isugu jiraa noocyo badan oo waxaa ka mid ah in qofka markuu gurigiisa tago ay u diyaariso xaaskiisa wanaagsani dhar uu isaga badalo kuwii uu qaatay maalin ama laba ka hor, waxaa laga dhunkan dhabanada si uu u dareemo xaas wanaagsan inuu qabo oo ka dajisa culeyska & cabashada uu qabo.

Waxaa intaa u sii dheer qaababka kala duwan ee inagu aanan suureysan karin ee xaaska wanaagsani u samayso ama ula dhaqanto ninkeeda, taas oo ah tilmaamaha aadka u wanaagsan ee lagu garto xaasaska xilkaska ah , qadarinta weyna u heysa ninkeeda.

Guurdoon waxkasta oo dhib & culeys aad dareemeyso waxaa layiri hal mar oo soo dhaweyn & hadal dabacsan oo lagu yiri yaad ku halmaantaa, wax badan oo dhaqaalaa oo kaaga baxay reerka aad dhistay oo ku xanuujinayayna habeen gogol ah ayaa ku halmaansiisa.

Marka naftaan in loo raaxeeyo oo ladajiyo way u baahantahay haddii wadada saxdaa loo maro, laakiin haddii waddo khaldan loo maro waa ceeb & ciqaab aan laga kaban doonin aduun & aakharaba, marka qofkasta waxaa laga doonayaa in uu saacadihiisa kala qeybiyo oo marna cibaadeysto oo uu ka soo dhalaalo wixii Rabigiis ka doonaayay, marna uu aduunyadiisa

raacdeysto uuna shaqeysto lana cayaaro caruurtiisa & xaaskiisa oo danahooda & daryeelkooda ku dadaalo waayo waa mas'uuliyaddiisa inuu howlahaas qabto.

Arrinta afaraad ee guurka laga faa'iidayo waxaa weeyaan waa iskaashi & isku tiirsanaan, waayo nolosha aduunyada qofna kaligii makoobi karo oo meel madagi karo, guurkuna waa culeys weyn oo kaa dhacay oo wixii howl guri ahaa ee adiga naftaadu qeyb ka ahayd ayaa lagaa haayaa oo xaaskaaga wanaagsani kaa qabanaysaa si aad shaqadii banaanka u soo qabato.

Waxaa ka mida howlaha mashaqada badan ee guriga yaalla ee hooyadu hayso dhar dhaqidda, guri nadiifinta, howsha ilmaha oo iyada kaligeed mashqo badan wadata oo aanad qaban karin adigu, cunta karinta, firaashka gogosha & howlo kale oo aan lagu soo koobi karin inta ayay hooyadu ka heysaa guriga taas oo ay ku amaanantahay ajar weyn & xaq ka badan aabahana ay kaga heshay Allaah (Sw) agtiisa sida uu Suubane Nabi Muxammad (Scw) noo sheegay.

Ninka iskaabulada ah ee aanan reerka laahayn howsha & mashaqada u taalla ee sugeysa waxaa ka mid ah inuu jikada galo oo wax karsado, inuu firaashkiisa isagu hagaajisto, inuu weelasha dhaqdo uu wax ku karsanayo ama ku cunayo, inuu dhaqdo dharkiisa oo

nadiifsado, waxaas oo howl ah waa dhib & dhabar-jab ay naga haayaa habluhu, waana faa'iidooyinka waaweyn ee lagu qabo guurka & gabdhaheenna qiimaha leh kuwaas oo had & jeer u heegana howlaha.

Hadaad aragteen ninkii mar guursada ee guurku ka xumaado ma istaago oo wuxuu doonayaa inu dib ugu laabto noloshaas guurka ee qiimaha badan, waayo waxaa sugeysa hadduu kali sii ahaado noloshaas mashaqada badan ee laga fiicanyahay in lagu sii jiro, waxaana kheyr fara badan helay qofkii Allaah (Sw) uu ka koriyo noloshaas oo guur hagaagsan hela & xaas uu nolosha laqaybsado oo nasiino & nafaqo wacan siisa.

Marka guurka faa'iidooyinkiisa maahan wax lakoobi karo oo qofkii guurku ka halaababa waa sii ordayaa oo wuxuu doonayaa inuu reer kale islamarkiiba samaysto, waayo wuxuu doonayaa shaqada & sheekada qof lawadaaga oo wehlisa, xasilooni & naxariisna siisa.

Qofka Xaaska leh markuu gurigiisa yimaado waxaa kaga horeysa duco qabto uu niyadda ku haayo iney hagaajineyso howshiisa oo diyaar u ah kana mayrta wixii mashaqo & dhib ahaa ee uu ku jiray sida xamaaligii & biil raacdeyntii, siyaasaddii, casharo bixintii, maamulkii, macalinimadii & shaqooyin oo idil.

Qofku markuu gurigiisa tago wax yaabaha naftiisa qanciya oo walwalka uuna ka qabin waxaa ka mida iney diyaar u yihiin dhamaan wixii uu filanaayay sida gogol goglan, guri udgaya, cunto diyaarsan, dhar dhaqan oon jactad lahayn & ilmo carfayoo cayaaraya kana caafimaad qaba wasaqda & ufta oo idil.

Sidaa daraadeed qofkaan haysan noloshaas qiimaha badan waxaa ka maqan wax weyn oo u horseedaya iney hagaagaan howlihiisa oo dhan, mana gaarayo nolosha dhadhankeeda qofkii aanan guursan oo walaac & walaahow ayuu ku jirayaa markasta & meelkasta.

Mashaqada & mushkiladaha qabsada qofka aan guursan waxaa ka mida in howlahaas aan soo sheegnay oo dhan isaga ay sugayaan sida dhar dhaqow, cunto karin, gogol goglid, guri xaaqow & nadaafad intaba, waana howl inta badan aaney raggu wada qaban karin oo aad u dhib badan Allaahna uu u fududeeyay haweenka waana fadli & farsamo ay yaqaanaan.

Dhallinta qaar ee shaqeeya oo aanan xaas u joogin wax yaabaha ay sameeyaan waxaa ka mida in dharka oo kale ay geystaan meelo lagu dhaqo oo lagu feereeyo, caqabadaha mararka qaar qabsada waxaa ka mid ah inuu waqti u waayo inuu geeyo dharka goobahaas oo

shaqo uu aado subaxa hore markuu soo rawaxana laga xiro goobahaa dharka lagu dhaqo oo uu haleeli waayo.

Laakiin marka guriga gabari kuu joogto oo aad aaddo shaqadii banaanka ahayd & raadinta masruufkii reerka, shaqadii dhibka badnayd ee ku sugeysay iyadaa kaaga filan oo kuu qabanayso walwalna kuguma hayso waliba si hagar la'aana ayaa howshaas laguugu sii qaban oo waxaad ku soo laaban xaafadda iyadoo wax kasta diyaar kuu yihiin kuuna sii dheertahay daganaansho nafeed oo aad u qiimo badan.

Gabadhana waa sidaas oo kale oo waa ay ku nasaneysaa ninkeeda oo wixii mashaqo & dhib ka soo gaaray howlihii ay haysay maantoo dhan waxa ay ku halmaameysaa hoyaadka habeenkaas haddey kali ku tahay, haddii lala qayb sadana habeenkeeda ayaa ku filan oo kaafisa kuna kifaaxeysaa! haddii iimaan jiro!.

Marka noloshu waa iskaashi, ninkuna gabadha dhib ayuu ka qaaday oo maxaa lacunaa & sideen u noolaanaa walwalkaas waa ka haray iyada, gabadhuna howshii guriga ee ka mashaqada & madax xanuunka badneyd tiisa way ka reebtay oo waa ka haysaa, sidaa daraadeed noloshu waa tacaawunkaas & iskaalmeysigaas qiimaha badan ee labada ruux ee is qaba isna jecel ay sameyaan had & jeeraale.

Saxaabiga Cumar (Rc) ayaa waxaa laga wariyaa haweenta oo xoogaa ku qeyliday inuu yiri wax badan ayay naga haayaan haweenku, waxaana ka mida dabka tanaarka & jikada, dabka ilmaha & buuqooda waayo ilmuhu waa howsha ugu dhibka badan ee guriga.

Waxaana ka mida howlaha ilmaha markey xanuunsadaan waa matagayaan, waa shubmayaan, waa oynayaan habeen & maalinba isagoo xanuunsan & isagoo fiyowba, waxay soo kacayaan habeenkii amin dambe waa tanaa oo heegan bey u tahay adiguna waad iskakhuurinee oo waxaa laga yaabaa inaadan dareeminba soo kicistooda & dhibka ay isla marayaan hooyada & ilmuhu, sidoo kalana dab intaas oo dhan ka weyna waa iga haysaayoo waxa ay iga haysaa dabkii shahwada oo ahayd wixii intaas aan lawareegaayay oo aan doonaayay inaan helo meel wanaagsan oo aan ku guto oo Allaah (Sw) aan ku raalli galiyo.

Marka sadexdaas dab dumarka iga haysa waxoogaa hadey i yar kululeyso dulqaadku dhib malahan, waana waxa loo baahanyahay in aad la isugu dulqaado haddii reer ladhisaayo, hadaanse intaan caroodo iyada cayriyo sadexdaas dab ayaa igu soo fakan, waxaadna ogaataan hal maalin hadey xaasku kaa xanuunsato waxaad ogaan qiimaha ay lahayd oo aan aad loo soo

koobi karin, waayo hadey xanuunsato waxaa ku wada sugaaya howshii gudaha & tii dibadda.

Ragana banaanka ka soo shaqee maanto dhan baa u dhaanta in lagu yiraahdo labo saacadood ilmaha haay, dumarkana Allaah caadifadda uu ku beeraa loogu talagalay, marka noloshii qeyb dhan dhamaystir keedii, quruxdeedii & iskaashigeedii ayaa ka mid ah waxa loo guursanayo oo reer wanaagsan oo toosan loo wada dhisayo, kaas oo horsed u noqoda guul & gobonimo.

Faa'iidada shanaad ee guurka laga helayo muhiimkaana ah waxaa weeyaan shaqada aad u shaqeyneyso reerkaaga & biilka aad raacdeyneyso oo ah mas'uuliyad weyn oo ku saaran Allaah ayaad ajar uga heleysaa, ileen waa howl laguu diray oo lagaa sugayo, ilmihii guriga kuu dhoobnaa & hooyadii kaa haysay wixii culeys & caqabad ahaa ee adiga naftaada & gurigaba taallay waxaa kaa saaran mas'uuliyad taasoo ah inaad nafaqadooda raacdeyso ood raadiso.

Hadey ahaan lahaayeen biilkii & badarkii lakarsanaayay, hadey ahaan lahayd caanihii ay cabayeen caruurtu, hadey ahaan lahayd hoygii uu reerku dagi lahaa, waxbarashadoodii & barbaarintoodii & sidoo kale daawadoodii marka ay bukoodaan, waxaas oo culeys & mas'uuliyada oo kaa saran

reerkaaga hadaad u qabato sidii lagaa rabay oodna niyeysato waxaad ka heleysaa ajar weyn oon lasoo koobi Karin & amaan dadka aad lanooshahay ah.

Waxaa jira Xadiith Suubanaha (Scw) ay ka warinayaan Muslim & qayrkii oo micnihiisu yahay "shilin aad jihad & jidka Allaah (Sw) aad ku bixisay, shilin aad miskiin siisay & shilin aad reerkaaga siisay waxaa ugu ajar badan shilin aad reerkaaga siisay".

Sow ma aragtaan xitaa Jihaadkii Allaah (Sw) dartii loo dagaalamaayay shilinka lagu bixinaayo waxaa ka ajar batay shilinka xaaska & ilmaha aad ku nafaqeyneyso oo aad ku bixineyso, Saxaabiga Sacad (Rc) wuxuu Suubanuhu (Scw) ku yiri: waxaad bixiso oo aad reerkaaga siiso ajar ayaad ka heleysaa xitaa wixii aad afka u galiso islaantaada oo aad siiso ha ahaatee.

Hadalkaan culimadu labo siyaabood ayay u fahmeen, waxay qaar dhaheen waxaa loola jeedaa nafaqada aad reerkaaga siiso, qaar kalana waxa ay dhaheen cuntada inta gacantaada aad ugu qaado inaad xaaskaaga afka u galiso oo aad gacantaada ku siisaa laga fahmayaa ayay yiraahdeen, waana inay iyaga kaliya ku ekaato arrinku.

Reerkaaga markaad lajoogtana inaad wada cayaartaan ood wada qososhaan oo aad cunto isi siisaana wax

ceeba maahan, odaygu marka uu magaalada joogana waa oday, marka uu reerkiisa lajoogana inuu lacayaaro oo lacaweeyo oo la ordo ilmaha waa wax wanaagsan oo qalbiga ilmaha dhisa, marka xaafaddu waxa ay leedahay dabeecad & dhaqan u gaar ah iyada waxaana yaqaan dadka reeraha leh, sidaa daraadeed dhaqanka xaafadana lahaaw kii magaaladana lahaaw.

Ugu dambayn waxaa jira caqabado guurka ka sokeeya oo qofka guurdoonka ah ku hareereysan, tusaale waxaa lasheegaa nin geel leey ah ayaa yimid meel sadaqo laga uruurinayo, waxaana uu maqlay oraah ahayd qofkii sadaqo labaxa wax weyn ayuu heli oo waa loo labalaabi xoolahana Allaah (Sw) ayaa u badin, marka geelii uu lahaa ayuu mid ka mida bixiyay si Allaah (Sw) uu geela ugu badiyo, muddo ayaa geelii u badan waayay.

Wuxuu is yiri war wadaadadu mabeen bey kuu sheegaayeen aaway waa tanaa geelii waa badan waayee sidey wax u jiraan? Maalinkii dambe ayuu xanuunsaday ninkii geela bixiyay ee doonaayay inuu geelu u bulaalo ama u bato, xanuunka ku dhacayna wuxuu ahaa shuban oo aad u daran oo uu is yiri waaba bis oo waad dhimaneysaan adoon arag geelaagii oo bata, Allaah (Sw) wuxuu caafiyay ninkii, muddo ka dib ayaa geelii u batay ninkii, maalin dambe ayuu wuxuu soo maray wadaad kale oo taagan oo leh war xoolaha

hala baxsho oo masaakiinta halagu sadaqeysto, waayo xoolaha Allaah (Sw) ayaa idiin badine.

Fartuu taagtay oo sheekhii ayuu wuxuu ku yiri inaan arrintaan ka hadlaan rabaa, waa loo yeeray oo hadalkii ayaa lasiiyay markaasuu wuxuu yiri nimanyahow waa run waxa uu wadaadku sheegaayo waana wax uu isagu inoo akhriyay laakiin anigu waan arkay oo waan tijaabshay, geela ama xooluhu iney idiin bataan hadaad rabtaan shuban ayaa ka horeeyee ogaada!.

Marka guurdoonow geeli badanaayay haddii shuban ka soka maray, wixii aan ka soo hadlaynay oo faa'iidooyinkii waaweynaa ahaa in lagaaraahi maxaa ka sokeyn kara? Shaqo badan ayay u baahan tahay.

Ogaadana dahabka & dheemanta qaaligaa bilaasha laguma helo oo dadku iskama gurtaan, wixii qaali ah ayaana la adkeeyaa oo qiimo loo yeelaa, wixii lagu dhibtoodoo loo dhidido ayaa dheeftooda lagaaraa hadhowna lagu fara adeygaa, hadaba caqabadaha guurka ka sokeyn kara waxa ka mid ah dhaqaalaha, caqabadda dhaqaalahana waxaa sabab u ah labo arrin inta badan oo kala ah: midda koobaade waxaa laleeyahay noloshii waa adkaatay shaqooyinkiina waa yaraadeen, marka ninkii reerka biili lahaa ee mas'uuliyadaas qaadi lahaa maba helayaba masruufkii

reerka; waana wax jira in shaqooyinku adkaadeen oo sidii larabo aanan shaqo loo heleyn, waxaadse ogaataan dhallin yaro shaqo mayara lamana weyne waxaa batay waa danbigeenna, markaas baa noloshii oo dhan ciriiri soo noqotay ama dadku ay ku qanci waayeen nolosha.

Waxaadna ku garan kartaa noloshu in ay ciriiri noqotay waagii hore qof walba wuxuu ku noolaan jiray & isticmaalkiisii dib ha u eego, qof walba wixii uu masruuf u qaadan jiray ka badan yuu hadda qaataa ama cunaa ama uu xidhaa, wixii waagaas dadka deeqi jirayna hadda madeeqo, waxay xoolo & maal u yaqiineena hadda uma yaqaanaan, waagaas qofka waxa uu haysto waa uu ku qanacsanaa waana ku filnaayeen haba u yaraadaane, balse hadda inta badan dadku waxa ay haystaan iimaan kuma qabaan, dadkii kalana waxba uma arkaan waxa uu haysto qofkaan oo hunguri weyni & hanqal taag kale ayaaba lagu sii jiraa.

Marka xoolo yaraan namaba haysatee waxoogaa shaqo yaraan & ciriiri shaqo ayaa jirto, taasna dadka badankii mawada haysato ee waxaa jirta barako la'aan ay sababtay danbiyada faraqa noogu wada jira ee aanan ogeyn inaan dambiyo dhex dabaalanayno, Suubanuhuna (Scw) wuxuu nagu leeyahay saddex Allaah (Sw) ayaa kaalmahooda ah oo garabkooda jooga, waxaa ka mid ah saddexdaas ninka guursanaya

ee doonaya naftiisa inuu xaaraan ka badbaadiyo oo reer xalaal ah dhiso, ilaaheey baa u kaalmeynaayo qofkaas, risaqa & waxa lacunaayana Allaah (Sw) ayaa qoray oo qof walba nasiibkiisa ayuu helayaa, marka waa inaan xoolo xujo laga dhigin waayo xooluhu waa hooska labadiisa galin, waa lahelaa oo lawaayaa.

Guurkaas qofkasta oo idinka mid ihi uu ku haminaayo waxaa laga helaa faa'iidooyinkaas faraha badan & kuwo kale oo ka sii badan, sidaas daraadeed waxaan ku talin lahayn in aad loo dadajiyo guurka oo aan marna dib loo digin qofkii awooda oo ka bixi kara.

Dumarka waxaan ku amaanaynaa sida qiimaha badan ee ay ugu diyaarsanyihiin guurka & soo dhawayntooda aadka u cajiibka badan taas oo rag fara badan ay ka faa'iidaysan kari waayeen, waxaan sidoo kale ku amaanaynaa gabdhaheena sharafta badan sida ay u ilaalinayaan sharafkooda gabarnimo & midda ehelkooda, inkasta oo ay jiraan gabdho wadadaad qiimaha badan ka weecday oo la marin habaabiyay.

Guurka & Islaamka

Guurku wuxuu leeyahay taariikh dheer oo ka soo bilaabatay aabihii insaanka Aadam (Cs) & afadiisii Xaawa oo ahaayeen dhagax dhiggii koowaad ee guurka sharciga ah, kaas oo Allaah (Sw) uu inoo jideeyay.

Sidaa awgeed guurku wuxuu noqday mid ay xoogga saareen diimihii yimid oo dhan, waxayna guurka u sameeyeen sharciyo & xeerar uu leeyahay, qaababkii la isku guursan jirayna ma aysan ahayn kuwo isku mid ah ee way kala duwanaayeen marka lafiiriyo waqtigii dheeraa oo u dhaxeeyay bilawgii guurka & imaatinkii islaamka, waxaana ka hadlaynaa islaamka & guurka.

Guurku ahmiyad wayn ayuu islaamka dhexdiisa ku leeyahay, wuxuuna islaamku dadka ku booriyay iney guursadaan, sababtoo ah waxaa guurka ka dhalanaya arrimo badan oo nacfi & faa'iido u leh qofka guursaday, umadda islaamka & waliba bini aadamka.

Guurka waxaa ku joogsada oo ku ceshooma dhibaatooyin waawayn, nasab & abtirsi la'aanta, caruurta ka dhasha dadka oo aan nidaamka ilaahiga ah aan raacin & dhammaan wixii kale oo laxiriira.

Qur'aanku wuxuu dadka ku booriyay guurka waxaana ka mid ah meelaha uu arrintaas ku xusay aayaddan ragga ku boorineysa iney guursadaan, oo Allaah (Sw) wuxuu leeyahay "haddii aad ka cabsatiin in aadnan u cadaalad falin gabdhaha agoonta ah oo gacanta ku haysiin waxaad guursatiin haweenka kale oo xalaasha idiin ah, adinkoo ka guursan kara labo labo haween ah, saddex saddex ama afar afar, waxaad ka heli kartaa daliisha aayaddan (Qur'aanka, Anisa, Aayadda 3).

Allaah (Sw) isaga oo cadeynaaya in guurku uu yahay calaamad ka mid ah calaamadaha lagu garto, astaana u ah awoodiisa & siduu ugu roon yahay adoomadiisa wuxuu yiri : "calaamadaha lagu garto Rabbi-nimada Allaah (Sw) & naxariista uu leeyahay waa ka mid ah inuu idiin abuuray lamaanayaal aad dadnimada & dabciga wadaagtiin, si ay u dhacdo inaadnan ka fiigin (didin) oo aad isku soo dhawaatiin oo aad is yeelatiin, wuxuu idinka dhigay adinka & xaasaskiina kuwo is dhaafsada kalgacayl & naxariis, waxaad ka heli kartaa daliisha aayaddan (Qur'aanka, Arruum, Aayadda 21).

Waxaa dhab ah in ay tahay calaamad wayn oo tusinaysa sida ay u dhamaystiran tahay awoodda Allaah (Sw) & naxariistiisa uu ragga & haweenkaba u naxariistay inuu inuu lamaanayaashoodda ka dhigay kuwo ay is leeyihiin oo ay wadaagaan dadnimada,

dareenka & dabciga, oo uusan ka dhigin kuwo dugaag iwm ah oo markaa waxaa dhici lahayd iney kala didaan aadanuhu oo aysan isku soo dhawaanin oo is yeelan.

Allaah (Sw) wuxuu xusay in guurku uu yahay wadadii ay qaadi jireen dadka Allaah (Sw) abuuray kuwa ugu khayrka badan, oo ah Nabiyada (n.n.k.h) maadaama ay sidaas ahaayeenna dadka kale laga rabo iney wadadooda qaadaan, wuxuuna Allaah (Sw) yiri: "waxaan hortaa soo dirnay rusul, waxaana aan ka dhignay kuwo leh xaasas & ilmo (sidaan adigaba intaa oo kale aan kuugu samaynay)" waxaad ka heli kartaa daliisha aayaddan (Qur'aanka, Arracdi, Aayadda 38).

Rasuulkuna (Scw) isaga oo dadka ku boorinaya guurka, una sheegaya faa'iidooyinka ay ka helayaan ayuu wuxuu yiri: "dhalinyarooy ha guursado qofkii heli kara wixii uu ku guursan lahaa, isla markaana awood u leh inuu haween lagogol tago oo u galmoodo, sababtoo ah guurku wuxuu qofka ka celiyaa in uu fiiriyo waxa laga reebay, ama uu sino (galmo sharci darro ah) ku dhaco, waxaad ka heli kartaa daliisha xadiith-kan (Kitaabada Bukhaari & Muslim).

Waxaa jira waxyaabo ka celin kara qofku inuu ku dhaco zino ama waxyaabaha hordhaca u noqda sida fiirada iwm, waxyaabaha ka celin kara xumaantaas

qofka waxaa ugu horeeya guurka, oo qofku haddii uu guursado wuxuu kaga maarmi karaa inuu arrimahaas xaaraanta ah ku dhoco, laakiin waa haddii uu yahay qof Allaah (Sw) ka cabsanaaya oo aan xaaraanta u bareereyn, ayse dhib ku haysay guur la'aantu, haddiise uu yahay qof xaaraanta aan ka dhowrsanayn, qofkaas waxaa laga yaabaa inuusan waxba ku soo kordhin guurku, maadaaba uusan ahayn qof dhowrsan.

Nabigu (Scw) wuxuu ka digay in wadadaa nabiyadii hore mareen isaguna uu maray in labaal maro, iyadoo lanacayo guurkaas lasharciyeeyay, wuxuuna yiri: "qofkii sunadayda ka taga, wadadii aan qaadayna ka leexda, manoqonayo qof ku taagan wadadayda oo raacay wixii aan faray" waxaad ka heli kartaa daliisha xadiith-kan (Kitaabada Bukhaari & Muslim).

Islaamku sidaan soo sheegnay wuxuu dadka ku booriyay guurka wuxuuna sahlay wadada isaga loo maro, laakiin iyadoo sidaasi ay jirto ayaa hadana dad badani aqbalin baaqaas, waxayna guurkii hor dhigeen waxyaabo dadka ka horjoogsanaya guurka, wax yaabaha dadka guurka ka horjoogsadana waxaa ka mid ah qaaliyaynta meherka, haddii meherka laga dhigo mid badan waxaa ka dhasha in ragga (sida gabdhahaba) qaar ay guurka ka daahaan amaba guursan waayaan maadaaba aysan u fududayn in

dhaqaalahaas faraha badan oo laga doonayo ay helaan oo ay gabadha ka bixiyaan, dhaqaalana guurku mahan.

Waxaa sidoo kale ka mid ah wax yaabaha guurka ka horyimaada lacagta ku baxda aroosyada qaarkood oo badan waayo haddii lacagta guurka ku baxaysa ay noqoto mid badan oo aysan sahlanayn iney helaan ragga guurdoonka ahi waxay arrintaas iyaduna dhalin kartaa in guurka laga daaho ama laga joogsado sida marka haweenku (ama reerahoodu) dalbadaan in dahab ama dhar badan oo qaali ah loo gado gabdha, in alaabta & qalabka ladhigayo guriga ay noqdaan kuwo qaali ah, iyada oo aan loo fiirin iney munaasab tahay oo ay ku haboon tahay duruufta & xaaladda qoyskaas la unkayo & inkale, iyadoo aan loo fiirin in awood loo helayo & inkale, waxaa sidaas lamid ah in qarashka ku baxaya xafladda arooska uu noqdo mid fara badan uusan awoodi karin wiilka doonaya guurka gabadha.

Waalidka gabadha dhalay qaarkood oo mararka qaar codsada lacag fara badan in laga siiyo gabadhooda, haddii kale aysan bixinaynin oo aan ogolaanayn guurka gabadhooda, gabadhiina waxey u baahan tahay iney hesho nin wanaagsan oo ay xaaraanta uga dhowrsato, wanaagga guurkana lawadaagto, sidoo kale waxey u baahan tahay iney bal mar aragto ubad iyada laga beeray oo ifka jooga ayna dhadhamido macaanka

hooyo-nimo, iyada oo intaa & in ka badan oo baahi ah qabta ayaa waxaa laga yaabaa in waalidkeed ay ku dul gorgortamaan sida neef xoolo ah oo suuqa lasoo taagay, haddii ay waayaan wixii ay rabeena jawaabtoodu waxay noqonaysaa ineysan gabadhooda bixinayn, sidaas markey dhacdana waxaa ka dhalan kara inaan lahelin nin xoolahaas ladiyaar ah oo gabadha guursada, dabadeedna ay halkaas gabadhu ku guur weydo oo niyad jab ku dhoco, ragna ay guur tirto.

Ugu dambayn wax yaabaha guurka raajiya ama diida oo badan waxaa ku soo koobeynaa rabidda in qofku uu gaaro da' gaar ah inta uusan guursan, waxaa dhacda in dadka qaar ay go'aansadaan iney guursadaan marka ay waxbarashada ka gaaraan heerkii ay rabeen, iney yiraahdaan waxaan guursanaynaa marka aan isla helno guri, gaari & gacan qabsi lacageed, marka dadku siyaabahaas iwm wax u rabaan waxaa laga yaabaa in guurku ka raago amaba seego, maadaama aysan haysan hubaal ama damaanad qaad sheegaya in waxaa ay rabaan ay gaari doonaan, marka maadaama aan la ogayn in lagaari doono waqti ay wax walbaaba sidii larabay noqonayaan, ayaa waxaa haboon inuu qofku guursado marka ugu horeysa oo uu guur u baahdo, awoodna u helo guurkaas & arrimaha laxiriira.

Marka guurka ay hor is taagaan wax yaabahaas aan soo sheegnay iwm waxaa halkaas ka dhalanaya dhibaatooyin badan oo ay ka mid tahay iney bulshada ku soo kordhaan dhibaatooyin & dhaqamo xun xun oo aysan qabi jirin, dhibaatooyinkaas foosha xunna waa waxa diinteenu ay nooga digayso oo guurka noogu boorinayso & samaha oo idil, Nabiguna (Scw) wuxuu nagu leeyahay "gabdhaha waxaa ugu barako & wanaag badan kuwa ugu meher & guur fudud".

Guurku wuxuu ku waajibaa nin kasta oo guurka awooda, naftiisuna u baahan tahay, kana cabsanaya inuu zino ku dhaco, sababtoo ah in nafta xaaraanta laga celiyaa waa waajib, maadaama zinadu wax fool xun oo lareebay ay tahay, sida kali ah ee qofku uga gaashaaman karana ay tahay inuu guursado, marka qofkii guursan kara waa inuu guursado guurdoon.

Guurku waa heshiis aadanaha dhex mara kan ugu qiimaha badan, sababtoo ah waxa uu khuseeyaa laftiisa, heshiiska labada qof ku dhex mara guurka kuma saabsana xoolo & umuuro aduunyo oo lagu heshiinayo, balse waxaa uu labada ruux iskula xirayaa xarig kalgacayl & naxariis, waxa uu sababaa ubad dhasha, wuxuu xubnaha taranka ka ilaaliyaa gaalmada xaaraantaa taas oo looga digay dadka oo idil.

Allaah (Sw) marka uu guurka jideynaayay waxa uu ka lahaa ujeedooyin gabi ahaanba maslaxadda adoomahiisa & danahooda u adeegaysa, waxaana ka mid ah ujeedooyinkaas qiimaha badan:

1. **Habaynta isku dhaxa:**

"Allaah (Sw) waxa uu nagu yiri: "dumarka wixii idiin dhadhamaya labo labo, saddex saddex & afar afar u guursada, hadaad ka baqdaan in aad garsoori weydaanna mid kaliya guursada, daliisha waxaad ka eegi kartaan (Qur'aanka, Anisa, Aayadda 3).

Qoyska ka aas aasma guurka sharciga ah rabitaankiisa waxaa lagu habeeyay qaab xalaal ah & labada qof is qabta oo markaas wixii uu Allaah (Sw) u qoray ku qanacsan, sidaas buu mid waliba midka kale ugu raaxaystaa, rabitaankiisana qaab xalaal ah oo macaani & dhadhan badanna uga haqab tiraa markasta.

Sidaa daraadeed wuxuu Qur'aanku Kariimka ah & Sunada Nabiga (Scw) labadaba ku aragnaa qoraallo fara badan oo qofka inuu guursado ku boorinaaya.

Anas Ibnu Maalik (Rc) wuxuu Nabiga (Scw) ka wariyay "guursada mid ninkeeda jecel oo dhalid badan, qiyaamaha ayaan isku kiin badinayaaye"

waxaad ka heli kartaa daliisha Xadiith kan (Abuud Daa'uud 2050, Nisaa'i 3227 & Ibnu-Xibaan 4045).

2. Dhowrista Faraca & Nooca Aadanaha

Allaah (Sw) waxa uu na leeyahay "dadow ka baqa Rabbigii naf kaliya (Aadam) idinka abuuray, iyadana lamaanteedii (Xaawa) ka abuuray, labadoodana rag fara badan & dumar ka baahiyay" daliisha aayadaan waxaad ka eegtaa (Qur'aanka, Anisa, Aayadda 1).

Guurka & dhisidda qoysku waxay dhowraan nooca aadanaha & fariciisa (tafiirtiisa), waana wadada kaliya ee jiritaanka abuurka aadanaha lagu ilaalin karo, sidoo kale waa dariiqada qura ee ay dadku ku tarmaan, ilaa & inta uu Allaah (Sw) arlada & waxa dul saran ka oofsanaayo, lagana gaaro maalinta dambe ee aakharo.

Qur'aanka Kariimka ah xikmaddaas bulshadeed & maslaxaddaas bini'aadamnimo isagoo tilmaamaya wuxuu yiri: "Allaah wuxuu idinka sameeyay xaasas idinku nooc ah, xaasaskiinana wuxuu idinka siiyay ubad & farac, wuxuuna idinku galadaystay irsaq wanaagsan ee ma waxay rumaynayaan been abuur (Ilaahyo aan jirin) nimcadii Allaah (Sw) miyey ku gaaloobayaan, hadaba daliisha aayadaan waxaad ka eegi karaysaan (Qur'aanka, An-naxal, Aayadda 72).

3. Dhowista Abtirsiimada & Qaraabo Xiriirinta:

C/llaahi Ibnu Cumar Ibnu Ibnu Caas (Rc) wuxuu Nabiga (Scw) ka wariyay "abtirsiimadiina ka barta qaddar aad qaraabadiinna ku xiriirisaan", kolka guur dhoco ayaa qosys dhismaa, kolka uu qoys dhismo bayna bulsho dhisantaa, abtirsiimana labartaa, abtirsiimo barashadu milanka & maldahaadda ayey bulshada ka dhowrtaa, waxaa kaloo lagu xiriiriyaa qaraabada laguna gacan qabtaa xigtada, sidaas beyna bulshadu ku xoogeysataa, iskuna guursataa, iskuna kaashtaa, ayna uga hortagaan wixii dhibaya qoyska.

Guurka Allaah (Sw) jideeyay waxaa weeye kan ay sababtiisa ubadku ugu abtirsadaan uguna faanaan aabayaashood, taasi oo aadanaha xag degganaan nafsiyadeed & xag gobonimo intaba ahmiyad weyn ugu leh, haddiise aanu guur jirin bulshadu waxay la liici lahayd ubad aan karaamo & dadnimo lahayn, cid ay ku abtirsadaanna la arag, taasi oo markaas dhantaalaysa dhaqanka & anshaxa wanaagsan, baahinaysana akhlaaq xumida & dullinimada diintu ka digtay wax badan, waxaana loo baahan yahay in aad loogu dadaalo abtirsiimanimada waayo waa arrin aad muhiim ugu ah guurka & guud ahaan bulshada.

4. Ilaalinta isku duubnida Bulshada

Allaah (Sw) calaamadihiisa ku tusinaya awoodiisa & inuu kaligiis in lacaabudo mudan yahay waxaa ka mid ah inuu yiri: "aayaadkeyga waxaa ka mid ah inaan naftiinna xaas idin kaga abuuray saad ugu dagtaan, wuxuuna idin dhex dhigay gacaltooyo & naxariis, dhab ahaantii taasi waxay calaamado lagu waantoobo u tahay qolo fekereysa" hadaba daliisha aayadaan waxaad ka eegtaa (Qur'aanka, Ar-ruum, Aayadda21).

Cabdullaahi Ibnu Cumar (Rc) waxaa laga wariyay inuu yiri: waxaan maqlay Rasuulka (Scw) oo leh: "ninku wuxuu mas'uul ka yahay reerkiisa, waana laweydiinayaa wixii loo dhiibay, naagtu waxay mas'uul ka tahay aqalka ninkeeda & ubadkiisa, waana laweydiinaa wixii loo dhiibay" daliisha Xadiith-kan ka eegtaa (Bukhaari 893, 5188 & Muslim 1829/1830).

Guurka waxaa ku adkaada kuna xididaysta is jacaylka & isku naxariisashada labada is guursaday, qaraabada, ubadka & guud ahaan bulshada, waxaana laga dhaxlaa daganaansho waarta & naxariis Rabbi keeno (Sw).

Labada qofe qoyska wada dhistay waxay iska kaashadaan dhismaha qoyskooda & barbaarinta ubadkooda, iyagoo barbaarintaas saldhig uga dhigaya diinta Islaamka taasoo gaarsiinaysa inay u aayaan abid.

Labada qof wey is dhamaystiraan, mid walibana wuxuu howsha ka qabtaa halka kaga aadan, taas oo ku xiran hadba takhasuskiisa & kartida jireed ee Allaah (Sw) uu siiyay qofkasta oo labadaas qof ka mid ah.

Haweeneydu waxay qabataa howlaha takhasuska u leedahay & shaqooyinka samayskeeda dumarnimo waafaqsan sida, maaraynta guriga, barbaarinta ubadka, iwm, waxayna qoyska u diyaarisaa raashin bisil, biyo qabow & dhar nadiif ah, waana shaqo ehel ay u tahay.

Ninku isagu wuxuu qabtaa howlaha u gaarka ahe raganimadiisa waafaqsan sida: mas'uuliyadda guud ee qoyska, qabashada shaqooyinka calculus & xag dhaqaale ka daryeelka qoyska, isagoo si xalaal ah dhaqaalaha ku keenaya, waana mas'uuliyad saraan.

Nafta ood ku jara-bartid qaadiska mas'uuliyadda reerka, daryeelkiisa, gudashada waajibka kaa saran xaaskaaga, dabeecadeeda ood ugu sabirtid, dhib wixii kaaga yimaada ood u dul qaadatid, hanuuninteeda ood u howl-gashid, dadaal aad u gashid sidaad marasho & masruuf xalaal ah ugu keeni lahayd, caruurta ood wadada toosan ku barbaarisid iwm, arrimahaas oo dhami ujeedooyinka guurka ay ka mid yihiin, waliba iyadoo Allaah (Sw) ajar & xasanaad kaa siinayo.

5. Dhufays Shaydaan laga galo

Inbu Mascuud (Rc) wuxuu Suubanaha (Scw) ka wariyay inuu yiri: "dhalinyarooy kiinii guur awoodi kara ha guursado, maxaa yeelay guurku aragga waa u dabool, ibtana waa u dhufays, kaan awoodin ha soomo, soonkaa shahwada ka jabinayee" daliisha Xadiith-kan qiimaha badan waxaad ka eegi kartaan kitaabada kala ah: (Bukhaari 1905, 5065, 5066 & Muslim 1400, 1401).

Guurku waxa uu kaa owdaa meelihii uu shaydaanku kaa soo galayay, mar hadday wuxuu xaaraan ku raadi ku lahaa iyagoo xalaal ah rugtaada kuu yaalaan, qofku hadaanu Allaah (Sw) ka cabsanayn oo iimaan uusan ku hubaysnayn, rabitaankiisa ayaa hor kaca, haddii markaas aanu guur xalaal ah helin, siduu dambi isaga ilaaliyana waa ku adkaanaysaa qofkaas isaga ah.

Guurka xugun ahaan waxaa saamayn ku leh xaaladda qofka; sida guud waa sunno xooggan guurku, waxaase jiri kara sida culimadu sheegaan inuu waajib noqon karo, waana haddii uu jiro qof fursad u haysta guurka kana baqaya inuu zino ku dhaco ama wax-kasta oo fududeyn kara zinadaas ama xumaan oo idil.

Islaamku waxa uu ka reebay gabdha muslimadda ah iney guursato cid aan muslim ahayn, ninkana waxaa loo ogol yahay guurka gabdhaha muslimiinta ah ama

kuwa yuhuudda & kirishtaanka ah ee dhowrsi & wanaag lagu ogyahay, waayo hogaanka isagaa iska leh.

Islaamku wuxuu xaaraantinimeeyay haween dhowra guurkooda, kuwaas oo isugu jira kuwo guurkooda larabeebay si joogtaa & kuwo guurkooda lajoojiyay xilli

Kuwa guurkooda si joogtaa loo reebay waxaa ka mid ah: hooyo, habaryar, eedo, hooyo hooyadeed, hooyo habaryarteed, hooyo eedadeed, aabe hooyadiis, aabe habaryartiis, aabe eedadiis, xaaskaaga hooyadeed, aabahaa xaaskiisa, gabadhaad abtiga u tahay, wiilkaad abtiga u tahay gabadhiisa, gabadhaad adeerka u tahay, wiilkaad adeerka u tahay gabadhiisa, xaaska wiilkaaga, gabadhaad awoowaha u tahay, intaas & inkale oo laga yaabo in ay soo baxaan ayaa wiilka ka xaaraam ah inuu guur ugu dhaco, iyadoo wixii aan ku khaldanno inta qoraalka aan wadnay dib laga sixi doono Insha Allaah.

Gabadhuna waxaysan guursan karin waligeed dadka kala ah aabaheed, adeerkeed, abtigeed, walaalkeed, wiilkeeda, wiilka ay eedada u tahay, wiilka ay habaryarta u tahay, wiilka ay ayeeyada u tahay & kuwo kale oo laga yaabo iney soo baxaan markaan qoraalkaan dhamayno kadib oo qofkii si saxan u soo hela uu ku mahadsan yahay, inaguna waxaan nahay dad dadaalay, Allaah (Sw) ayaana ogaal badane ah.

F.G: inta wiilka ka reeban ee dumara in la mid ah oo raga ayaa gabdhana ka reeban oo aysan guyrsan karin.

Waxaa kale oo jira haween si ku meel gaar ah loo joojiyay guurkooda, waxaana ka mid ah: xaaskaaga walaasheed, eedadeed & habaryarteed inta aad iyada qabto, sidoo kale gabdhaha ciddo tirsiga ku jira iyagana si ku meel gaar ah ayay xaaraam u yihiin guurkoodu inta ay ka baxayaan cidada, markey cidada ka abxaanna waa kuu banana tahay inaad guursato.

Wixii faah faahin dheeraad ah oo laxiriirta arrimahan wuxuu qof walba ka heli karaa culimada & dadka aqoonta u leh arrimaha qoyska & sida la isugu banaan yahay guur ahaan, waxaana jiri kara wax yaabo aan halmaanay ama aqoonteenna aysan gaarsiisnayn inta aan buug yarahaan diyaarintiisa ku guda jirnay.

Inta badan dhalintuna waa dad wax badan ka yaqaana dadka uu guurku u qaban karo & kuwa xaaraamta ka ah in ay guursadaan abid & xilliyo gaar ah intaba, balse waxaan uga danleenahay in lasii ogaado oo lagu baraarugsanaado dadkaas iyaga ah si uusan hadhow khaladaad & shalaay uga iman aqoon darro & ogaal la'aan dardeed, waxaana ku boorinaynaa dhalinta in ay bartaan diintooda si ay wax badan u ogaadaan oo laxiriirta noloshooda aduun & midooda aakharo intaba.

Guurka & Dhaqanka

Dhaqanku sida dadka qaarkii u arko ma'ahan labis ama hab socod ee waa ka micno ballaaranyahay intaas.

Dhaqanku waa wax kasta oo bulshadu dhowrto, qiimo gaar ahna agtooda ku leh, dhaqanka waxaa soo hoos galaya habka umadi u fikirto, dhaqaalaheeda u maarayso, diinta & caqiidada ay aaminsantahay, sida ay isku ixtiraamto, cayaaraha & sugaanta & wax walba oo ay umaddu qadariso ama qiimeyn weyn u yeesho.

Guurku waa lamaanaynta labo qof oo lab & dhedig ah si sharci ah. ereyga "Guur" waxa uu ka yimid geeddi oo ah in meel laga tago oo meel kale ladego, guurkuna micnahaas ayuu xambaarsanyahay oo waa ka guurid nolol kalinimo ah; waxaa kaloo la oran karaa ka guuridda lanoolaanshaha qoyskii aad ka dhalatay, una guurtid nolol & mas'uuliyad kuu gaar ah.

Dadka Soomaalidu hiddo & dhaqan ayay u leeyihiin dhiirrigalinta guurka, sida caadiga ahna wiilka ayaa gabadha soo arkada marka hore, hawada sheekaystaan ama si kale hakula xiriiro, sida in uu reerka aqoon u leeyahay soona ogaado inay inanu u joogto, kadibna odayaashiisa ayaa u geed fariista reerkii gabadha oo ka heshiiya isu guurinta wiilka & gabadha, waxaana

gogoshaas wacan lagu bixiyaa gabadha, iyadoo aad loogu faraxsan yahay guurkeeda.

Sida badan ninka guurdoonka ahi uma guursan jirin gabadha oo kuma uusan xulan jirin muuqaalka & quruxda muuqata oo kaliya, hasa yeeshee waxaa uu u kuur-gali jiray reerka gabadha, waliba si qoto dheer; dhalasho, dhaqan, garasho & caqliba marka uu helo xog ku filan oo qancisa yuu u xanjeersan jiray in gabadha loo doono oo reerkeeda loo tago.

Guurka Soomaalidu waxa uu leeyahay qaabab kala duwan si uu guurku u dhaco, waxayna kala yihiin qaababkaas guurku: Guur toos ah oo isna u kala baxa labo nooc oo kala ah isasiin labada qofood oo guursanaya & heshiis u dhaxeeya labada guursanaya.

Isasiintu waa in labada waalid oo ilamaha dhalay isla jeclaadaan oo isasiiyaan ilmahooda, kadibna ay u bandhigaan sidaasna la isku waafaqo guurka & lamaanaynta labada caruur oo ay dhaleen, waana nooc aad ugu yar dhaqankeenna oo sii dhamaanaaya hadda.

Heshiisku waa in wiilka & gabadhu is arkadaan kana heshiiyaan arrimaha guurkooda, kadibna arrintaa ay u gudbiyaan waalidka, sidaasna la isku siiyo labadaas is calmaday, noocaanina waana nooca guur ee ugu wanaagsan uguna badan ee la isku guursado xilligaan.

Nooca labaad ee guurka Soomaalidu taqaanay waxaa weeyaan guurka loo aqoon jiray boob, isaguna waxa uu u qaybsamaa labo, Lagis (Masaafo) & Dhabar-garaac.

Lagis (**Masaafo**) waa in wiilka & gabadhu ku heshiiyaan inay si qarsoodi ah isku soo mehersadaan, kadibna reerkii gabadha ay odayaashii wiilku u tagaan arrintana u sheegaan, kana codsadaan in gabadhii lasiiyo iyagoo xaal & xumayn bixinaya.

Dhabar-garaac waa in wiilku gabadha si xoog ah ku kaxaysto iyadoon ogolayn reerkeeduna ogayn, kadibna reerkeeda odayaal loo soo diro iyagoo xaal & xoolo kalaba wada, sidaasna looga xaalo wixii dhacay, sidaas daraadeed guurka noocaana waa mid aad u xun, waana laga soo gudbay xilligan guurkaas.

Nooca saddexaad ee guurkii layaqiinay waa dani ku baday, isana waa laba qaybood ama laba qaab ayuu ku yimaadaa: dumaal & xigsiin, mana ahan guur lagu talagalay guurka noocaan ah, waase guur duruuf ama dani keentay sida ka muuqata macnihiisa sharaxaadda.

Dumaal waa guurka yimaada marka nin uu dhinto kadibna uu ka tago xaas, waxaa xaaskaas guursan jiray walaalkiis, hadaba guurka noocaas ah ayaa waxaa loo yaqaanaa dumaal, waxaana keentay dan & duruuf.

Dumaasha waxaa ku jira maslaxo qoys inta badan, ujeedkuna waa in aanu dayacmin reerkii walaalkii ka dhintay, oo inta gabadhu nin kale iska guursato ilmihii & xoolahoodiiba aanay dacdarro & danayn la'aan ku dambayn, marka waa maslaxo ilmaha loo samaynaayo.

Xigsiin waxaa loola jeedaa haddii nin gabari ka baxdo (dhimato) waxaa lasiin jiray walaasheed, ujeedka ugu wayna waa in aaney ilmihii walaasheed ka geeriyootay dayacmin, oo inta eeddo ama aayo mutaan ayna murugo & mustaqbal xumo ku dambayn, Suubanuhuna (Scw) waxa uu yiri: "habaryari waa hooyo" marka dan baa ku jirta guurkaan.

Waxaa jira guur kale oo siyaabo ka duwan sida aan soo sheegnay ku yimaada oo soomaalida guurkooda ka mid ahaa, waxaana ka mid an noocyadaas guurka ah:

Godob-reeb waxa uu ahaa guur ka dhasha marka labo qolo dagaal dheeraaday ama soo noq noqday dhexmaro ayay heshiiskooda ku dari jireen in gabdho laysa siiyo, si labada reer is dhex gal & xididnimo laysu xaq dhowro u dhexmarto, guurkaanina waa maslaxo.

Waxaa kale oo godob-reeb ku iman jiray marka nin magac leh ama nin inan layaal ah lagu dilo reerkii uu xididka la'ahaa dhexdooda ayaguna ay dilaan, waxaa iman jirtay godob-reeb, si maslaxo loogu helo arrinka.

Heerin oo ah in gabdho ay guur ka waayaan deegaankoodii sababkasta ha keento guur waagaase, kadibna intey is aruursadaan ay deegaanno kale u kacaan si ay guur u helaan gabdhahaa guurka waayay.

Gabdhahaan qoyskooda & qaraabadooda lagalama xiriiri jirin guurkooda inta badan, maadaama ay ka fogaadeen deegaankoodii waa la iska guursan jiray.

Siyaaro waa marka sheekh diinta ku weyn oo meel degan xerna leh loo keeno oo lasiiyo gabar, si uu isagu u guursado ama xirtiisa ugu daro, siyaaro waa sidaas.

Maxlal waa marka nin & haweeney is qabay uu khilaaf ba'ani dhex maro caro darteedna ninkii dalqadii ka dhacdo, tiiyoo niyadda iska rabaan, hadhow marka ay isku soo hiloobaan ee ay rabaan in ay isku soo noqdaan iyagoo markii horana saddex dalqadood isku furay ayay waxa ay laheshiiyaan nin haweeneyda yara guursada oo hadana fura, habka noocaas ah ayaa waxaa ladhahaa maxlal, sharciga islaamkuna ma ogola.

Is-dhaafsi waa nooca guurka ee laba nin oo saaxiibo ah ay labadooda hablood ay isku weydaarsadaan, iyaga oo aanan wax xoolo ah kala qaadanaynin, hadaba guurka noocaan ahi gabdhaha uma fiicna.

Qudbo Siro waa marka nin & haweeney ay ku heshiiyaan in ay si hoos ahaaneed isku guursadaan

iyagoo aan cidna ogaysiin oo hadana isaga raalli ah, guurka noocaan ah isana waa guur aan wanaagsanayn.

Meher Shardi waa marka nin & haweeney isku guursadaan iyagoo sabab isku xiraya, sida iyagoo safar ku wada jira intaan safarka nahay yaan is qabaynaa iwl, mafiicno kanna oo waa qubxi & quraafaad.

Dun xidh (**Alkun**) waa marka gabadha oo aad u yar lasiiyo oo loogu dun xiro ama loogu alkumo nin abaal loo gudayay ama si kale isagu u doortay, hadhow markay waynaatana guursada, guurkaas ayaa waxaa ladhahaa dun xir (alkun) waana naadir isaga laftiisa.

Boojin (**Beejin**) waa marka gabadha ama haweeney aqal aroos cusub ah ama doonan xoog lagu kaxaysto oo inta meel kale lala tago halkaa lagu guursado.

Udub Qabsi waa marka gabar inta ay nin dusha ka caashaqdo kana baqdo haddii ay u sheegato jacayl keeda in uu ka ogolaan waayo guur, inta ay soo baxdo aqalkiisa ama aqalkooda ay gasho oo ay tiraahdo ka bixi mayo ilaa hebel la igu daro, inantaa ninka waa loo guurin jiray, haddii uu diidana xaal & xumayn xoog leh ayaa laraacin jiray, guurka noocaasa waa Udub Qabsi.

Ku qabsasho waa marka gabar inta lakufsado ama lasasabto oo ballan qaad been ah loo sheego ka dibna uu uur ku soo boxo ayaa si arrintaa loo xaliyo, ilmaha

caloosha gabadha ku beermayna loo daryeelo ayaa ninkii gabadha uureeyay lagu cadaadiyaa in uu gabadha guursado, mararka qaar ayaa laga yaabaa in ninkii gabadha uurka u yeelay uu diido oo ka dhaarto, markaana ninkale la ogolaysiiyo in uu ku qaato, isaga oo waxyaabo u dan ah meesha laga tusaayo.

Waxaa jira magacyo ladhasha guurka & macnahooda kuwaas oo aan wax ka sheegi doono, waxaana ka mida:

Sooryo (**Gabbaati**) waa xoolo ama lacag lagu bixiyo fadhiga gabadha lagu mehrinayo, waxaana lasiiyaa gabadha qaraabadeeda ragga ah oo aaney ku jirin aabaheed & walaalaheed, waana xoolo dadku inta badan ay yaqaanaan oo aanan ku cusbayn.

Yarad waa xoolaha lasiiyo gabadha aabaheed ama walaalkeed, codsi ayaga ka yimid awgeed ama u garasho dhaqanka laxiriirta, inta bandanna waxaa yarad ahaan loo bixin jiray geel oo qiimo weyn lahaa.

Xaal & Xumayn waa xoolaha labixiyo marka gabadha lala tago iyadoon reerkooda ogolaansho laga helin, markaas ayaa codsiga gabadha laga soo hormariyaa xaal & xumayn, taas oo ay keenayaan reerka wiilka.

Xaal: waa maslixid, waa xallin.

Xumayn: waa gafka lamaslaxayo

Kaalo waa waa xoolo lagu deeqo (lagu kaalmeeyo) reerka cusub oo ninka reerka lihi uu ka soo uruursan jiray qaraabada & saaxiibada, waxayna badanaaba ahaayeen kaalmadaas xoolaha (arigaa).

Dhibaad waa xoolaha lasiiyo gabadha laguursaday marka ay reerkoodii soo booqato, xoolahaasoo isugu jira (mood & Nool) badanaa iyadoo ku xiran dhaqaalaha qoyska waxaa loo soo raraa rati sida; aqal, subag & hilib waxaana kaloo lasoo siiyaa ari nool si ay ugu kaalmaystaan nolosha cusube u bilaabantay.

Seedi waa ninka ladhashay xaaskaaga ama waa ninka walaashaa qaba, waana magac badanaaba dadku aad u yaqaanaan oo aan dhagahooda ku cusbayn maqalkiisa.

Dumaashi waa gabadha ladhalatay xaaskaaga ama waa gaabdha walaalkaa qabo, waana magac sidoo kale layaqaano oo maqalka dhagaha aan ku cusbayn.

Sodoh waa xaaskaaga hooyadeed /ninkaaga hooyadiis.

Sodog waa xaaskaaga aabaheed / ninkaaga aabihiis.

Majiro magac ay sodoga & sodohdu ugu yeeraan inanka gabadhooda qaba ama gabadhu ugu yeerto sodogeed & sodohdeed, waxayse adeegsadaan (hooyo & aabo) oo kaliya, waana magacyada ugu wanaagsan.

Dangalo (**Hariif**) waa naagaha la isla qabo, midkasta oo ka mida waxaa loo yaqaan magacaas (dangalo)…….

Gayaan waa labada qof ee sharcigu u ogolyahay iney isguursadaan ee labka & dhedigga ah ama ninka & naagta ah, ayaa loo yaqaanaa magacaas (gayaan)……

Golmaran waa haweeneyda uurka & araxdaba aanan wax ubad ah ku sidin, ayaa golmaran lagu magacaabaa.

Gees Xir waa inantaan wali la aqal gayn lana mehrin lkn nin u doonan, lana siiyay haddii ladoonana xoolo bar laga bixiyay, ayaa loo yaqaanaa magacaas (gees xir)

Garoob (**Carmal**) waa haweeney lasoo guursaday, laakiin markaas madax banaan, ubad hala haato ama yaaney lahaane, waxaa loo yaqaanaa labadaas magacba

Gashaanti waa inan marka ay baaluqdo ee ay qaan gaarka noqoto, timahana reebato aanse wali laguursan.

Naashudo waa haweeney nin qabo ee ka caroota ama ka duda oo reerkoodii iskala joogta, ninkeediina aad lagu kari waayo, ayaa waxaa loo yaqaanaa (naashudo).

Caro Celin waa marka ay haweeneyda & ninka is qaba ay xurguf dhex marto ee ay haweeneydu ka tagto ee reerdkoodii ay aado, kadibna lasoo maslaxo oo loo soo celiyo ninkeeda, ayaa waxaa loo yaqaanaa (caro celin).

Alkun waa gabadha nin u doonan ee lasiiyay ee uu gabaati ka bixiyay ee lagu ogyahay isagana u joogta…...

Foodleey waa inanta inta aaney si fiican u qaan gaarin ee timaha inta qadaadka dambe loo gaabiyo fooda horana loo leebo, inantaas ayaa magacaas loogu yeeraa.

Gaari. Hadiiqo. Maakhilo saddexda magac waa isku macnee waa haweeneyda marwada ah ee sida aadka ah u wanaagsan ee ninkeeda & qoyskeedaba hanata, kuna fiican nadaafadda & dhaqaalaha reerka ayaa magacyadaas oo dhan ladhahaa oo loogu yeeraa.

Baali.Areebo.Araajo.Basari afarta magacba waa isku macnee waa haweeneyda aan hanan xilkeeda marwonimo ee aanan nafteeda & ninkeedaba u rooneyn ayaa ladhahaa magacyadaas oo dhan.

Goombaar waa gabadha foosha xun isla markaana cududaha gamuuran leh, waxaana layiraahdaa ninkii goombaar geed ka fura gabadhiisa ayuu geed ku xiray.

Guumeys waa gabadha guurka ka daahda ee hore loo guursan waayo, calafkeedu ha dhinaado iinkalase ha yeelatee, inantaas coonta ah ayaa ladhahaa (guumeys).

Rablayn waa tilmaanta lagu yaqaano inantu inay qaan gaar tahay oo aan laqabin, waana timaha oo ladabo ama latidco, inanta noocaas ah ayaa ladhahaa (rablayn).

Cadrad waa magac tilmaamaya iney gabadhu inan (bikro) tahay oo aaney hore nin u soo guursan, gabadhaha noocaas ah ayaa magaca (cadrad) ladhahaa.

Gambooleey waa haweeneyda laguursaday ee shaashka loo saaray, waxa uuna magucu tusayaa in haweeneydaas laqabo ama laqabi jiray (gambooleey).

Guud Goyn waa gabadha ninka ugu horeeya ee marka ugu horeysa guursaday ayaa guud gooyey, waxaa layiraahdaa heblo hebel ayaa guud gooyey ama bilcamay, gabahda noocaas ah waa (guud goeyn).

Minweyn waa haweeneyda ugu horeysa ee ninku guursado waxayna magacaa labaxdaa marka haweeney kale laga daba keeno, sida aad ka garanayso macnaha ereyga waa gurigii weynaa ama gurigii horeeyay.

Minyaro waa haweeney guur cusub ah oo haweeney hore loo qabay laga daba guursado, sida aad ka garanayso macnaha ereyguna waa gurigii cusbaa.

Marasho waa dharka arad tirka ah ee uu u iibiyo ninka haweeneyda uu qabo, waxaana loo yaqaan dharkaas marasho, ninkastana ma iibiyo dharkaas, waxaa iibiya oo kaliya nin dadnimo & dareen leh oo jecel xaaskiisa.

Masruuf waa dhaqaalaha nololeed ee ninku siiyo xaaskiisa, waxaa jira magac caan ah oo loo yaqaan (biil)

Dhaqmaadeys waa haweeneyda marka ay dhalmada joojiso oo aan wax da' dambe ku laabnayn aa ladhahaa.

Dhigaal waa haweeneyda marka ninkeedu ka maqan yahay cuntada ay u sii dhigto oo badanaa oodkacaa ama doolshaha ah, waana haweeney xilkasa middaas.

Cudad waa xilliga ay tirsato haweeneyda lafuray ama laga dhintay, si ay ninkale u guursato marka cidadu u dhamaato, waana magac aad caan u ah oo layaqaano.

Asaay. Hangaf ama Weer Saddexda ereyba waa isku macnee waa maro cad oo ay haweeneyda ninkeeda dhintay madaxa ku xirato, maradaas cad ayaa loo yaqaanaa saddexdaas magacba.

Sid waa xilliga ay hooyadu ilmaha caloosha ku qaado, waana sagaal bilood oo ah xilliga saxda ah ee ay ilmuhu ku dhashaan, ayaa magacaas (sid) loo yaqaanaa

Dihasho waa hooyadu marka ay sidkeeda dhamaysato ee ay rabto in ay umusho ama dhasho, waxaana jira magaca caanka ah oo dadku u yaqaanaan waana (fool).

Moqorad waa haweeneyda laqabo oo nin guriga u joogta, waxaa jira magac caana oo dadka badankiis aad u yaqaanaan waana magaca ladhaho (marwo).

Khabxad waa haweeneyda jirkeeda ka ganacsata ee aan dhaqan ahaanta ku wanaagsanayn bulshadeenna dhexdeeda, waana magac dad badani ay yaqaanaan.

Qadaf waa gabar dhowrsoon, oo si tuhmaa wax looga sheego, gabadha tuhmada wax looga sheegaa ladhahaa.

Naakirad waa haweeneyda nin diidka ah, ee ka cararta ninkeeda, gabadhaas iyadaa ayaa (naakirad) ladhahaa.

Roorsi waa haweeneyda oo si qasab ah wax looga raadsho, waxaa kaloo loo yaqaanaa gabadhaas magac caana oo dadku wada yaqaanaan waana magaca (kufsi)

Dabagur waa haweeneyda iyada oo aan ogeyn oo huruda wax laga doono habeenkii, ayaa ladhahaa magacaas (dabagur) waana magac lawada yaqaano.

Moora dhac waa gabar nin u joogtay oo nin kale guursaday, gabadhaa iyada ah ayaa ladhahaa magacaa

Basaas waa marka ay gabadhu timaha & jirku ka abaarsadaan dufan la'aan darteed, yaa ladhahaa basaas

Dhaashi waa habka subagga ama saliidda ay gabadhu jirka & timaha u marsato, yaa loo yaqaanaa magacaas…

Madax shub waa cuntada alla bariga ah ee marwada uurka lihi ay samaysato bisha sagaalaad ee xilliga

uurkeeda, si foosha uu Allaah (Sw) ugu fududeeyo, raashinkaas & ducadaas waa wax caan ah oo layaqaan.

Masayrtir waa xoolaha lasiiyo haweeneyda marka haweeney kale lala guursado, si loogu maslaxo, waana magac aan ah oo dadku inta badan wada yaqaanaan.

Dangalo waa xiriirka & waxa ay isku yihiin labada haweeney ee nin wada qabo, ayaa (dangalo) ladhahaa...

Tabargal waa wiilka marka uu biyo duuliyo inantuna ay dhiig hesho, xilligaas qaan gaarka ay gaaraan wiilka & gabadhuba yaa waxaa ladhahaa magacaas (tabargal).

Guurgal waa marka inanta ama inanku uu qaan gaaro ee uu reer hanan karo, mas'uuliyadda guurkana ka soo bixi karaan, ayaa loo yaqaanaa magacaas (guurgal).

Haasaawe ama Xodxodosho waa hadalka ama sheekada ay wadaagaan wiilka & gabadha isku gayaanka ah ee doonaya iney isguursadaan, waana oraah ay aad u yaqaanaan dadka badankiisa.

Af-gobaadsi waa hadal aan ladoonayn in laqayaxo sheegidiisa, siiba waqtiga xodxodashada ama shukaansiga ay ku jiraan lamaanaha isla socda.

Siin ama Bixin waa marka gabar lagaa soo doono ee aad ogolaato in uu guursado nin kaa soo doonay ayaa waxaa loo yaqaanaa (siin ama bixin).

Meher waa sharciga isku xira wiilka & gabadha isguursanaya ama waa xoolaha ay gabadhu sheegato marka lanikaaxinaayo, ayaa waxaa ladhahaa (meher).

Walaayo ama Wilaayo waa idanka ama ogolaanshaha laweydiiyo marka gabadha lamehrinaayo, waxaa layiraahdaa gabadha ogolaanshaheedu waa aamuskeeda. (Shibi waa raalli) yaa sidoo kale ladhahaa.

Qaalli waa sheekha ama wadaadka isku mehriya misana kala fura ninka & haweeneyda isqaba ayaa waxaa ladhahaa magacaas (qaalli).

Kiil jabasho waa marka uu ninku rabo inuu aqal gaysto gabar u doonanayd, alaabta & cuntada uu arooska usoo iibsado yaa waxaa ladhahaa (kiil jabasho).

Dadab gal waa marka wiil & gabar iscalmaday aqal tagaan, waana magac sidoo aad loo wada garanaayo…..

Mashxarad waa astaanta lagu aqoonsado marka aroos dhacayo ama inanta lagalbinaayo oo gurigeeda lageynaayo, waxaana mashxaradda sameeya haweenka

Xil waa xiriirka is xushmeyn ama is qadarin ee reeraha uu guur dhexmaro isku leeyihiin, ayaa (xil) ladhahaa.

Gogol ku laab waa xoogaaga lacagta ah ee gabadha marka habeenimo lala baxo iyadoo waalidkeed ogayn

gogosha ay ku jiiftay lagu laabo, lacagtaas gogosha gabadha lagaliyay yaa waxaa ladhahaa (gogol ku laab).

Gaaf waa xafladda dhalintu ku kulanto habeenka todoba baxa arooska, waxaana lagu madadaashaa oo lafuraa xero xujo, ama su'aalo la is weydiiyo waayo waa habeen farxadi buuxdo oo aad loo caweeyo.

Uur ku har waa ilmaha uurka ku hara ee dhasha dhimashada aabahood kadib, yaa (uur kuhar) ladhahaa

Dhicis waa ilmaha dhasha iyagoon sidkoodii dhamaysan, ama waa ilmaha ku dhasha todobo bilood & wixii lamid ah, iyagoo sidkoodii wax ka dhiman yihiin, ilmahaas iyagaa ayaa waxaa ladhahaa (dhicis).

Dhammays waa ilmaha sidkooda oo dhamaystiran ku dhasha, oo ah sagaal bilood, ilmahaasiyaga ah ayaa waxaana ladhahaa magacaas (dhammays).

Walqal ama wanqal waa xoolaha loo qalo marka ay ilmuhu dhashaan ee timaha yixda ah laga xiiri rabo, wiilku waa waxaa loo qalaa laba neef, gabadhana waa loo qalaa hal neef, xoolahaasaa magacaas layiraahdaa.

Isku nuug waa labada cunug oo hooyo kali ah wada dhashay oo caloosha uun isku baneeyay oo sanad kali ah kala weyn, ayaa waxaa ladhahaa (isku nuug).

Xudun Xir waa neefka ama waxa kale ee ilmaha yare ee dhashay lasiiyo ee nasiibkiisa lagu tijaabiyo, waxaasi ilmaha waa u bataan ama waa ka ba'aan.

Waraso waa ilmaha ladhalo wiil & gabar kuu doono ha ahaadee, ilmahaas ladhalay ayaa (warso) loo yaqaanaa.

Calool gal waa marka ugu horeysa ee hooyadu ay ilmahu caloosheeda ama uurkeeda galaan ama ku beermaan, ayaa waxaa loo yaqaanaa (calool gal).

Fadhiid waa ilmaha fadhiga ku daahay ee ka dib dhaca in uu istaago oo socdo xilligii ay caadi ahaan caruurta ku kacaan, ayaa waxaa loo yaqaanaa (fadhiid).

Dabakeen waa ilmaha marka uu dhalanayo lasoo hor mara qaarka dambe, dhaqan ahaana waa labaaseystaa ilmahaas yar, magacaas (dabakeen) yaana loo yaqaanaa

Inanlaayaal (**Mindismo**) waa ninka ladagan reerkii uu gabadha ka qabay, macnaha erayguna waa sidaase waa nin & layaal ladagan reerkii uu gabadha ka guursaday

Oori Walaal waa labada nin ee qaba laba gabdhood oo wada dhalatay, labadaas nin yaa (oori walaal) ladhahaa

Habro Wadaag waa laba wiil ama gabdhood ama wiil & gabar ay kala dhaleen, laba hablood oo walaalaa (habro wdaag), magacay caanka ku yihiin imo habreed.

Godadle waa ninka guurka badan ama mar kaliya haween badan guursada, dumarka Soomaaliyeedna majecla ninka noocaas ah oo dhaleecayn bey uga dhigaan magacaas (godadle) ninkaas isaga ah.

Xilo Gube waa ninka haweeneyda uu qabo dila oo dayaca, qaarahana aan ka dhigin ee dabada u haya, waxaa kale oo layiraa ninka noocaas ah (xilo bilaal).

Qorqode waa ninka had & jeeraale hunguriga xun ee masruufka kula xisaabtama marwadiisa ee waliba su'aalo ku qodqoda, ayaa waxaa ladhahaa (qorqode).

Dhadeysi waa ninka reer miyiga ah ama reer magaalka ah marka meel degaankiisa ka durugsan uu u haasaawe tago, sida magucu ka muuqdana xilligu waa habeen, sidaasaa magacaas dhadeysi loo dhahay.

Ciniin waa ninka awoodi waaya u galmoodka mawradiisa ee xubinta raganimadiisu ay wax qaban kari weydo, ayaa waxaa ladhahaa waa (ciniin).

Gablan waa ninka ama haweeneyda dhinta iyaga oo aanan wax ubad ah (waraso) ifka kaga tegin, ninkaas ama haweentaas ayaa waxaa lagu magacaabaa (gablan)

Buuxsin waa ninka marka uu reerkiisa ka maqan yahay waxyaabaha uu ugu so talo galo si uu uga farxiyo markuu yimaado, ayaa magacaas (buuxsin) ladhahaa.

Gogol dhaaf waa qof reer leh oo u galmooda qofaan xiriir guur ka dhaxayn, yaa (gogol dhaaf) loo yaqaanaa

Qoyskii reer miyaga ahaa ee Soomaaliyeed wuxuu ku dhisnaa howl wada qabashada sayga & ooridiisa, labadooda qof ka mid ahna haddii hagar ama karti darro ay ka timaadana gabalka qoyskaasi waa dam, waligoodna xubnaha qoyska howluhu waa u kala qaybsanaayeen, sayga waa ku howsha sare, waa dhaqaalaynta xoolaha & u sahmintooda, ceel u qodidooda & aroorintooda, dar & wadaan u samayntooda & waraabintooda, diraacaha kul kulul hayaamintooda & geedi galintooda, xerya u dhigidooda & col ka raridooda.

Ooridana waa ku howsha hoose, waa dhaqaalaynta ariga & maqasha, dhismaha aqalka & samaynta saabaanka uu ka kooban yahay amaba hoos yaal, sida haanta & dhiisha, dhigta & raarka, filka & udubka, adabta & xasinta, waxaad ku dartaa lulista caanaha & subag ka bixintooda, bislaynta neefka uu reerku iskii u qasho amaba marti soo gab tiri uu u loogaayo & indho ku haynta dhaqan galka agabta uu reerku ku aqdaanto, intabase waxaa ka culus badnaa oo oorida u gaar ahaa korinta dhalaanka & daryeelkooda, tan & maalinta ay ciidan noqdaanoo ay xoolaha ladibad baxaan.

Abaar & aaranba marar badan ayaa waxaa la arki jiray in ninku intuu meel iska fariisto isaga baashaalo amaba uu waalkiis shax ladhigto, ooriduse waabariga ilaa cawaynsin dambe mar ay howlaha ka nasataa dhif bay ahayd oo iyada nasiino waa kala tageen waa hore.

Sababahaa dartood inta aan talo kaga dhamaan gabadha ina hebela guurkeeda wuxuu barbaarkii reer miyigu u kuur gali jiray howlahaas ad adage ee laga filaayo iney tahay qof ka soo dhalaali karta & inkale, geela reerkooda ee curadda & qaankaba leh halaha uu jecel yahay inta uusan gacantiisa ka bixin ee xagga aabaheed aaney uga meerin wuxuu iska hubin jiray inantiisu inay u qalmi karayso, inay xoolo aqoon tahay, gaari falsan inay ku tilmaaman tahay, reerkana ay ku filnaan kari doonto maalinta uu isagu meel uun u socdaalo, waana muhiim arrimaahs in la iska hubiyaa.

Marwalba wuxuu barbaarku maanka ku hayn jiray maah maah saddex leey ah oo odayadii hore uu ka maqli jiray, taas oo ahayd “nin maalin magaadhid, nina sanad magaadhid & nina waligaa magaadhid”; nin maalin magaadhidoo waa nin kaa faras wanaagsan, nina sanadkaas mgaadhid oo waa nin kaa xoolo dhaqasho wanaagsan, nina waligaa magaadhidoo waa nin kaa naag wanaagsan, wuxuu kaloo xasuusnaa hees cayaareedii ahayd “suul ayeeyo kuu galay & sinji waa

maguuraan", wuxuu garanayaa in la oran jiray wiilkaagu maalin buu hiil kaaga baahan yahay waana maalinta aad hooyadii doonayso, sidaa awgeed latashiga ayuu aad u badin jiray si uu u guuleysto.

Darmadii gabar wacan loogu sheegaba intuu kabaha u ilado ayuu habeeno idil u dhixi jiray; kaligii cad oo madowna dhabaha maqaadee rag dumar yaqaan miirana yuu kaxaysan jiray, waa rag wax lasoo doora oo inanta uu ku dambayn doono eedeeda wax ka soo qaada, wuxuu ka digtoon yahay inuu ku dhoco meeshii xumayd ee Cabdi Gahayr uu sheegi jiray markii uu lahaa "kolka horaba guur waa milgiyo maasi kala waaye, ragga qaarse uma meel dayee wayska mehershaaye, anse waxaan ka miidhaa halkaan laga masuugayne, hadaan lala mashaawirin tolkaa adiga oo maad leh, oo lagama maarmee tashiga odayo loo miirin, ninkii kaligii maalootiyaa meel xun waa u halise". Wuxuu tilmaamayaa tashiga qiimihiisa.

Dadaalkaas ayaa ragga qaarkii wuxuu gayaysiin jiray inay doob guunimo ku waynaadaan, cirid baar & wax hubsasho siday ugu jiraan ayay mararka qaarkood soddon gu' & xaab xaab ku gaari jireen, wax walibase sidaad filanaysay kuuguma soo baxaan, kol kol buu barbaarkii naago doonka ahaa il duufaa oo marka uu dhisto ka dib durbadiiba ogaadaa inanta uu guursaday

inaysan ahayn tii uu hamin jiray, kaalinta larabo in ay buuxisana aysan ahayn tu ka soo bixi karta, markaas oo kalana raggu laba uun ayuu mid noqdaa, nin deg dega oo gabadhii oo udud cad ah haddiiba fura, kana sabra geel & xoolo kale wixii yarad ahaa ee laga daduucay.

Siduu is leeyahay wuxuu diidayaa in ay lagaadho maalin aanu ka maarmi karin oo intey caruur u daadiso ay ku fiddo, reerkana dabadeed nin & naagba uu isagu u noqdo, maah maahda tiraahda cishe & naag xunba waa ladada jiyaa intuu ku dhaqmo ayuu xarigeeda u sii dayn jiray isla markiibana siduu reer cusub ku dhisan lahaa wadadadeed ayuu qaban jiray ninkaas.

Ninka sidaas yeela badanaa waa ladaraabaa, fudayd baa lagu xantaayoo waa lagu canaantaa, isna waa is daafacaa oo furiinka wixii u geeyay ayuu xigtadiisa dhaw wax uga sheegaa, inkastoo raggii hore ka sariigan jireen ruux dumara oo ay kala tageen inay ceebaheeda ku dheereystaan oo ay sheeg sheegaan.

Si hadaba aan taa u tusaaleeyo aan soo qaato sheekadii uu ka tagay ninkii gabadha la aqal galay ee kolkey habeen qura la hoyatay waabarigii inta furay aan saddex deedii u kala reebin, raggii ay xigtada ahaayeen markii ay u yimaadeen oo wixii uu falay ay ku canaanteen sababtana waydiiyeen ayuu ku yiri:

Waxaan ku furay shan wax-yaalood, waa xoolo mubadaroo, waa ayaandaran-tahayoo, waa dhaqaalo xun-tahayoo, waa camal xun-tahayoo, waa qumanyo, nimankii ayaa hadalka ninka la amakaagay! kolkaas buu midkood kula soo booday war hebalow gabadhuba habeen kaliya ayey kula joogtee side baad ku ogaatay waxa aad ku sheegayso in ay tahay?

Wuxuu yiri: shanta wax-yaabood een idiin sheegayba in ay tahay baan idiin marine aad ii dhagaysta, marka koobaad waa xoolo mubadar oo kabihii oo aan iridda aqalka ku soo ilaaway ayay ma soo qaadine ka soo talaabsatay oo gudaha iska soo gashay, marka labaad waa ayaandaran-tahayoo intaan waagii baryin ayaa laxaday, marka saddexaad waa dhaqaalo xuntahayoo digsi bay inta dabka saartay wax alla wixii xaaba ahaa ee ay haysatay makala reebine mar qura wada shidatay, marka afaraad waa camal xuntahayoo dabkii oo hulaaqaaya dabayshuna ay hugfinayso ayay afuuftay oo hadana afuuftay oo gunuunucday cabaar yarna isagaaba iska ololi lahaaye u koran waysay, marka shanaad waa qumayo oo dabkii ayay habaartay waxayna ku tiri: idan Alle daad ku seexi, wax-yar kadibna roob meel uu ka soo curtay aan la aqoon ayaa seexshay kii oon waxba lagu bislaysan.

Ninka sidaas u deg dega waxaa labeeya nin kale oo wixii qoon-simaada oo uu gabadha cusub ku arko dulqaad u yeesha, wuxuu isku dayaa inuu waaniyo oo wax u sheega gafafkeedana tuso, ilaa ay qabatintana uu howsha reerka ku garab galo, ninkaasna isagaa waxaa lagu tilmaamaa sabir wanaag & dulqaad qiimi badan.

Dadku marka ay is guursadaan dabinna wada joogaan waxaa midba kasoo if baxa dhaqankiisii runta ahaa & dabeecadihii uurka hooyadii uu kaga soo baxay ee uu Allaah (Sw) ku abuuray, waana xilliga la is barto.

Maalmihii xod xodada & hadal macaanka lasoo dhaaf, waayihii kala gambashada ee ku waliba ku dadaali jiray inuu xuntiisa qariyaa shiciirta, nolosha quruxda badan xilligii la isku sawiri jiray lasoo gudub.

Waxay foodda galiyaan xilli kale oo kaa hore si walba uga duwan, waxay is arkaan iyaga oo bartanka ugu jira xilli aan nasiino ogolayn oo si joogtaa tacab aduunyo ugu baahan, xilli labada qof midba kartida dhabtaa ee uu leeyahay ay soo dibad baxdo, markaas oo kale waxa ugu wacanba sayga ayaa hor dareema dol doloolooyinka ay gabadhu leedahay ee ay reerka lasoo gashay, haddii ay dabeecad kulushahay oo ay ka dudo lama dudee waalidkeed & walaalaheed ayuu lakaashadaa, marjo haddii ay tahayna dumarka isaga

xiga ayuu kaalmo uga jiriyaa, waxay u badan tahay dulqaadkaas in lamahdiyo oo da' ama laba kolkey dhasho ay hagaagto nadiifna ka noqoto hore wixii dol doloola ahaa oo markay cusbayd lagu ogaaday.

Labada ninka dulqaadka lihi haddii uu gabay yaqaan isaga ayuu maciinsan jiray, waxay la ahayd hadduu hadalkii waxa ka tari waayay dhaqanka aanu jecleysan ee gabadha uu ku arkay inay maansadu wax ka badali karayso, sidaa darteed baa suugaanta soomaalida waxaa daf ka ah gabayo canaan & waanaba isugu jira oo maanso yahanadii hore ee soomaaliyeed dumarkii ay qabeen qaarkood ay u tiriyeen.

Raggaas waxaa ka mid ahaa gabyaa aan magiciisu nasoo gaarin hayeeshee wariyayaashu ay nagu soo simeen tix uu kula hadlay haweeney u dhaxday.

Sidaynu tixda ka garan doonno wuxuu gabyaagaasi aad u saluugsanaa wax-qabadka afadiisa oo siduu ku eedeynaayo ka soo bixi wayday howlihii hoose ee ay reerka ugu qaybsanayd, dabadeedna wuxuu ina dareensiinayaa xusul duubka & dadaalkiisa faraha badan inay bar kuma taal yihiin marba hooyadii qoysku haddii ay dhinaceedii gabtay barbarkeediina uu bakayle qaleen noqday, wuxuu ku soo gab gabaynayaa dhagaha afadiisu in ay gufan-yihiin oo waxba aaney ka

maqal, isna uu waanadeedii ku daalay ilaa uu isula ekaaday haan hoosta ka daloosha nin biyo ku dhaaminaaya, wuxuu yiri: “hawo duunyadeed waa intaad galabba haysaaye, hal haddii aad leedahay labaad ku hindisootaaye, hir markii aad gaadhaba mid buu kaa hor bixiyaaye, hadaad haalik & maalik tahay hagar la’aan xoogga, aad haadka duula & sidii haatufka u roorto, asaan reerka hoos laga dhaqayn kaama howl boxo’e, haantaan gun loo tolin biyuhu ku hakan maayaane, ku haraaday naag-yahay intaan hooy day kula haaye”. Wuxuu ku cabiray sida uu u waaninay.

Sida ninkaas waxaa badnaa rag furiinka ka maagi jiray oo yaradkii uu bixiyay dartiis haweeneyda ugu mintidi jiray amaba ceeb & fudaydba uu la ahaa, arrintaana waxaynu tusaale uga dhigan karaynaa gabay caan noqday oo uu tiriyay maansa-yahanadii hore ee soomaaliyeed nin ka mid ahaa oo Allaah (Sw) ha u naxariistee Maxamuud Cali Beenaleey la oran jiray.

Haweeney ayuu Maxamuud jeer guursaday, kolkaas buu kala kulmay dhaliilo siduu is lahaa aan loogu adkaysan karinoo haddii uu ku ogaan lahaa aanu markeedii horaba ku galeen, dhowr da’ood ayay u dhashay waase ka soo rayn wayday, sida tixdiisa inooga muuqan doontana in badan ayuu waaniyay si walbana wax ugu sheegay Rabbi se mahaleeshiin.

Maalintii dambe ayuu malaha is yiri hadaad u gabaydu armey ka soo raysaayoo sidaan dhaantaa, markaas buu u tiriyay tix aan qaboobayn oo kulul oo dhaliilihii uga muuqday xaaskii uu qabay uu kaga cabanaayo.

Marka hore caruurtii ay dhashay ayaa dayac ka dharagtay oo wiilkeeda dadabkaa inay sinta saarto ayaa lagala sabray, marka labaad labadii isaga dhashay oo waayeel ah qof af xumo ula taaganoo aan xurmo & daryeel toona u haynin, marka saddexaad inay tahay ruux uu kala quustay wadaadada isaga soo tamadiya wax kalaba iska daayoo inay wayso u keento, marka afaraad isaga oo ay dhalinyaro wehliso hadduu qoyska yimaado inay tahay ruux aan cidna u xil qabinoo aan lagu soo karin ardaa wanaagsan inay gogol ugu fidiso, marka shanaad intii uu qabay weel culan caano ay ugu keento inaanu waligeed ka gudoomin, marka lixaadna in ay tahay araajo aan oogadeeda biyo & dhaashi toona ugu roonaan, dar & daaradna aan muuqeeda kalahayn.

wuxuu yiri: “naagyahay wadnaha kuuma galin waanadii hore’e, weedhaan qalbiga kuugu riday waafku kaa qaadye, wacdigaan ku faray waa adigaan wagara xaalayne, haddaan weyne kaa qaban asaan waaxid kaa celinin waraariinka ubadkaaga waa lagala weecdaaye, kaa waayay wiilkaaga ood sidato waa noole, waayeel cirro leh weer xun waa lagala

waabtaaye, kaa waayay inaad waalidkey wax u laleysaaye, wehel culimo kama maarmi karo aniga oo weyne, kaa waayay weysada inaad weli u qaadaaye, dhalinyaro walaanshayn haddaan waabka soo galiyo, kaa waayay meel wacan inaad wagac u siisaaye, xigta weehad laga soo liso & waris dhanaankeeda, kaa waayay weel culan inaad wax igu siisaaye, wajigaa lamayraa markay waabarkii tahaye, mawirwiro jirkaan lagu wadayn weelka dhaashiga'e, kaa waayay waligey inaan waano kuu bogo'e". ayuu ku soo idleeyay warkii.

Qofka dumara ee uu sidaa ugu gabyay ina Cali Beenaley muusan furine waa isku gaboobeen, markaas baan dhab u gartay wixii ay u jeedeen ooryahooda ay isla keeni waayaan raggii ku oran jiray "adna ilmada iga dhamee anna dhashaan kaa dhamayn", raggii isku waani jiray "nin & naagtii colna ma aha nabadna ma aha", raggii ku maah maahay "dumar nin u fiirsaday kama ilmo dhalin". Waana sidaas sida saxda ah.

Waxaa jira arrimo guurka raajiya oo taabagal ka dhiga & kuwo in uu dhexda ka jabo soo dedejiya, kuwa raajiya waxaa ka mida sayga & oorida oo midba intuu kan kale dabeecaddiisa barto isugu dulqaata kuna tashta khilaaf yar oo soo dhex-galaa inaanu reerka ka burburin, waxaa kaloo ka mid ah sayga oo markiisa horaba reer ladan ka soo jeeda sidaa darteeda isaga oo

hanti ku filan haysta qoys noqda, waxaa kaloo in guurku sii jiro suuragaliya jacaylka caruurta yaryar ee labada qofi isu dhaleen kuwaas oo ay hubaal tahay inay silac & saxariir ka dhargi doonaan haddii ay labada waalid kala tagaan, waana natiijo dadka intiisa badan wada arkeen kadib kala tagga labada waalid.

Arrimaha iyaguna cimriga guurka soo gaabya waxaa ka mid ah masayrka, waxaa kaloo ka mid ah labada qofood oo midkood uu anshi kulul yahay islamarkaasna aan kan kale ku dhowrin, waa tabta ay badanaa u dhacdee ereyo aan laga fiirsan oo aflagaaddo xambaarsan ayey is dhaafsadaan, gacan ka hadal baa ka dhasha, isaguna wuxuu keenaa furiin & in lakala dhaqaaqo, dabadeedna sidaas fudud buu qoyskii dhamaa ee dhisnaa ku baaba'aa kuna burburraa.

Sidaan hadaba kol dhaw carabka ku soo dhufanay guurka kuwa Allaah (Sw) caruur ka abuuraa inuu raago ayay u badantahay, hayeeshee kii aan ubadki beermin waxay u dhawdahay inuu sii socon waayo, inkastoo laga yaabo markoodii hore inay jacayl isku guursadeen hadana iyaga oo aan is nicin ayaa kol dambe labada mid waliba dareemaa baahi hoose oo uu qabo, wiilal & gabdho oo hooyo ama aabo ugu yeera, wiilal & gabdho sida kuwa darisyada u sawaxma oo

dhag dhagta qosolkooda yaryar ay ku muraaqoodaan, alaabta aqalkana kolba qaar ka jajabiya ama burburiya.

Labadaas oo kale marka dareenkaas uu midkood ku soo noq noqdo ayay u badantahay inay is fasaxaan oo ku waliba reer cusub amaamudo, ama uu kaligiisba iska noolaado, waxaa laqabaa kala taggaas oo kale inaan cidina khasaaro ku qabin wax ku ba'samaana aanu jirin, waayo isku calaf inaysan ahayn yaa la arkaa.

Guurka caynkaa ku dambeeya waxaa tix gaaban ku soo qaaday Allaah (Sw) ha u naxariistee gabyaagii weynaa ee Samatar Baxnaan la oran jiray, isaga oo malahayga waayo aragnimo qudhiisa soo martay wali gocanaaya ayuu ereyo aad u kooban ku tilmaamayaa marwalba xiriirka aan adkayn ee u dhaxeeya sayga & haweeneyda u dhaxda ee aan caruurta u yeelan, afada sidaas ah ayuu ku tilmaamayaa hal qurbicii ay dhawaan dhashay laga qalay ama si uun kaga baxay.

Markaas oo kale soomaalidu waxay tiqiin farsamo hashaas oo kale lagu maalo iyada oo aan ilmihii tabin, cad ka mid ah haragga qurbicii ama nirigtii ka dhimatay ayaa lagu sabaayoo neefkeedii looga dhigaa, waa waxa maqaarka loo yaqaan ee had & jeer uu geel jiruhu ka daba wado ilaa ay ka guraysana ay hashu ku godlato, si looga maalo caano lagu intifaaco.

Samatar oo ka mid ahaa Soomaalidii dabeecadaha geela aad u tiqiinay siduu sheegaayo haddii kuraygii maqaarkaa lagu ogaa uu lumiyo, dharaartaas oo qura ayay hashu u barooratаa, maalintaas ayaana u dambeysa caano laga maalo, wuxuu yiri: “haddii aanay ubad kuu lahayn Aadam & Xaawo, waa igar maqaarkey lahayd inamo tuureene, afarteeda naas kama soo haraan ololka maantaase” ayuu samatar yiyi.

Si kastaba ha ahaatee Soomaalidii hore & tan maanta markii la isu eego tii hore ayaa furiinku ku yaraa, hasa ahaatee wuu jiray maxaa yeelay bulsho aan laga aqoon furiinka dunida laguma sheegin, waa hab loo soo rogay in lagu daweeyo oori saygeed lagala quustay inay ka heshiiyaan khilaaf soo dhexgalay, waa hab diinta Islaamka ku banan; hasa ahaatee sida laga wariyay Nabi Muxammad (Scw) waa waxa intii uu xalaaleeyay uu Allaah (Sw) ugu necebyahay furiinka.

Runtii Soomaalidii hore furiinka kuma deg degi jirin, ninka badsadaana kuma amaanayn, ragguse isku si kama ahayne waxaa jiray qaar mar kaliya ku talaabsaday & kuwa dad hablahooda fudayd ku soo xaraysta oo fudaydna reerka kaga saara, waana kuwo aan amaan loo jeedin abidkood kuwa sidaas sameeya.

Aan hadaba soo qaadano laba gabyaa soomaaliyeed oo ka mid ahaa raggii guur & furiin badnida lagu bartay.

Ninka hore waa Cilmi Cusmaan oo Gaabashi lagu naanaysi jiray, wuxuu ku caan baxay arrimo bulshadii ay dagaan wadaagta ahaayeen ay la ahayd inuu kaga duwanaa oo si aada laguna xaman jiray markasta.

Maalintii dambe ayey kulmeen nin ka mid ahaa raggii ay kaftami jireen, kii baa ku yiri niyahow waa lagaa wada yaabanyahay, marka koobaad haddii lagu arkaba waxaad sidataa kitaabka dayrabiga layiraahdo ee falka & xidigiska laga barto, marka labaad waxaad tahay nin geeddi & guur guur lagu jaan jaamay oo wax yar aan xilana ku nagaan dadkana aan ladegin, marka saddexaad dumarka aad guursato waa dishaa haddiibana waad furtaa, marka afaraadna waabariga ilaa fiidka goor noolba faal baad dhigaysaayoo barida ayaa dhulka kuugu aasan ciidana farahaad kula jirtaa.

Gaabashi arrimahaas midnaba ma inkirin ninkii xifaalaynaayay & dadkii ku xaman jirayna tix gabaya ayuu ugu jawaabay isaga oo u sheegaaya sababta uu tuwalba u banaystay, wuxuu yiri: “dayrabi kitaab buu sitaa diinta gabal weeye, geedduu dawaalaynayaa daaqsi sami weeye, naaguhuu dilaayuu furaa damac ka

waa weeye, faal buu dareerina hayaa dood nin raga weeye, afar-taas wixii lagu daraa xan & duuf weeye".

Gabyaaga labaad waxaa la oran jiray Qoolif Cali Xirsi, isaga & gaashina dagaan wadaag bay ahaayeen sida lawariyay, wuxuu isna ahaa nin guur badan islamarkaasna aan furiinka isha u marmaran jirin, minweyntiisii oo ay isku gaboobeen marka laga reebo lama sheegin haweeney kale oo ka bil ka bil agtiisa ku nagaatay, dhowrkii biloodba tu hor leh ayuu keeni jiray, dhowr kale kadiban wuu furi jiray ayaa layiri.

Inkastoo caruurta ku dhalata guurarkaas cimriga gaaban ay minweyntu u korin jirtay hadana kol dambe ayaa waxaa la soo gudboonaatay arrin uu maarayn kari waayay, haweeney malaha lagaaray markii uu furi lahaa ayaa uuraysatay dabadeedna gabar u dhashay, gabadhaas yar oo markaas nuugaysay darteed ayuu ugu kaadiyay isaga oo aan ku jacsanayn, markaas buu tiriyay tix uu naftiisa ku haaraamaayo kana shallaynaayo dumarkii badnaa ee uu soo guursaday, isala dumarkaas ayuu wada liidayaa walibana habaarayaa ninkaas isaga ah ee furiinka badan.

Dhinaca kale wuxuu Qoolif ina dareensiinayaa middaan uu hadeer u midiya lisanayaahi iney kuwii hore waxba kaga duwanayn goor horana uu iska sii

dayn lahaa haddii gabadha yari aysan wali naaskeeda ku dhaganayn, isaga oo hadaba ka qoomamoonaya inay ku fiday oo ay ku lamaanaatay ayuu yiri "nin hadduu wax badan liiliyo oo laqanku waynaado, inkastuu lab yahay jeer dambuu rag ugu liitaaye, ku lugo'ay intaan lagad lahaa naago tii ladane, leeleesha nooliba anay laasun ii tahaye, waligey mid lagu liicay baan lab u iraahdaaye, haddii ay luntadu nuugahayn lur ima haysteene, Allahayow laciiftada maxaa igu lamaaneeyay buu oraahdiisii Qoolif ku soo gaabshay".

Guurka Soomaalidii hore aad buu uga duwanaa kan maanta jira, maanso & tiraab ayaa la isku hal xiraalayn jiray, wuxuuna ahaa hab ay si aada u hirgaliyeen, waxaana badanaa isugu hal celin jiray barbaarta & gashaantimaha macaanka noloshu oo markaa u laacaayo, xilliyada xod xodada ku jira oo guur & qoys ay yeeshaan ku taamaaya oo ku talo jira markasta.

Waayadaa aan ka hadlaynana gabareey gabar matahay guurku ma ahayn, ninoow nin matahayna reer laguma dhisi jirine intii muddo ah ayaa lasheekeysan jiray, sabano dhowr ah ayaa la is baran jiray si qoto dheer baa la isku cirid baari jiray, inta aan howraarsan la oran labada qof mid waliba kan kale anshixiisa & dhaqankiisa ayuu hoos ugu gonda dagi jiray, iyaga oo is og bay hadana gugu ha da'o ku ballami jireen oo

jiilaalku ha ina gudbo isku mudayn jireen, marar bandanna cayaarihii habeenada latuman jiray intey ku kulmaan ayay is waydaarsan jireen hal xiraalayaal qofba uu garasho dheerida midka kale ku ogow is leeyahay inta aan si kama dambays ah guur & guri mida loogu heshiin, maadaama waxa ladhisaayo reer uu yahay, dhisidda reerkuna uusan ahayn mid sahlan.

Arrinkaas waxaan ku tusaalaynayaa laba sheeko oo hidaha Soomaalida aad caan ugu ah, midda hore waxay dhexmartay inantii caqliga badnayd barbaarkii lasoo baxay & kabo calaf oo walaalkii ahaa, sida sheekadu leedahayna kabo calaf wuxuu ahaa nin aad foolxumo loogu tilmaamo, nin aan loogu roonaan waxay qof dumarihi qacda hore ku calmato, wuxuu ku darsaday baa layiri rasnaan & isaga oo aan u aabayeeli jirin dharka uu qabaa maduug baa? Macusayb baa? Maqasaalan yahay? mise waxaa ku yaal gayn-gaynkii ay ciirtii dayrtu ku reebtay?

Waa ilaaheey amarkiise waxaa layiri ninkaa waxay walaalo ahaayeen barbaar malaha ay kala bah ayaayeenoo qurux oo idil loogu deeqay, gabadhii aragtaahina ay ku indho diraandiri jiray, barbaarkaas quruxsamida loogu deeqay ayaa maalintii dambe hawo guur ku tallamay, gabar darisada ah ayay ishu kaga dhacday dabadeedna xod xodo ka dib in la isla boxo

ayaa lagu heshiiyay, markaas oo kalana ninka gabadha labaxaya wuxuu dhalinyarada midkood waydiisan jiray inuu raaco oo gabadha labixiyo, maalintaana waxaa barbaarka wadada ugu wehel yeelay kabo calaf oo sidaan soo sheegay ay isaga walaalo ahaayeen, wadada ayaa cagta la wada saaray oo waa latagay.

Habeenkii oo idil haddii guuro la ahaa xalayna aysan raaso rasuul aragoo cidlo joog ahaayeen ayuu waagii u baryay, kolkaas bay gabadhii tiri war maynu hamuun tiranno? barbaarkii lasoo baxay ayaa inta il qooreedda ka eegay ku yiri ma adigaa wax lacuno inoo wada maxaynu ku hamuun tiranaa? kabo calaf oo waxay u jeeday gartay ayaa kolkaa yiri walaal gabadhu waxay u jeedaa aanu cadayanno, sababtoo ah qofkii cadayday luunkii iska rogye, ayuu kabo calaf ku yiri barbaarkii.

Barqadii haday tahay oo ay daaleen ayey geed haraca hoos fariisteen, cabaar haddii ay fadhiyeen ayey tiri war maynu nasanno? Barbaarkii lasoo baxay ee xaragada latiicaayay ayaa inta layaabay ku yiri sow inaga fadhina nasashada kale waa maxay? kabo calaf baase sarbeebteeda gartayoo markaa yiri walaal gabadhu waxay u jeedaa kabaha aynu iska bixinno qof kaba illani manasane, maxaa xigay?

Socdaalkoodii bay iska sii wateen dabadeedna casar liiqii kolkey tahay ayey tiri cid baan arkaa, hareeraha ayey eegeen barbaarkii gabadha lasoo baxayna waxba waa u muuqan waayeen, hayeeshee tanna kabo calaf baa gartay markaana yiri walaal gabadhu waxey aragtay tukke, meeshii shimbirkaas lagu arkana cid baa ka dhaw, waa siday sheegtay inantuye habeenkaas cid bey heleen oo meesha ka dhawayd kuna hoydeen.

Waagu kolkuu u baryay ayay ciddaana ka amba baxeen markaa bey tageen magaalo laga buuxo oo malaha labada isla soo baxay Sheekhii isku mehrin lahaa uu joogo, saddexdoodii oo waddooyinka magaalada dhexmaraaya ayaa gabadhii intey labadii nin ku soo jeesatay ku tiri war nimanyahow magaaladu madhisan taahy mise waa dunsan tahay? Barbaarkii lasoo baxay ayaa hadalkeedii la ashaqaraarayoo iney miyir qabtaba ka shakiyay, kabo calaf baase shakigii ka saaray kolkuu hal xiraalihii gabadha furay oo uu ku jawaabay walaal gabadhu waxey rabtaa iney ina waydiiso magaalada nin caadila miyaa xukuma mise nin eex yaqaan?

Waa lasocday, wax yar kadibna iyagoo wali magaaladii ku dhex jira ayey arkeen ruux mayd ah oo qabuuraha loo wado, kolkaas bey inta labadoodii soo eegtay ku tiri tolow qofkaa lasii wadaa madhintay mise waa noolyahay? Barbaarkii lasoo baxay awal yaab &

amakaag! bey u joogtee markan wuu carooday, gabadhiina hadallo darandoorri ah oo caro & canaan kululi ka buuxaan ayuu ku huruufay, naga aamusna waaba ku yiri, kabo calaf baase u jeedadii gartayoo inta walaalkii caradii ka dajiyey su'aashii sarbeebnayd ee inanta ku furay walaal waxey gabadhu u jeedaa qofka dhintay waraso maka tagay mise gablan buu ahaa?

Arrintii ugu darnayd ee barbaarkii gabadha lasoo baxay soo martayse habeenimadii bey dhacdaye tolow maxey ahayd? Sheekhii ragga & dumarka isku mehrin jiray ayey saddexdoodii soo hor fariisteen, kolkaas buu sidii caadadu ahayd wuxuu isaguna doonay inuu ogaado labada nin ee ay lasococto midka ay is guursanayaan ee in lagu mehriyo ay gabadhu rabto, markaas bay tiri kaas igu mehri intey kabo calaf farta ku fiiqday, yaab & waxaan loo fadhiyin sow may noqon, kabo calaf waxaan ahayn markii afkeeda laga waayana sidii ay rabtay ayuu Sheekhii yeelay, furiddii hal xiraalaha ayaa wax u sheegay kolkaasey quruxdii maysan raacine caqligii wacnaa ee kabo calaf u xilatay.

Sheekada labaad iyana hidaha soomaalida waa tu caan ku ah waxey leedahay milge suugaaneed oo sare, si weyna waxaa uga muuqda tabihii ay dhalinyaradu isku hal xiraaleyn jireen, waxaa layiri nin guurdoona ayaa reero meel dagan wuxuu ku arkooday saddex

gabdhood oo gashaantimo ah, waa walaalo qurux & bilic dumar laguraacana way ka wada sinaayeen oo hooyadood baa ku dhashaye tee buuse kala baxaa?

Ninkii baa talo ku cadaatay, tilmaanta kaliya ee uu hubay quruxda bey ahayd hase ahaatee waayadii hore soomaalidu quruxda oo kaliya qofta dumara uguma xilan jirine arrimo kalana way ka eegi jireen guurka.

Aw Yuusuf Cali Xirsi (Aw Yuusuf Barre) oo dhalinyaro reerahoodaa waaninaaya waa kii oran jiray: "guduud looma raaco oo haween gabalba waa cayne, bidhaan gabi ka laalaadda waa lagu gulaalmaaye, isugu gaadhay gabadhaad tiraah meel un baa go'ane, gaboodleyda gaashidu ku taal labada gooyoodba, ee ay maradu gayn-gayman tahay guur aan ka la'aado".

Sidaa dardeed isaga oo kaligiisa intuu guur dib ka xumaaday u bareeri lahaa wuxuu ninkii guurdoonka ahaa latashaday rag ay xigaalo ahaayeen oo wada waayo arag ah, ragow gabdhaha tee baan guursadaa markuu ku yirina waxey kula taliyeen bi'i waaye tan ugu caqliga roon u xilo oo iyada guurso, oo sidee baan ku garan ayuu waydiiyay? dabadeedna markey dareemeen iney talo ka wansiix santahay ayaa raggii qaarkood waxey ku tashadeen iney raacaanoo kala doorashada gabdhaha ka kaalmeeyaan.

Saddexdii gabdhood oo wada jooga ayaa ninkii guurdoonka ahaa & raggii lasocday u wada yimaadeen oo raggii wehelka ahaa nin ka mid ah ayaa su'aal saddex jawaabood leh lasoo boodayoo saddexdii gabdhood midood walba ka codsaday iney gaarkeeda jawaab uga bixiso, weyna ka aqbaleen iney jawaabaan.

Wuxuu ku yiri gabdhow waxaad iisheegtaan geel xeradii, garaw iidaankii & rag gogoshii? Tii ugu waynayd ayaa ugu hormartay oo ku tiri geel xeradiis waa tooma roobab badani isaga dambeeyeen haliba dhankeeda ha ugu faalasho, waa hareeriga bidix & midigba ha u laacdo, oo waa golo dugsoone habeenkiina haka soo raabsato, garaw iidaankii waa geed adage ha ahaado, waa caano garoora halagu gaaciya oo waa sixin dhawaan lalulay haloogu roonaado, rag gogoshiina waa aqal dugsoonoo ilo xir wacan leh, kashkaash leh oo raar xanaftii lihi dhex fidsantahay, ayay ku jawaab furtay inantii weyneyd.

Tii hoosta uga yarayd oo inanta weyn ku xigtay ayaa iyana lawaydiiyay isala su'aalahaas in ay ka jawaabto hasa ahaatee maysan sheegin wax ka duwan isla jawaabtii walaasheed bixisay iyadii bayna ku raacday.

Tii ugu yarayd ayaa kolkaa codsatay in su'aalihii loogu celiyo, markii sidaa loo yeelayna waxey ku jawaabtay

labadii ka horeeyay jawaabihii ka soo noqday wax ka duwan, waxey tiri geel xeradii waa ciidan ilaaliya hala haado, garaw iidaankiina gaajo hakuu hayso, rag gogoshiina waa nabad ha ku seexdo, su'aaluhu waxey ahaayeen hal xiraale, waxaana furtay saddexda hablood tii ugu yarayd oo dabadeed loo qaatay iney saddexdooda ugu garaad & garasho badnayd, markaas baa ninkii guurdoonka ahaa waxey kula taliyeen ileen caqli baa lashinsadaaye iyada xaggeeda inuu u xagliyo, qaalmihii uu yaradka uga bixin lahaa inuu geela ka soo sooco iyadana uu oori ka yeesho ayay kula taliyeen.

Sheekooyinka Soomaalidu aad bey u badan yihiin waana wada xikmad dadkii hore sheekeeyinkoodii & wax isku sheegoodii, waxaan sidoo kale soo qaadanaynaa dhowr sheeko oo uu soo uruuriyay walaalkeen Qoraa Cabdul Qaadir Nuur Xuseen Maax oo aad xog badan uga haaya dhaqanka Soomaalida & sida guurkoodu uu ahaa marka uu damac galo.

Sheekada Koowaad waxa ay leedahay beri baa haweeney waxay ku waalatay furiin, ninkasta oo guursada todobaad gudihii ayuu furaa, dadkii oo dhan baa yaabay, waxa ayna raggii oo idil is weydiiyeen haweeneyda maxaa lagu galay ee lagu furaa markasta, waxaa markii dambe cadaatay in haweeneyda lagu

furo hunguri weynin, sidaas ayaa markii dambe waayo badan nin la'aan ku ahayd (hunguri xumo).

Sheekda Labaad beri baa nin waxa uu xodxodan jiray gabar, markii ay aragga & oraahdaba iska deeqeen ee ay ku heshiiyeen iney is guursadaan ayaa waxa uu habeenkii dambe ku yiri "anigu saddex ceebood ayaan leeyahay haddii aad igu ogolaaneyso waan ku guursanayaa, haddii kalana waxbo yaan ku daalin oo gabdho badan ayaan isku soo seegnay, dhaliilahaygaas ee nabad gelyo walaasheey qaaliga aheey".

Gabadhii ayaa inta tuhun ay dib isugu qabatay galay ku tiri "waa maxay saddexda ceebood ee aad leedahay? Waxa uu yiri horta waan cir weynahay, waana cag weynahay, waana cisal weynahay, inta ay xoogaa aamustay inantii ayey tiri gartaye bal waxa aan ka yeelayo waan ka soo fekerayaaye barrito xilligaan oo kale ha inoo ahaato oo halkaan iigu kaalay.

Markii uu galabtii dambe goobtii ballanta ugu yimid inantii iyada oo xarig sooheysa ayey ku tiri "anigu waxbo kama qabo oo waan kugu qaadanayaa ceebahaas oo dhan, waayo haddii aad cir weyntahay waxa aad ii keensato ayaan kuu karinaa oo dhib iguma heysid, haddii aad cag weyntahayna dhulkaas ilaahey ayaad kula socotaa oo dhib iguma hayso iyana, haddii

aad cisal weyntahayna waxa aan kuu hayaa calool, sidii ayey ninkii & gabadhii isku guursadeen oo guri galkoodu ku dhacay una kala owlaadsadeen.

Sheekada Saddexaad beri baa nin waxaa lagu bartay oo uu caan kaga noqday deegaankii uu ku noolaa in haweeneydii uu guursadaba ay kala tagaan oo uu furo, hablihii & haweenkii degmadaas yiilay oo dhan way isku tilmameen waxayna ula magac baxeen ninkaas isaga ah xilo bilaalkii & xilo gubihii.

Berigii dambe haweeneydii uu is yiraahdo aad xoxodatidba waxay tiraahdaa waxaad furtaad baryahaan weyday…..anigu kuwa lagu barbarto ma ahi ee raalli ahow, anigu waan ku aqaane, haddii xitaa lagu arko isaga oo lataagan inan degmada ku cusub wey ku diri jireen oo waxay ku oran jireen naa mataqaan ninka aad lataagneyd? Naa iska ilaali…qof war la' ayaa tahaye…garoobeeye ayaa loo yaqaan ninkaase.

Berigii dambe ninkii oo guurka laga takooray ayaa waxa ay kulmeen gabar, waxay ku heshiiyeen inay is guursadaan, hase yeeshee markii ay taasi maqleen haweenkii degmada oo dhan ayaa jug ku soo yiri gabadhii oo laye naa maxaad tiri ma hebel baad guursaneysaa? Ma naftaada & magacaaga ayaad nacday? Ma in liiska garoobada lagugu daro ayaad u

jeel qabtaa? Intii intii loo dardaar werin karay yaa loo dardaar wariyay, hase yeeshee taasi inantii dhag jalaq way usiin weyday waxayna ku tiri “ii daaya taladayda, qofka & taladiisa mar baa laysu daayaaye”. Sidii bey ninkii ku guursatay, ninkuna waxa uu dumarka ku furi jiray baa layiri waxa uu ahaa qoorqode oo raashinka ayuu u xisaabin jiray, haweenkuna taas ayey ka gilhilan jireen oo diidi jireen, sidaas ayey ku kala tagi jireen.

Inanta waxa ay raalli ku noqotay inuu raashinka u yaryareeyo oo kolba sidii uu doono wax u siiyo, waliba waxay samaysay marka uu sonkorta & bariiska u soo cabiroba iyaduna xoogaa ayey meel kaga shubataa, maalintii dambe meeshu miyi bey ahayde reerrihii meesha wada deganaa waxaa lagu tashaday in ay berri guuraan oo naq raacaanoo meel dhaanta aadaan.

Hase yeeshee waxa uu ninkii gabadhii ku yiri berri anagu reeraha guuraya waan ka hareynaa maxaa yeelay sahay mahaysano oo waa in aan magaalo u safraa, gabadhii ayaa markaa ku tiri ma waxaad reeraha nooga reebeysaa sahay la’aan oo qura mise sabab kale ayaa jirta? Waa intaa ayuu ku yiri, waxay tiri reeraha hanaga reebin aniga ayaa sahay noo haayee, waxayna tustay raashinkii ay uruursatay oo toban maalmood ku filan, halkii ayay reerihii laguureen, maalintaa wixii ka dambeeyay ninkii raashin dambe

uma xisaabin gabadhii, maxaa yeelay buu yiri tani iyada ayaa iga dhaqaalo wanaagsan, ninkii & gabadhii wey isku nagaadeen ilmo badanna way u dhashay ninkii furiinka badnaa ee qoorqodaha ahaa.

Sheekada Afaraad beri baa gabar reer curad u ahayd oo lakool koolin jiray ayaa berigii dambe tiiyoo aan lala tashan ayaa aabaheed waxa uu ku yiri aabow waxa aan manta ku siiyay nin iga kaa soo doonay, gabadha oo ahayd inan aad u caqli badan ayaa ku tiri "aabo haddii aad nin isiineyso waxa aad isiisaa nin saddex tilmaamood leh". Odaygii oo inanta wajigeeda eegmada ku sugaya ayaa ku yiri "waa maxay saddexdaa timaamood ee gabadheydiiyey sheegeysaa?

Inantii ayaa tiri "aabow haddii aad nin i siineyso waxaad isiisaa nin hub la'aan dirira, hanti la'aan dharga, hoy la'aan gam'a". odaygii oo yaaban ayaa yiri "oo aabe sidee baa lagu helayaa nin tilmaamahaas leh? Inantii oo hadalka sii faah faahineysa ayaa tiri aabo "ninka hub la'aanta dirira waa nika aftahanka ah, ninka hanti la'aan dhargana waa ninka deeqda badan ee wax hormarsaday ee deeqdiisa oo abaal ah cuna, ninka hoy la'aan gam'ana waa ninka aan dakano qabin ee dadku ka nabad galaan waayo isaguna waa nabad galayaa.

Hadaba haddii uu ninka aad i siisay aabe uu tilmaamahaas qaar ka mid ah leeyahay igu dar, haddii kalana iga daa, odaygiina taladaas gabadhiisa waa uu ka ogolaaday wuuna ugu hambalyeeyay xikmadeeda.

Sheekada Shanaad beri baa qoys reer miyi ahaa oo dhowr caruur ah leh ayaa meel jees ahaan ku deganaa, qoyska gabar baa u weynayd oo curad u ahayd, waxay ahayd mid aan foolxumo meelna lagaga tilmaami karin oo Allaah (Sw) ayaa qurux aad u badan ku manaystay.

Tab gaabni umey dhalan aad bey u waxtar badnayd oo haddii ay hooyadeed meel aaddo reerka ma tabi jirin maqnaan shaheeda, dhalinyarada gayaankeeda ahi kama maqnaan jirin gurigeeda & goobta ay markaa joogto, waxay ka mid ahayd gabdhaha indheer garadka ku ah dhaqanka miyiga & garashada sarbeebta hadalka haasaawaha ah ama xodxodashada ah ee dhexmara gayaankooda, waxayna ahayd inan aad u caqli badan.

Odaygii inanta aabaheed ahaa ayaa arkay dhalinyaro fara badan oo habeen & maalinba ku howlan sheekada inantiisa, waxa uu ka baqay in ay inantiisa raggaas mid ka mid ahi ka raacdo isaga oo aan ogeyn xoolana aan laga siin, inta tab & xeelad u dego ama sir sirto inanta.

Waxa uu odaygu ku fekeray si aanay inanta ugu suurtoobi Karin inay ka talo goosato oo iyada oo aan la ogeyn in ay nin iskala baxdo, waxa uuna habeen habeenada ka mid ah ugu yeeray inantiisa ardaagii reerka iyada oo qoyskii oo dhami wada joogo oo fadhiyo, markay inantii u timid odaygii ayuu ku yiri aabo waxa aad tahay inantaydii aan aadka ugu jeclaa reerka oo dhan, aabo waxa aan kaaga mahad celinayaa sida waxtarka leh ee aad reerkeenna ugu maamusho.

Aabo waxa aan baryahaan arkayay dhalinyaro badan oo gurigeena ku soo qulqulayo, ragna aabo aniga ayaa kaa aqaan oo kaa badiya, waxaa jira kuwo aftahan ah oo hadal aqoon ilaahey u dhaliyay oo haddii ay ku helaan goor aad ladhaqaaqday aanad is garanayn, hadaba aabo waxa aan kaa doonayaa inaad arinkaa ka taxadarto oo aanad iga talo goosanin, maxaa yeelay aabo waxaa aan ka baqayaa inuu ku helo mid ama nin saddex tilmaamood leh waxaan weeyaan:

- Mid jinka ka socod badan
- Jirrina ka xoodaamis badan
- Jilbisna ka qaniinyo kulul

Sheekada Lixaad nin doob ah oo guur doon ah ayaa dabeecad waxa uu ka dhigtay in inantii uu lakulmaba inuu weydiiyo su'aalo, waxa uuna ninkaasi ballan uu

ku qaaday inuu guursan doono gabadhii su'aalahaas ka jawaabta, sidaas ayaa lagu bartay oo gabadhii ay wada haasaawaanba waxa ay isu diyaarin jirtay su'aalaha ninkaasi oo ahaa sideed waa maxay? Oo afar waa maxay? Oo labo waa maxay?

Gabarkasta waxa ay oran jirtay intey xisaab ahaan isugu geyso 8+4+2 = waa 14, marka ay sidaa ku jawaabaan ayuu oran jiray hadaba i dhaaf maadan garane, waayo badan markii ay su'aalihiisii gabdhihii ku adkaadeen ayey maalintii dambe gabar is heleen isaga oo aanan ku rajo weyneyn in laga jawaabi doono su'aalihiisa ayuu gabadhii ku yiri "gabarey waan ku rabaa haddii aad su'aalahayga ka jawaabtee, adigu ma i rabtaa? Haa waan ku rabaaye sheeg su'aalahay ku tiri.

Waxa uu ku yiri "hadaba waxaad sheegtaa sideed waa maxay? Afar waa maxay? Oo labo waa maxay?" intey xoogaa aamustay ayey tiri "sideed waa naasaha eyga, waayo eygu sideed naasood ayuu leeyahay, afarna waa naasaha hasha, waayo hashu waxa ay leedahay afar naasood, labana waa naasaha gabadha" waad sheegtay ee nakaxee oo aabahaa ii gee ayuu ninkiina ku yiri inantii, sidaa ayuuna ku guursaday ninkii waayada badan doobka ahaa oo waa ku xasilay guurka.

Sheekada Todobaad beri ayaa wiil doob ah waxa uu xoolo ka lahaa tulud geel ah, waagii dambe ayey gabar aad u cajabisay dhabankeeda & dhaqankeedaba, wiilkii gabadhii fursad ayuu ku raadiyay, nasiib waa haweeney, markii dambe, markii uu bareerihiisa u soo jeediyay in uu doonayo in ay is guursadaan waa ka ogolaatay, waxayse ku xirtay in uu aabaheed u tago oo uu ka doono, waana dhaqanka lagu yaqaan gabadha fiican oo maskax & maan fiyoobida ehehlka u ah.

Wiilkii talo ayaa ku cadaatay, maxaa yeelay xoolo uu la ardaa fariisto ma haysan oo hal neef oo geel ah ayuu xoolo ka haystay, inta uu calool adeygay ayuu odaygii gabadha dhalay u tagay, waxa uuna u sheegay in uu ka doonayo gabadhiisa heblo ah oo iyadu ay isa soo arkadeen, odaygii ayaa markaa waxa uu ku yiri wiilkii maxaad xoolo haysataa? Duunyo (xoolo) ayaan gabadheyda ka rabaaye maxaa gacanta kuugu jira?

Wiilkii waxa uu yiri "waxa aan xoolo ka haystaa tulud geel ah oo qura anagaana u baahan, haddii aan is guursano" odaygii inta uu fekeray oo uurka iska yiri labo is jecel lama kala laali karee tuludda yey ku dhaafin, ayuu wiilkii neefkii kaliga ahaa ka qaatay, gabadhiina raaciyay kuna daray wiilkii ka soo doontay.

Markey arrinta wiilka saaxiibadii maqleen ayey haydaarteeyeen oo ku canaanteen in aanu xisaabtamin, waxayna ku yiraahdeen "waryaa maxaad tuludii qura ee xoolo aad ka haysatay isaga dhiibtay? Waxa uu ugu jawaabay "saaxiibayaalow waa runtiina laakiin sow maydin maqal labo kor u jeeda nin arkay afar hoos u jeeda ka sabir". Sidaas ayuu wiilkii kaga tagay hashii.

Sheekada Sideedaad beri ayaa waxaa sakaraaday (jiraday) oday qabay gabar aad u qurux badan, gabadha guurkeeda waxa uu odaygu ugu xoolo sheegtay dhalinyaradii ay gabadhaa isku da'da & deegaanka ahaayeen oo dhan, inta uu inanta ka soo maray dhinaca waalidka ayuu maal & yarad aan xad lahayn ku faraqay gabadhiina uu ku guursaday.

Sidaa ayuu arrinkii noqday ishii buktaay ku bikaacso, gabadhiina odaygii loogu aqal geeyay, berigii dambe ayaa uu odaygii aad u xanuunsaday, markii dambana sariirta ayuu ku aruuray, nabarkii hayay ayaa loo sii dhuujiyay, sakaraadkiina waa lasoo saaray, galabtii dambe isaga oo ay naftu qaad qaadeyso ayaa uu dardaarmay oo dhowr jeer ku soo cel celiyay isaga oo leh "haddii aan dhinto dhuubo…dhuubo sidee layeelaa? Haddii aan dhinto…dhuubo xaggey ku dambayn doontaa?" gabadha xaaskiisa ah ayaa dhuubo

la oran jiray, marka waxa uu ka war warayaa xaaladeeda & meesha ay ku dambayn doonto (dhuubo)

Wiil ka mid ah wiilashii xanuunka odayga dul joogay adeerna uu u ahaa, awalna gabadha hoosta ka shukaansan jiray oo uu odaygu ka qaaday oo sugi la' inta ay odaygu nafta deyneyso ayaa u jawaabay odaygii oo ku yiri **"adeer adiga uun dhimo dhuubo dhul madhacaysee".** Waayo isgaa isla raba dhuubo**.**

Odaygii oo ay indhuhu rogmeen ayaa hadal dambe soo celin waayay, saacado yar kadibna waxaa daysay naftii, afar bilood kadib waxaa dhuubo guursaday wiilkii qalbiga kala qooqi jiray, odaygii lacagta badan ka bixiyana waa xijaabtay oo ka geeriyoo (dhuubo).

Sheekada Sagaalaad beri ayaa waxaa is xodxotay wiil & gabar lakala oran jiray miido & muuse, isaga oo midba ood sarsar dheer leh dhinac kale ka taagan ayaa waxaa dhexmartay sheekaad aadka u xiisaha badan:

Miidooy xageen kuu soo maraa?
Muusow muskaa ii soo jibaax
miidooy bilaa qodax i mudee?
Muusow mandiil jeexdaan hayaa
miidooy bilaa dhiigey dhul qabay?
Muusow xareed maydhaan hayaa

miidooy bilaa qoyay oo qar qaray?
Muusow dab baan kuu belbelin
miidooy bilaa dab i diirin waa?
Muusow boggaan bogga kuugu qaban
Muuse hadaan hooyaa hadaan hooyaa

Sheekada Tobonaad beri baa nin xoolo badan leh oo doob ah waxaa u yimid afar haween ah oo wada socda, waxayna ku yiraahdeen waxaan rabnaa inaad naguursato, waxa uu ku yiri "magabdho ayaad tihiin mise garoobo? Waxay ku yiraahdeen dhammaanteen carmal baynu nahay" waxa uu u ballan qaaday haddey sababta loo soo furay run ka sheegaan inuu guursanayo oo meel dajinaayo midkasta oo iyaga ka mid ah.

Middii ugu horeysay waxay tiri "waxaa la ii soo furay aniga xoolo hun ayaan noqday" tii ku xigtay waxaa la ii soo furay hunguri weyni, tii ku xigtay waxay dhahday waxaa la ii soo furay gogol dhaaf, tii ugu dambaysayna waxay dhahday waxaa la ii soo furay aniga dhago adeyg (maqal la'aan) ayaan caado u leeyahay.

Ninkii inta xoogaa fekeray ayuu ku yiri "xoolo huneey xaggaa istaag waan ku guursanaaye, hunguri wayneey adiguna u tag, gogol dhaafeey adiguna u tag, ogaadana saddexdiinaba waan idin guursanayaa, dhega adagey

adigu iska tag meelna kuuma hayee, waayo qofk aan wax maqlayn xal kale looma haayoon ahayan iska tagid

Tii gogol dhaafka taqiinay waxa uu ku daweeyay howshii reerka ee ariga & awrtiiba iyada ayuu mas'uul uga dhigay markaas bey teediiba ka badin weyday, middii hunguriga waynayd waxa uu ku daweeyay haddii uu lajoogo & haddii aanu lajooginba sedka noo wada kari buu yiri, kaligeedna way cuntaa, markii dambe ayay ka qaraartay oo ay nacday, middii xoolaha necbaydna waxa uu ku daaweeyay waxa uu siiyay xoolo iyadu ay gaar u leedahay, waxa una ku yiri hakuu tarmeen ama hakaa tirmeen adiga ayaa iska leh, reerkaan kalana waxba kuma soo darsan kartid, markaas bey habeen & maalinba xoolihii u taagnaatay.

Guud ahaan sheekooyinkaas & oraah suugaaneeddii ka horeysaba waxaan ka faa'iideysanaynaa sida qiimaha badan ee dadkii soomaaliyeed ee hore ay u qiimayn jireen guurka & qaab xulashadiisa, waxaan kaloo soo aragnay sida qiimaha & waxtarka leh ee wiilka & gabadhuba ay isku xujeynayaan oo ay isku hal xiraalaynayaan si qofba qofka kale uu u garto caqligiisa & waxtarka uu leeyahay, waana taas midda kaliya ee ay ku caano maaleen oo guurkoodu ku hagaagay iyaga oo Allaah (Sw) kaashanaya kana fikiraya mustaqbalka.

Xulashada Guurka

Hamiga ugu weyn ee qofka dhalinyarada ah rag & haween kuu ahaadaba noloshiisa gudaheeda waa go'aan ka gaaridda mustaqbalka guurkiisa & qofka ay wadaagi doonaan nolosha qaabka uu u xulan lahaa si uu ugu guuleysto, maxaa yeelay aayaha noloshiisu waxa ay ku xirantahay go'aanka uu qaato ama ka gaaro arrinta guurkiisa & qofka ay nolosha qeybsan doonaan, sababtu waa go'aankaas uu qaatay ayey ka dhalaneysaa ku noolaanshaha nolol farxad & rayn rayn leh ama nolol murugo & aayo xumo leh.

Sidaa daraadeed waa in aad looga fikiro qofka aad wada noolaan doontaan mustaqbalka, xulashadana fikir badan oo dhinacyo kala duwan isugu jira wax laga eego, sidoo kalana lasameeyo tashiyo badan oo lala yeelanayo dadka waayo joogga ah ee arrimaha guurka ehelka u ah oo daacadnimada & kheyr miirka lagu tuhmayo, qofkuna waa inuu Allaah (Sw) kheyr weydiistaa oo marar badan tukadaa Salaadda Istikhaarada loogu talagalay inta aanu go'aan qaadan.

Qofka guurdoonka ah waa inuu aad isaga ilaaliyaa wax yaabaha soo dadajin kara inuu ka habaabo (ka lumo) jidkii uu ku heli lahaa qof wanaagsan oo ku haboon baahidiisa & mutqablakiisa fog sida: daawashada

filimada ka hadlaaya jacaylka, hadalada aadka u qaboow ee dareenka abuura, saaxiibtinimada beentaa ee lagu soo bandhigo baraha bulshada, wax yaabahaas oo ku dhisan khiyaano & hunguri galin been ku saleysan oo ay dhalinyaradu ku daydaan ama jilaan iyagoo adeegsada ficilada & ereyada xardhan ee aan salka lahayn ee lagu soo bandhigo meelahaaa aan horay u soo sheegnay oo aadka u qataraha badan.

Waa inuu ogaadaa qofka guurka doonaya in reer waara oo wada noolaasho farxad leh ku taagan la abuuro inaan lagu abuuri karin arrintaas qiimaha leh qurux laraaco ama qowl lawanaajiyey, maxaa yeelay noloshu kuma soconeyso dareen & damac aan sii qodneyn ee caadifadi abuurtay ama dhalasho & qurux lagu dayoobo waayo guurku waa nolol wanaagsan.

Qur'aanka Kariimka waxaan ka baraneynaa inaan Allaah (Sw) weydiisano wanaag aduun & mid aakharo intaba, waayo isagaa haaya Rabigeen wanaagga labadaasba, waxa uuna Qur'aanku yiri: dadka waxaa ka mid ah kuwa oranaaya "Rabiyoow nasii aduunka wanaag, aakhirana wanaag, nagana badbaadi ciqaabka & cadaabta". Waxaana sidaa dhaha dadka wanaagsan.

Hadaba waxaa lasheegaa in Saxaabiga Cali Bin Abii Daalib (Rc) uu ku fasiray oraahdaas kheyrka

aduunyadu inuu yahay xaaska wanaagsan, kan aakhirana haweenka Janada (Xuurul Caynta) cadaabka & ciqaabkana naagta xumaata oo aan fiicnayn.

Rasuulkeenna (Scw) waxa uu yiri "aduunku waa raaxo kooban, waxaana ugu wanaagsan aduunyo raaxadeeda xaas wanaagsan, ahmiyadda xaaska wanaagsan waataa

Doorashada & xulashada xaas wanaagsan waxaa laga helayaa macaanka & farxadda dunida, halka xulashada oo aan hannaan wanaagsan loomarin guurku uu isku badalo cadaab, niyad xumo, niyad jab, daal & burbur baahsan oo qatar keena kaas oo sababa dhibaato badan.

Waa inaad ogaataa qoyska wanaagsanaada noloshoodu waxa ay noqoneysaa mid socota oo aan ku dhamaan aduunyada ee waxa ay ku wada jiri doonaan iyaga & waliba caruurtii ay jeclaayeen sida Allaah (Sw) uu kitaabkiisa ku cadeeyay, farxadooda & raynrayntooda waxa ay ahaaneysaa mid aan harin oo sii balaarata, sidaa awgeed waxaa loo baahan yahay in guurka aad looga fakaro ee aanu ku abuurmin caadifad & waa kaa helay & kuu bogay taas oo ku dambeyn karta shalaay, dayac & dumid ku yimaada qoysaska la dhisaayo.

Nabigu (Scw) waxa uu yiri "aad u eega halka aad owlaadda ka raadineysaan, guursada dad idiin qalma gabdhihiinana u guuriya dad u qalma (u kuf ah).

Cuthmaan Abiil Caas waxa uu ku oran jiray wiilashiisa marka uu guurka kala hadlayay "qofka guursanayaa wax buu abuurayaa (waa qof beertiisa geed mirood ku talaalaya oo kale) "iska fiiriya halka aad wax ku beereysaan waayo xididka xumi waxa ay u badantahay inuu dhalo isagoo kale". waxa uu tilmaamayaa Saxaabigu "Allaah haka raalli noqdee" in aad looga fiirsado guurka, haddii uu xumaadana miraha & natiijada ka dhalataa ay xumaaneyso.

Waxaad halkaan ka askhrisan doontaan **Toban** qodob oo inanka guur doonka ahi ay haboon tahay inuu ka eego gabadha uu u xulanayo si guurkoodu u hagaago.

1. **Islaam** waa iney tahay gabadha aad xulaneyso taas oo Allaah u hogaansan oo ku dhowrsaneysa diinteeda, qofka xaqqa Allaah ilaaliya ayaa ilaalin kara xaqaaga inkasta oo diinteenu ogoshahay guurka Yahuudda & Kirishtaanka gabdhahooda, laakiin xilligaan ay iyagu gacanta sare leeyihiin hogaaminta nolosha & xadaarada aadana aad ayaa looga digaa guurkooda waayo ilmaha ka dhasha guurkaas waxay gacanta u galayaan iyada

waxayna u horseedeysaa haddii ilmuhu ay gacanta u galaan iyada gaalnimo & caasi waalidnimo ballaaran….

2. **Wanaag** waa iney leedahay gabadha aad dooraneyso taas oo ku wanaagsan dhinacyada diinta, dhaqanka, & xaq-dhowrka, gabadha intaas aan soo sheegnay ku wanaagsani waxey soo saari doontaa caruur qiima badan oo ku koray nidaamka & dhaqanka wanaagsan, anfacana waalidka & bulshada qeybaheeda kala duwan oo dhan, waalidka & wadankuna waa ku faanayaan.

   Marka diintu tilmaameyso xaaska wanaagsan waxey sheegtay in ay tahay midda leh tilmaamahan soo socda:

   b) waa midda ninkeeda adeecda ama maqasha
   t) arageedana uu faraxgaliyo marka uu eego iyada
   j) ilaalisana nafteeda & maalkiisa markasta
   x) kalsoonina ku qabta ninkeeda markasta

3. **Garasho** waa iney leedahay gabadha aad xulaneyso, sidoo kalana waa iney tahay gabadhu mid dareen dhaqaalo leh garaneysana maamulka guriga sida: nadaafadda, cunta karinta Iwm, sidoo kale gabadha aad xulaneyso waa iney leedahay dareen tarbiyo si ay u soo saarto ubad tarbiyo wanaagsan leh, waa iney garaneyso ilaalinta baahida ninkeeda, waa iney leedahay aqoon guud oo laxiriirta dhaqanka qoyska &

xuquuqaha diintu siisay, ugu dambeyn gabadhu waa iney leedahay dareen fog oo ay ku xakamayn karto arrimahaan soo sheegnay oo dhan, haddiise gabadhu ay ka maqnaadaan in badan oo ka mid ah qodobadaas garaadka & garashada laxiriira waxey qoyska u abuuri kartaa dhibaatooyin fara badan iyada oo aan ogeyn ama og intaba oo aaney dhowreynin nidaamka qoyska.

hadaba waxaa la is weydiin karaa sidee lagu ogaanayaa garashada & garaadka gabadha? Jawaabtu waa sidaan: waa in ninka guurdoonka ahi doodo & sheekeeyin laxiriira garaadka & garashada u bandhigaa gabadha, waa inuu weydiiyaa su'aalo laxiriira dhaqanka nolosha qoyska, waa inuu weydiiyaa su'aalo lagu eegayo dabciga, dadnimada & dulqaadka gabadha.

Arrimahaas aan soo sheegnay waxey soo saarayaan garaadka, garashada & qofnimada gabadha sidaas si la eg gabadhuna waa in ay iska eegtaa inanka ay nolosha qeybsanayaan in uu yahay key lanoonaan kartay dabcigooduna isla jaan qaadi lahaa, waa inuusan guurku ka bilaaban waa kaa helaye mayga heshay & hayee howsha noo wad, taasi oo ku dhamaan karta fashil, fowdo & fidno ku faafta iyaga & qaraabadooda.

Xaaska wanaagsani ninkeeda wuu ku nafisaa, culeyska & mashaqada ayuu uga nastaa agteeda. Xaaska aan

Garaadka & Garashada lahayn ninkeedu culeys ayuu ku qabaa, farxadiisa & fayoobidiisaba wey dhaawacdaa, waxaana layiraahdaa "doqon lama kaalmeeyo lamana kaalmeysto" waxaa kaloo layiraahdaa "cudurkasta in dawo loo helaa suurtagal ah marka laga reebo doqonimada & dareen la'aanta.

4. **Xishood** waa inaad ku doorataa gabadha aad xulaneyso, waayo xishoodku waa qodob muhiim u ah Xulashada Guurka labada dhinacba wiilka & gabadha, diin waliba waxay leedahay dhaqan & dabci, hadaba dabeecadda & akhlaaqda Islaamku waa xishoodka; sidaa waxaa yiri Nabigeenna (Scw), waxaadna Xadiith ka ka fahmeysaa ahmiyadda uu xishoodku leeyahay.

   Haddii xishoodku ragga wanaajiyo haweenkuu uga sii wanaagsanyahay, gabadha quruxdeeda ugu muhiimsani waa xishoodka, gabadha xishoodka badani waa xaas wanaagsan oo qiimo badan bulshada & ninkeeduna qadariyaan, sidaa daraadeed muxuu yahay xishood? runtii xishoodka waxaa laga yaabaa in in badan oo bulshada ka mid ah u arkaan si ka duwan sida dhab ahaan uu yahay xishoodku.

   Xishoodku waa dabeecadda qofku uu isaga dhowro waxyaabaha xaaraanta ku ah sharciga Islaamka & waxyaabaha diintu reebtay, sidoo kale waxaa

xishoodka ka mid noqon kara waxyaabaha bulshadu u aragto akhlaaq xumo (Muruu'ada) oo ladhowro oo aan shareecada ka hor imaaneyn loona arko qofka aan ilaalin qof aan xishood lahayn ama aan wanaagsanayn.

Waxaa kala duwan xishoodka & yax-yaxa (Khajilka) oo ah dabci qofka ku jira & cabsi aanu sheegan karin waxa uu xaqa u leeyahay ama aanu iska difaaci karin waxa khalad lagu falayo ama lagu falay intaba. marka xishoodku waa sharaf waana qayb iimaanka ka mid ah, laakiin yax-yaxu ama khajilku waa ceeb & doqonimo qofka heysta Allaha (Sw) ha ka koriyee.

Sided ku ogaan kartaa qofka xishoodkiisa gaar ahaan gabadha xishoodkeed? ugu horeyn waxaa laga ogaan karaa dad la dhaqankeeda & sida ay ula macaamisho bulshada ay nolosha & waxbarashada wadaagaan.

Haddii ay dhacdo sida mararka qaar dhacda in qofku goobta waxbarashada & shaqada uu wanaajiyo dad ladhaqanka gaar ahaan gabdhaha waxaad ka ogaan kartaa qoyskeeda dhexdiisa, sida ay ula dhaqanto waalidka, walaalaha & dariska intaba, booqo gurigeeda ama cid wakiil kaa ah ha booqato oo hala saaxiibto iyada ama waalidka ama walaalaheed, kadib waxaad ogaaneysaa qaabka dhaqanka & xishoodka gabadha aad xulaneyso, waxaa laga yaabaa inaad ogaato wax

badan oo kaa qarsoonaa markaad bulshada ama baraha bulshada & tilifoonka ku kulmeyseen. xishoodkuna muhiim ayuu u yahay gabadha, hadduu lumana qiimo malahan gabadhaas oo waa bilaasha barashadeedu, “xishoodku wuu u wanaagsanyahay dadkoo dhan dumarkuuse kusii wanaagsanyahay xishoodku”.

5. **Ismaqal** waa inuu jiraa ood ku doorataa inanta aad dooneyso inaad xulato mustaqbalka, xaasku waa iney ninkeeda adeecdo maxaa yeelay waa maamulaha qoyska, maamulna sida lawada ogyahay waxa uu maamulku yahay in lamaqlo lana fuliyo amarada & talooyinka ka soo baxa, mana hagaageyso talada koox aan madax lahayn oo is barbar yaaceysa, waxaana hubaal ah haddii aan is maqal jirin inaanu jirin qoys wanaagsan oo baraare ku nool, waxaana muhiim ah in qoysku ka wada tashado arrimaha muhiimkaa kadibna odaygu yeesho go’aanka ugu dambeeyee la isku raaco.

   Sida ka jirta meelkasta oo madax & dad madax looyahay joogaan sida dugsiyada, jaamacadaha, wasaaradaha & xafiisyada kala duwan layskuma khilaafsana in mudiirka ama maareeyaha amarkiisa lagu wada shaqeynayo, ciddii ka hortimaadana ay mudaneyso canaan & ciqaab si shaqadu ugu socoto sidii loo qorsheeyay, marka in la ismaqlo waa muhiim.

Waa inaan ogaanaa in qoysku ka ahmiyad weynyahay kuwaas laysla ogolyahay in lagu kala amar qaato waayo qoys wanaagsan hadaan lahelin lama helayo maamulayaal & shaqaale wanaagsan oo bulshada gaarsiiya meel wanaagsan oo lagu wada hagaago.

Sidee inanku ku ogaan karaa daacadnimada inanta inta aanu guursan? waxey tiraa soomaalidu "gabari waa hooyadeed" sida ay hooyadu ula dhaqanto aabaha ayaa ah tusaale wanaagsan oo laga eegi karo in ay inantani ula dhaqmi doonto ninkeeda, waxaa kale oo laqaawisaa (la eegaa) walaasheed oo laqabo iyana waa tusaale wanaagsan waayo iyadaa u ah ku dayasho, "ratiga dambe ratiga hore saanqaadkiisuu leeyahay".

Meelaha si weyn looga ogaan karo ee dhaqanka hooyada waxaa ka mid ah tusaale marka inanku reerka gabadha booqdo ee uu hooyadeed lakulmo una sheego arrinta isaga & gabadheeda u dhaxeysa, haddii ay tiraa anigaa dhameynaya arrintaa, marka uu yiraa aabaha inaan arkaan doonayaa, ay tiraa odayga waxba loogama baahna; reerkaan arrintiisa anigaa haya waxba kama oga gabadhaan arrimaheeda.

Hadduu arko odayga oo markuu hooyada lahadlo lagu af celinayo ama warkiisa hoos loo dhigayo, ama markuu hadlo ay leedahay war iska aamus arrimahaas

waxay ku tusayaan in aan lala xididi karin reerkaas, gabadha sidaas ku barbaartana ay sidaas u dhaqmi doonto inta badan, waana xaqiiqo jirta oo la arkay.

Haddii markaad reerka booqato aad ku aragto marar badan gabadha iyada ka weyn oo guriga joogta markaad weydiiso sababtana ay kuu sheegto in iyada & sayageeda khilaaf ka dhaxeeyo marar badana ay isku dhacaan oo ay soo cararto waa astaan aan iyadana ka fogeyn dhaqanka guriga yaallay & sida la soo ahaan jiray, waana muhiim qofka guurdoonka ah wiil & gabar kuu doonaba inuu wax badan ka ogaado xaqiiqa dhabtaa ee ka jirta guriga qofkuu guurka ka doonaayo.

Taas lidkeeda reerka ah oo hooyadu aabaha is waafaqsan yihiin oo talada isaga loo celinaayo hooyaduna markasta ku tiraahda aabahaan arrintaas kala tashanaynaa, aabahaan weydiineynaa; reerkaasi waa reer isku duuban, wada jira, nidaamka ku socda kuna haboon in lala xidido waxna lagu darsado mustaqbal wanaagsanina ka muuqdo ee hamoogaan.

6. **Quruxda** waa mid ka mida wax yaalaha ay aad u eegaan dadka guurdoonka ahi, hasa yeeshee ma ahan arrin aas-aasi ah layskuna waafaqsanyahay ee qofba dhinac ayuu eegaa oo laqurxoon isaga, waxaa laga yaabaa in laguu soo arko gabar qurux badan sida ay u

arkaan dadka kuu waramaya laakiin markaad aragto aaney kuu muuqan quruxdaasi, marwalbana waxaa muhiima quruxda uu arko qofka guurdoonka ahi ee qiimo malahan quruxda qof kale arko; haba ugu muuqato dad badan iney tahay ama yahay qofka ugu qurxoon, miisaanka quruxdu waa midka qofka (gabadha ama wiilka) guursanaya.

Midda kale quruxdu mamuujiso in qofkani leeyahay qodobadii hore ee muhiimka u ahaa guurka & kuwa soo socoda; quruxduna way is badali muddo kadib hadaan la ilaalin arrimaha muhiimkaa ee aan ahayn quruxda ee ah quruxda xagga macnaha & dadnimada & qiyamka, abwaankii gabyayay waa tuu lahaa "gaduud looma raaco haween gabalba waa cayne, bidhaan gabi ka laalaada waa lagu gullaamaaye".

Quruxdu waa in aysan ahayn mid muuqaal kaliya ee gabadha gurigeeda, gogosheeda & dabcigeeda intaba waa in ay qurxoon yihiin, waa in ay ahaataa qurux lagu qanciyo ninka qaba ee aysan noqon qurux wadooyinka, hoteelada & dadka ajnabiga ah loo bandhigo oo banaanka gurigeeda lagu muujiyo.

Sidoo kale quruxdu waa in aysan ahayn mid gabadha kibrisa oo kalifta iyada & saygeedu in ay wada noolaan waayaan ama isaga dulleysa oo uu ku lumiyo

mas'uuliyadiisa, sida in ay ugu faanto in uusan heli karin mid sideeda u qurxoon, mar walbana ay isu sharaxdo oo u faanato taas oo ay ka dhalan karto fashil guurka ku dhaca ugu dambayn ama mas'uuliyaddii labada qofood oo dayacanta & burbur yimaada meesha

Sheeko: Waxaa layiri nin indho la' ayaa guursaday, gabadhii ayaa indha la'aantiisa ayadoo ka faa'iideysaneysa si kibir ku jiro ugu faantay oo ku tiri waad yaabi lahayd haddii aad arki lahayd quruxdayda sidaan u egahay, markuu adkaysan waayay ayuu yiri "haddey runtaa tahay kuwa indhaha qaba aniga iigama kaa tageen ee waa ku guursan lahaayeen".

Tilmaamaha quruxda gabadha waxaan soo qaadanaynaa nin guur doon ahaa oo gabar aad u qurux badan ku arkay halkii uu degenaa meel la ood wadaag ah, laakiin dhul ahaan ka durugsan, ayaa go'aankii bixitaankiisa si uu gabadha u soo guursado tixdaan macaan mariyay oo wuxuu yiri:

- Wallee geenyo aan shalay arkoo gayiga maaxeysay
- Labo sindoo gooyey & boqor ku goosheysay
- Oo dhacluhu labadeeda gobol gaw ka kala siiyey
- Oo gacanta qaar baa godee kala garaareysay
- Oo timaha qaar baa guntee gedefka u sii deysay
- Oo naaska qaar buu go'aye giijay maradeeda

- Oo gaabni waa lala nacee golol saruu dhaaftay
- Oo midabka qaar baa gubtee gini cas moodeyso
- Oo galacda daymada indhaha gululuc siinaysa
- Oo gaari dumareed ahoo garasho loo daayay
- Oo gees aad eegtaba ilaahey daanno ka ilaalshay
- Haddii guulahey uu idmoo gooyo amarkiisa
- Kolley anigu waan gaarayaa goboladoodiiye
- Goonidu ma fiicnee waryaa gacalo ii raaca

Quruxdu waa in ay tahay mid diini ku dheehantahay oo gabadhu waa in ay ku dhowrsanaantaa diinteeda, waa in ay ka fogaataa gabadhu waxkasta oo kibir ku keenaya nafteeda waayo kibirku waa ka xaaraam insaanka oo idil oo waa mid ka mid ah tilmaamaha uu Rabbigeen leeyahay qof lasheegan karana aanu jirin sidaa daraadeed waa inay gabadhuhu u ogaadaan taas.

7. **Sharafta** aabayaasha & awoowayaasha (Tolka), sharafka, Allaah (Sw) ku xirnaanta & isku tiirsanaanta qoys ahaaneed waa mid ka mida tilmaamaha lagu xusho guurka oo saamaynta weyn leh.

Inanka guursanaya waa inuu xusho dad ama reer wanaag lagu yaqaan & qiimo bulshadu ku qadariso (Diin & Dadnimo) waa in ay ahaadaan qoys ku caan baxay oo lagu yaqaan dhexdooda iskaashi, isku xiraan

& isxiriirin, maxaa yeelay qofku waa qoyskiisa rag ama haween kuu noqdaba waayo deegaanka & dadka uu ku dhex barbaaray saamayn badan ayey ku yeelanayaan noloshiisa, dadnimadiisa & dhaqankiisa guud ahaan.

Rasuulku (Scw) waxa uu yiri hadal micnihiisu yahay reer wanaagsan ka doorta "Haweenku waxay dhalaan dad u eg walaalahood" (uga eg dhaqanka, muuqaalka, dabciga Iwm). Marka waa muhiim arrinkaas isaga ah.

Waxaa kale uu yiri Nabigu (Scw) "dadku waa macaadin" macnaha sida macdantu u kala qaalisan tahay una kala qiimo badan tahay ayey qoysaskuna u kala qiimo badan yihiin, marka waa in la ogaadaa taas.

Soomaaliduna waxa ay tiraahdaa (wiil waa abtigii), sidoo kale dadka Shaam (Suuriya) daganna waxa ay yiraahdaan (Caruurku saddex meelood labo waa abtigii) waxaa kaloo Soomaalidu dhahdaa wiilkaagu waxa uu hiil kaa rabaa marka aad hooyadiis dooneyso. marka inanka guurdoonka ahi waa in uu si weyn uga fiirsado cidda & qoyska uu ka guursanaayo aad u fiiriyaa dhaqanka qoyska gabadha & diintooda.

Arrintaan oo saamayn ku yeelan doonta ilmihiisa waa inuu baaro doonista gabadha ka hor taariikhda qoyska dhinac walba ee aaney noqon arrinku "qaboo qolka

gali" kadibna si fudud qoyskii ku burburo, micnuhuna maahan in uu jiro reer ama qoys wada wanaagsan ee waxaa laga eegayaa sida guud & magaca wanaagsan ee reerkaasi bulshadiisa uu ku dhex haysto.

8. **Nadaafaddu** waa mid ka mida walxaha aadka muhiimka u ah ee gabadha lagu xulanaayo waayo nadaafaddu waa diin; waxaana ku soo arooray Xadiith (Nadaafaddu iimaankey ka mid tahay) cibaadooyin badan oo salaaddu ugu horeyso Xadiith ayuu Rasuulku (Scw) ku yiri Allaah (Sw) waa mid wanaagsan, wanaagana jecel, waa nadiif, nadaafadda jecel, nadiifiya daaradihiina, hala mid noqonina Yahuudda.

   Qofka caadiga ah ee Islaamka ahi waxa uu jecelyahay nadaafadda, waxa uu ka caroodaa oo dhiba qarmuunka & wasaqda, waxa uu aad uga xumaadaa in gurigiisa, cuntadiisa, caruurtiisa & xaaskiisa ku arko nadaafad darro & ur uu dhibsanayo waayo xaaska wanaagsani waa midda jirkeeda & dharkeeduba carfayaan, gurigeedu nadiif yahay, carfoon yahay, ilmaheedu nadiif yihiin, dhar & jirba, odaygeeduna uu farxayo markuu aqalka soo galo, ilmuhu ka hor yimaadaan iyagoo carfaya, (ma wir wiro jirkaan lagu wadayn weelka dhaashiga'e). marka nadaafaddu aad bey ugu wanaagsantaahay qofkasta ee Islaam ah.

Sidee inanku ku ogaan karaa inanta uu doonayo in ay tahay mid nadaafad leh? waxaa laga ogaan karaa nadaafadda gurigooda & nadaafadda dharkeeda, marka waa in uu wiilka guurdoonka ahi uu booqdo guriga reerka uu ka guursanaayo, ama u dirsado cid isaga wakiil ka ah, sida (Hooyadii, Walaashii) Iwm si ay reerka ula soo sheekeystaan una soo eegaan arrimo badan oo guurku ku xasilayo nadaafaduna ka mid tahay gabadha & qoyska intaba waayo gabadhu waxa ay u dhaqmi doontaa sida ay ku bar-baartay ee hooyadeed & walaalaheed ay ka aragtoo ay ka baratay.

9. **Qaraabada fog** oo laga guursado waa wax aad u wanaagsan waayo qaraabada aadka kuugu dhaw oo aad guursataahi waxaa ka dhasha inta badan khilaaf & is qab qabsi soo noq noqda & kala fogaansho qoyska dhexdiisa ah, iyada oo waajib dhiiniya tahay in qaraabada laxiriiriyo hadana waa in guurka & qaraabada lakala durkiyaa si looga fogaado khilaaf & nacayb dhexdooda saameyn xoog badan ku yeesha.

   Sidoo kale qaraabada dhaw guurkeeda waxaa ka imaada in ilmuhu lakala jirsadaan labada qof marka khilaaf dhexdooda yimaado taas oo saamayn aad u xoogan ku yeelaneysa qoyska oo dhan ilmahana daciifineysa caqli ahaan & jir ahaanba, sababtu waxa ay lakala safteen labada waalid waxaana ka dhalan karta

arrinkaas iyada ah is nacayb ilmaha dhexdoodaa, kala fogaan & kala qoqobnaan raad xun ku reebta ilmaha & mustaqbalka dhammaan reerkii dhisnaa oo dhaqnaa.

Waxaa lawariyaa Xadiith oranaaya “haguursanina qaraabada aadka u dhaw maxaa yeelay cunugu waxa uu abuurmayaa isagoo taag daran”, Cumar (Rc) waxa uu dhihi jiray “guurka fogeeya si aydaan u dhalin ilmo daciifa”, waayo awoodda ilmuhu arrin muhiim ah.

Waxaa ka dhalan kara guurka la dhaweeyo caafimaad ahaan cudurada lakala dhaxlo oo ku xoogeysan kara ilmaha haddii hooyada & aabaha isku hiddo yihiin, markaan sidaas leenahay uma jeedno in aaney qaraabadu is geyn ee qaraabadu waa is guursan karaan haddii gabadha & wiilka laga helo sifaadkii guurka lagu xulanaayay balse waxaa aad u wanaagsan haddii aad heleyso gabar ama wiil aad kaaga durugsan oo leh tilmaamaha wanaagsan ee lagu xusho qofka la guursanaayo, si qoysku u noqdo mid aad u hagaagsan.

Bulsho ahaan waxaa wanaagsan in qaraabada lakala leexiyo si ay u ballaarto isuguna xirmaan bulshada oo dadka dhalasho ahaan lakala fogaa ay guurkaas & xididnimadaas isugu soo dhawaadaan oo isku xirnaan & is xiriirini ay ka dhalato, waxaadna ogaataa Soomaalida waxaa dhaqan u ahayd haddii laba qabiil

diriraan oo dagaalku dhibaato weyn geysto marka laheshiinaayo waxaa la isi siin jiray gabdho labada dhinac ah taas oo isku soo dhaweyneysa xiriir aad u dhawna dhalineysa & caafimaad qab dhexdooda ah.

10. **Jacaylku** waa in uu ka bilawdaa taxliil-ka & baaritaanka arrimaha sagaalka qodob ah een kor ku soo xusnay, markey saldhigaan kadib jacaylkaas ayaa suurgalinaya inta badan qoys nagaada oo farxad & nolon qanaaco leh ku noolaada.

    Marka aad fiiriso jacaylkii & guurkii ku dhisnaa "waxaad taqaan guurso waxaad taqaan halaguu dhalee" ama guurkii ku dhisnaa dhaqankeenii hore ee awoowayaal & ayeeyooyin waxaa aad u yaraa ama ladhihi karaa majirin furiinka & kala tagga faraha badan ee qoysaskeena casrigaan haysta, marka waxaad arkaysaa jacaylka dhabta ahi waa kan abuurma guurka ka dib, kuna yimaada xulashadii guulaysatay.

    Jacaylka maanta ee dhalinyaradu iska baranayaan dugsiyada, jaamacadaha, shaqada & aaladaha casrigaa ee aan la iskuba arkayn ka fool ka fool ee war & sawir la isku jeclaanayo jacaylka noocaa ahi badanaa manoqdo mid miradhal noqda waayo mamaro hanaankii suuragalin lahaa inuu abuurmo jacayl dhab ah & qancin huban, sidaa daraadeed waxaa badan

burburka qoysaska ku abuurma jacaylka beentaa & barashada bilaashkaa, baaritaan lasameeyay waxaa lagu ogaaday in 88% guurka ka dhasha jacaylka maanta uu ku dambeeyo furiin, halka guurka ku dhisan dhaqanka umadda & diintooda 77% uu waaro oo si guul & gacaltooya ah uu ku socdo markasta.

Allaah (Sw) wuxa uu Qur'aankiisa ku tilmaamay inuu yeelay (galiyay) labada isqabta dhexdooda "Kal-gacayl & Naxariis", waxaa kala duwan labada eray ee "Jacayl & Kal-gacayl" Jacaylku waa dareen caadifi ah oo ku dhasha qalbiga & damac waxaana suuragala inuu si fudud ku fashilmo, badanaana waxaa lajilaa jacaylka guurka ka hor, waana wax qofka cagliga lihi ogyahay.

Haddey suurtagasho in labadii qof ee is jeclaatay guur dhexmaro inta badan maguuleysto guurkaas sababtoo ah caadifad, lab-lakac & wax yaabo sawirnaansho ah oo muuqaalka ku eg ayuu ahaa jacaylkaasi, laakiin Kal-gacaylka & Raxmaddu waxay ka beermaan guurka oo ay ka horeeyan, Kal-gacaylku waxa uu keenayaa isku dul-qaadasho haddii laba qof ee isqaba dhib soo gaaro ama uu yaraado jacaylkii la isku haayay billowgii hore.

Waxay xaasku ku dadaashaa markasta raalli galinta & garab istaagga ninkeeda, Kal-gacaylku waxa uu u gudbaa si la isku raalli galiyo qaraabada ninka oo ay

gabadhu xiriiriso, booqato haddiyadna u geyso hooyadii & aabihii, dhaqankaa wanaagsan waxaa keenaya Kal-gacaylka & Raxmadda Rabbi inoo sheegay, lamana heli karo guurka & aqal galka ka hor wanaaggaas qiimaha badan ee qofku uu samaynaayo.

Waxaan intaa ku soo koobayaa Tobankii qodob ee aan ku tilmaanay oon kagana hadalnay arrimaha gabadha lagu xusho kuwaas oo ahaa (Islaamka, Wanaagga, Wacyiga, Xishoodka, Adeecidda, Quruxda, Nasabka, Nadaafadda, Qaraabo fog & Jacaylka) Allaah (Sw) toosnaanta & wanaagga hana haleeshiyo dhamaanteen.

Sidee gabadhu uga dooran kartaa saygeeda ragga faraha badan ee u soo bandhigaya damaca guurka ama soo doonaya? Waa muhiim inaad jawaabtaas hesho.

In badan waxa ay wadaagaan doorashadii xaaska ee aan ka soo hadalnay taas oo ahayd tilmaamaha lagu xusho gabadha, waxaase jira wax ka duwan kuwaas.

Inta aanan gudaha u galin qodobada qiimaha badan ee gabadhu ku xulanayso saygeeda mustaqbalka waxaan ka hormarinaynaa saddex talo oo aan u soo jeedinayno gabadha hadda xaaska ah & kuwa u socda in ay guursadaan oo wadada guurka ku jooga Insha Allaah.

b) Ku raalli noqo oo ku qanac waxa Rabbi kuu qaybiyo ee ninkaaga kuugu soo dhiibo, ha ugu caroonin saygaaga waxaan Rabbi kuu qorin oo calafkaaga ahayn.

t) Ninkaaga u ducee salaadda dhexdeeda & markasta oo aad ducaysanayso in Allaah (Sw) taageeradiisa & hanuunkiisa siiyo, waa muhiim arrinkaan wanaagsan.

j) Ninkaaga adoon u noqo (si daacadnimo ah u la dhaqan, baahidiisa ka caawi) waxa uu kuu noqonayaa adoon adigana, waa dhaqan aan la wada helin midkan.

Waxaa layiri (Nafi qof u roon raacday) noloshiinu waxa ay noqonaysaa mid liibaanta, ixtiraam ninkaaga wuuu ku ixtiraamayaa, farxad gali wuu kugu farxaa, waxaa kaloo la yiraahdaa "gacal waa gacmo is dhaafay".

Gabareey waxaad iska hubisaa inta aadan dooran saygaagaaga mustaqbalka Lixdaan shardi si aad u hesho nin kuu qalma & guur aad ku nagaato oo ku farxad galiya abidkaa, shuruuduhuna waa sidaan:

1. **Islaam** waa in uu yahay saygaagu, gabadha muslimadda ah mageeyo nin aan islaam ahayn, hadaad guursato nin aan islaam ahayn waxaa qasab kugu ah in aad qaadato taladiisa & maamulkiisa, waxaad kaloo ku qasbantahay inaad daacad u ahaato oo hogaamintiisa

raacdo, qofka muslimka ahna marnaa looma ogola inuu hoos tago gaalo oo awaamiirtooda qaato iayaga, waana muhiim inuu isku tashto oo danihiisa isagu qabsado.

Islaamka & dadkiisuba iyagaa sareeya ee lagama sareeyo marnaba, marka waa in aad guursataa gabarey qof islaam ah oo kaa fekera kaana warwara markasta.

2. **Adeecid** waa inaad ku guursataa ninka oo uu yahay marka hore nin Allaah (Sw) warkiisa yeela oo adeeca una hogaansan, Allaah ayaa waxa uu nagu leeyahay "ma eka oo la islama simi karo qof Allaah (Sw) rumeeyay u hogaansan & qof fallaaga ah oo Allaah (Sw) caasiyay", Nabigana (Scw) waxa uu nagu yiri "guursada dadka kufkiinaa (idiin qalma) una guuriya.

   Marka waxaa iska cad in inanka aad guursanaysaan ay haboontahay inaad ku doorataan diin marka ugu horaysaba, sidaa daraadeed waxaa hubanti ah inanta diinteeda islaamka ah ku dhawrsan ineysan u qalmin inan bilaa diin ah waayo ilmaha uu dhalo qofka aan wanaagsanayn waxaa looga baqayaa in ay dariiqa ama wadada aabaha maraan oo ay dhaqankiisa xun ku daysadaan waayo horaa waxaa loo yiri "geedba dhacaankiisuu dhalaa", waana sax oraahdaan wacan.

Dhanka kale ninka xumi xuquuqda xaaska ma ilaalsho oo xad-gudub badan ayuu kula kacayaa, Al-xasan Cali (Rc) ayaa nin kala tashaday gabadha yaan u guuriyaa rag badan baa iga soo doonay, waxa uu yiri "u guuri gabadhaada nin Allaah (Sw) ka baqaya, hadduu jeclaadana waa maamuusayaa oo meel wacan ayuu geynaayaa, hadduu nacana madulminaayo o".

Imaamu Shacbi (Rmh) waxa uu yiri "ninkii gabar siiya nin caasiya qaraabadii ayuu gooyay si loo ogaado wanaagga & xumida sayga", waxaa laga eegayaa saaxiibadii & dadka uu ku xiranyahay ee uu bulshada ka door biday, waayo qofku waxa uu ku diinyahay saaxiibkii & dhaqankiisa, waxaana dhahnaa "saaxiibkaa kuma cadeeyo kumana madoobeeyo ee diintiisuu kuu yeelaa"waxaana kaloo layiraa "ninkaad rabto inaad barato saaxiibkii ayaa la eegaa".

3. **Awood** waa in aad ku xulataa ninka aad dooneyso inaad guursato, waa in uu heli karo ninka aad guursanayso minan, masruuf & marashi iyadoo loo eegayo inta ay la ekaanayaan, taasi waxa ay ku xirantahay qofkasta & haysmadiisa & waxa uu Allaah (Sw) u suurtagaliyay, nina u badan, nina u yar.

   Laakiin waa in ninka aad guursanayso uu heli karo guri aad dagto, biil joogtaa haba yaraado, dhar aad

xirato & wixii wax lagu cuni lahaa (maacuun) waxaa kaloo soo galaya baahida guurka waa in uu yahay ninka aad guursanayso mid qaadi kara ama xambaari kara mas'uuliyadda guurka oo ehel u ah arrinkaas.

Haduuse noqdo qof aan qaadi karin mas'uuliyadda ka dhalanaysa guurka ma mudna in laguursado ninkaas, waa in qofka laguursanayo fikir & wacyi ka haystaa nolosha guud ee guurka & dhaqidda reeraha, ee aanu ahayn mid damac & doonis aan dareen lahayn kaliya xambaarsanoo dayacaad & dar xumo u keenaya reerka.

Gabadha & reerkeeduba waxa ay ka ogaan karaan wacyiga & garashada wiilka guurdoonka ah hadaladiisa & sheekeeyinkiisa laxiriira arrimaha aan kor ku soo sheegnay, sidoo kale waxay waydiin kartaa gabadhu aragtidiisa laxiriirta dhaqanka qoyska & waydiimo laxiriirta aragtidiisa mustaqbalka reerka & arrimaha kale ee iman doona, su'aalahaas & doodaas furan waxaa laga ogaanayaa caqliyaddiisa laxiriirta dhamaan arrimahaan soo sheegnay o qoyska la xiriira.

Waxaa kale oo ay u kuur galayaan si ay u ogaadaan mas'uuliyad inuu qaadi karo & inkale habka uu ula dhaqmo qoyskiisa sida marka reerku uga baahdaan caawin, shaqo & habka uu u ilaalin jiray wax barashadiisa ama shaqadaas, haddii ay soo baxdo in uu

arrimahaas ku fashilnaa waxay u badantahay in mas'uuliyadaan cusubna uu ku fashilmo, waayo waa arrin garaad & garasho dheer u baahan maamulkeedu.

4. **Sharaf** ku dooro ninka aad guursanayso, gabadhu waa ina ay guurkeeda u xulato nin reer fiican ka soo jeeda oo qoyskiisa lagu yaqaan dhowrsanaan & edab, qoys isku duubni & iskaashi ku caan ah, qoys qadarin & qeyr jecel, waayo qofku waa qoyskiisa rag & dumarba.

5. **Dabeecadda** wanaagsan waa diin, waana in gabadhu xulataa waalidkeeduna u xulaa nin dabeecadsiisa, dad ladhaqankiisa & diintiisu hagaagsan tahay, sababtoo ah akhlaaqdu waxay saamayn wayn ku yeelanaysaa socodka ama itijaaha noloshiisa & sida uu ula dhaqmayo dadka ku xeeran isaga oo dhan.

   Ninka gabar doonaya waxaa laga eegayaa akhlaaqdiisa dhinacyadaan: deeqsinimada, runta, cadaaladda, dulqaadka, naxariista, xakamaynta carada & xishoodka, arrimahaan waxay inantu ka ogaan kartaa dadka inanka ku dhaw dhaw sida: dariska, saaxiibada, xaafadda, goobaha shaqada & waxbarashada, intaas oo meel waxaad ka ogaan kartaa dhaqankiisa.

6. **Quruxda** inkasta oo aanan la isku raacsanay hadana waa waxa kaliya ee qof walba oo guurdoon ahi eego

uuna jeclaado inuu ka helo qofka uu guursanaayo ama nolol lawadaagaayo, waana muhiim quruxdu, balse waxaa muhiim ah in la ogaado qoraxda & qof walba sida uu u yaqaano ama ay ula muuqato isaga.

Sayidinaa Cumar (Rc) waxa uu oran jiray "gabadha ha u guurinina ninka foosha xun ee liita, u doora gabdhaha waxaad naftiina lajeceshihiin" waxaa soo galaya hay'adda quruxdeeda nadaafadda & quruxda, waxaad arkaysaa sida muslimiintu u dhowrayaan xaqa gabadhu u leedahay in ay guursato ama loo guuriyo nin leh sifaad & tilmaamo wanaagsan sida ninkaba aan ku soo sheegnay marka uu gabadha doonayo inuu ku doorto quruxda & hay'adda wanaagsan, waxaan iyana horay uga soo hadalnay kana mid ah tilmaamaha xulashada jacaylka & guurka ilma adeerka aad isugu dhaw, waxaana uga maarmaynaa warbixintaan horay uga soo bixinay arrimahaas oo idil.

Gabo gabadii waxaan kula talinayaa gabar kasta oo guur isku diyaarisay dooneysana nolol hagaagsan oo qanaaco & nagaadi leh haku noolaato arrimahaan soo socoda si hagaaga mustaqbalkeeda ay qeyb uga noqoto.

b) Haguursan gabareey nin aadan ku qancin adigu qoyskaaguna raalli ka ahayn, qanaacadaada & tan waalidkaaba waa wada muhiim ee ogow taas gabar.

t) Ugu horeyn si wanaagsan oo aad u saraysa isaga baar ninka ku soo doonanaya diintiisa & dhaqankiisa (akhlaaqdiisa) ka hor inta uusan ku soo doonin adiga.

j) Haguursan nin aan reerkiina kaa soo doonan oo hadayacin sharaftaada & tan qoyskaaga, ha iska dhigin baadi cidlo laga helay, xasuusnaw xuquuqda waalidkaa, ilaali sharaftooda; ku qanci ninkasta oo kuu soo bandhiga arrimaha guurka in uu reerka arrinta la hortago una sheegto waxa uu kaa doonaayo.

Dadkii hore ee Soomaalidu waxa ay ahaayeen sida aan horay u soo sheegnay dad aad uga fikira mustaqbalka, xulashadoodana waxay ku salayn jireen qodobadaan soo socda ee aadka u qiimaha badan waxyna yihiin:

1. **Diinta** Nabigeenu (Scw) waxuu na faray inaan gabadha ama wiilka ku doorano diin, hadaba waxa la doonayaa in labada lammaane ay aad isaga eegaan qofka ay nolosha lawadaagayaan sida uu ku yahay diinta & waxa uu ka aaminsanyahay & sidoo kale waxyaabaha asaasiga ah ee diintu ina faraysoo idil waa inaad eegtaa.

   Waxaa ayaantan dambe soo baxay oo la arkayay dad soomaali ah oo la leeyahay waa kirishtaan ama shiico kuna qanacsan, midabka & hadalkuna waa soomaali; hadaba intaadan jacayl aadan kula dhicin qof wuxuu

aaminsanyahay aadan aqoon iska eeg oo aad isaga hubi diin ahaan wuxuu aaminsan yahay qofku & waxa uu aaminsayahay barasho ka hor, waayo diintu waa furaha nolosha, waa saldhigga xiriirka adiga & Allaah (Sw) idinka dhaxeeya kaas oo wanaag kuu horseedaya.

Wuxuu Allaah (Sw) inoo keenay dunida inaan isaga oo kali ah caabudno, qofkaan diin lahayn oo ilaahii abuuray inkiray adigana barri ayuu ku inkirayaa, sidoo kale qofkii aan Allah (Sw) xiiir la yeelan adigana xiriir fiican kulama yeelanayo ee ogow taas, waxaana jira aayad macnaheedu yahay, "qofkii ka jeesta xuska Alle waxaa u sugnaatay nolol ciriri ah aduunyada, aakharana nolol taas ka sii xun ayaa uga horeysa".

Marka guurdoonow ka digtoonaada inaad qoys la dhisataan qof diintiisa & wuxuu aaminsanyahay aadan garanayn, hadaba si aad ku ogaato qofka waxaa muhiim ah inaad inta haasaawuhu idiin socdo maalinba aad su'aal muhiima waydiisid oo dhinacyada caqiidada, saladda, soonka, xajka iwm, markaad ku qanacdo qofka diintiisa guurso markaas Insha Allaha.

2. **Aqoonta** waa xirfadda labaad ee ladoonayo in aad ka baarto wiilka ama gabadha ka hor inta aadan guursan, waayo Aqoontu waa furaha guusha, waa fahamka qofka, waana hantida runta ah ee qofku leeyahay amauu haysto, waa dadnimada & dareenka wanaagsan

Aqoonta waa wax la galiyo dadka maskaxdooda lana baro, sida aqoonta diinta & midda maadiga, farsamada gacanta & xirfadaha kale ee ladoonayo qofku inuu barto si uu umaareeyo noloshiisa, midda ehelkiisa & tan wadankiisa intaba, waxaana la ogaaday bulsho kasta inta aqoonteeda & mihnadeedu la egtahay ayuu horumarkeedu yahay & habsami u hayaankoodu.

Guurdoon hadaad dooranaysid mustaqbal aad u qurxoon waxaad xulataa qof aqoon leh, qof aad fahmaysid, qof kuu jiida wadada wanaagsan ood ka faa'idaysatid, xulo qof ay balwad u tahay aqrinta & aqoonta, baro qofkaad xulanaysid fikirkiisa, dareenkiisa, dadnimadiisa, xulashadu waa muhiim inaad aqoonsatid qofka aad guursan rabto aqoontiisa.

3. **Dhaqanka** waa qodob aad muhiim u ah in aad doorashadaada ka hor aad baadho, dhaqanku waa hooyada dhaq dhaqaaq kasta oo aad samayso, tusaale qofku haduu hab qaawan u labisto ama hadal xun yiraahdo ama waxaan laga filayn sameeyo oo u qalmin waxaa la yiraahdaa dhaqan xumuu la yimid ama waa dhaqan xun yahay waayo waxa uu sameynaayo sax maahan, marka dhaqanka qofka aad ggur ka doonayso aad isaga eeg oo haku deg deign.

Erayga dhaqan macno badan ayuu leeyahay, hadaan Soomaali nahay dhaqankeena aan ku faano ceeb ma

lahan oo aad ayuu u qurxoon yahay; waa udgoonyahay, waana nadiif dhaqankeenu intiisa badan, waxaana sal u ah diinta oo aabayaashii & hooyooyinkii aan ka farcanay waxa ay wada ahaayeen dad Islaam ah oo ku dhaqma sharciga Islaamka, Si fudud hadaan kuugu sharaxo dhaqanka "qofkaan hab dhaqankiisu ku qancin ka joog", waayo hab dhaqanka qofka wuxuu isugu jiraa oo laga qiimeeyaa hadalkiisa, labiskiisa & fikirkiisa, intaa kadib waaxa aad si aad ah u fahmi qofka dhaqankiisa & meesha uu kaa xigo.

Dhaqanka sida uu ku qoray Khaliif Ashkir Diini, buugiisa dhaqan dhumay dhib badanaa, Wuxuu sheegay in waxkasta oo xumaaday ay sabab u tahay dhaqankii oo laga tagay, sida dhaqanka hadalka, dhaqanka labiska, dhaqanka guurka, dhaqanka fikirka, dhaqanka wax wada cunka, wuxuuna ku adkaysanayaa in wax kasta oo qaloocday dhaqankoodii laga tagay kadibna ay xumaadeen oo laga dhaxlay waxaan wanaagsanayn oon loobaahnayn

Inkastoo Soomaalidu isku dhaqan yihiin si guud hadana waxaa jira wax yaabo gobolada Soomaalidu ku kala duwan yihiin deegaan ahaan, maah maah ayaa oranaysay "waxaad ceebta u taqaan nin bey caadadiisa tahay" waxaa kaloo jirta maah maah kale "nin wax la toosan ayaa nina tuur la leh". Waana aragnaa arrintan.

Marka hab dhaqanku waa muhiim, waana lagu kala duwan yahay ee dooro guurdoon qof aad isku hab dhaqan tihiin ka hor intaadan la kulmin wax aadan qaadan karin oo ninkaaga ama naagtaada & ehelkoodaba caadi u ah adna ceeb weyn kula ah.

Waxaa kaloo sanadahaan soo baxay dad qurbaha ku soo koray oo aan fahamsanayn dhaqankeenii wacnaa & wanaagiisa, marka waxaad ka hubisaa qofka aad dooneyso inaad guur lawadaagto dhinaca dhaqanka in farqi weyn idiin dhexeeyo labadiina intaadan guursan ka hor oo hadhow aadan ka shallaayin guurkaas!. Walwal & walaacna aadan lakulmin guurkiisa ka dib.

4. **Ixtiraamka** wuxuu ka mid yahay dabeecadaha wanaagsan ee dadka Soomaalida, sida ixtiraamka rayi'ga, dariska, gogosha, xididka & dhammaan bulshada oo idil, ixtiraamku waa inaad siiso qofka kale fursad aad ku dhagaysato rayi'giisa ama taladiisa; isla markaana aad ugu gudbisid fikirkaaga qiimaha badan isaga si hufnaan & xurmo ku jirto, waxaadna ogaataan in qofka inta uu ixtimaamo ra'yiga qofka kale uu fahamkiisu ku xidhan yahay & isku soo dhawaan shahooda & is rabitaankoda labada qof ee guursanaysa.

Ixtiraamku waa wax yaabaha lagu kala sooco dadka & duunyada, qofkaad ixtraamka ka qaado oo aad ku tiraahdo erayo xun, waxaad kicisay ood shiday

dareenkiisa dadnimo, wuxuuna galayaa is difaac & inuusan adigana ku dhagaysan taasna waxaa ka dhalata dhibaato horseedda faro isku taag & fowdo, marka ixtiraamka dadka kale waa arrin aad muhiim u ah.

Hadaba marka ugu horeysa ee la is barto marxalada shukaansigana lagu jiro waxaad arkaysaa in aad la isku ixtiraamayo, aad la isku dhagaysanayo, aad la isugu garaabayo oo aad la isugu jilicsan yahay, Marka waxaad hubisaa in ixtiraamku xirfad u yahay dookhaaga oo aysan ahayn wax ku yimaado xiiso & xilliyo gaar ah ee waa in uu noqdaa ixtiraamku mid lafal gala dhamaan dabeecadaha noloshaada oo aad qofka walaalkaa ah ama damacu kaaga jiro aad ku xitiraamtaa ra'yiga, dhagaysiga, dookha, gogosha & dhamaan wax yaabaha kalee ixtiraamka mudan, adiguna waxaad heli intoo kale.

5. **Akhlaaqda** waa shay aad muhiim ugu ah nolosha dhamaanteed waxaana akhlaaqda asal ama sal u ah xishoodka & qofka hab-dhaqankiisa wanaagsan, ilaaliyayna anshaxa naftiisa, waxaadna ogaataa qofku inuu ku filan yahay inuu toosiyo ama dhiso reer anshax & akhlaaq wanaagsan, qofka ficilkiisa & hadalkiisaba aad ka waydo xishood akhlaaq wanaagsan ugu tagi mayside iska ilaaw qofkaas oo ka feejignow guurdoon.

Qofku wuxa uu banaanka keenaa waxa uu aaminsanyahay shar & khayr intaba, waxuuna ku soo bandhigaa hadalkiisa & ficilkiisa, ogow qofka akhlaaqda xun waxaa lagu gartaa dadka uu la socdo & akhlaaqdooda, waxaa kaloo muhiim ah hadaad dooneyso inaan fahamto qofka aad rabto akhlaaqdiisa waxaad eegtaa markasta ama aad lasheekeysataa dadka ay sheeko wadaagta yihiin, waxaana markiiba halkaa kaaga soo baxaya dhaqanka qofkaad dooneyso inaad wax ka ogaato & sida uu yahay guud ahaanba.

Maah maah soomaaliyeed ayaa waxa ay oranaysay "shimbirba shirmbirkiisuu la duulaa" waxaa kaloo jirta murti ah "qofkaad doonayso inaad barato saaxiibkiis baro" marka waa inaad aad uga hubisaa qofka aad nolosha lawadaageyso dhinacayada anshaxa & akhlaaqda inta aadan nolol la wadaagin ka hor.

6. **Dabeecadda** waa saldhigga ugu weyn horumarka qofka, waxaana la sheegay in qofkii dabeecad wananagsan leh uu yahay qaf aan ka baqayn nolol xumo & wehel la'aan intaba, dabeecada & dad la dhaqanku waxay ka mid yihiin qodobada ugu muhiimsan ee laga rabo in qof walba laga helo si uu u xaqiijiyo nolosha wanaageeda oo idil, sidoo kale waxaad halkaas ka garanaysaa in dabeecadddu saldhig u tahay qoyska noloshiisa & nagaadigiisa, waana la

jecelyahay qofka dabciga leh oo waa lagu faanaa lana jantaa dabcigiisa wanaagsan markasta & meelkasta.

Waxaa kaloo muhiim ah in labada qof ee guurka iska raba in dabeecad ahaan midba midka kale fahmi karo wuxuu jecal yahay, wuxuu neceb yahay, sida uu u jecelyahay inuu u labisto, habka macaamilkiisa & dhammaan heerka dhexgalka bulsho ee qofkasta leeyahay waayo arrinkaan wuxuu keeni karaa inuu qofku aad u fahmo hab nololeedka qofka kale ee uu doonaayo si ay u noqdaan laba qofood oo xaqiijiya fahamka nolosha, sidoo kalana noqda qoys aad u wanaagsan oo nolosha ka gaara meel aad u sareysa.

Sidaan soo sheegnay qofka dabeecadda leh dadka waa laga jecel yahay, qofka aan dabeecad & dad la dhaqan lahayna waa laga cararaa oo waxba lalama wadaago, waayo waxaa aad loo hubaa in aan lala heshiinayn, dabeecaddu waa hab dhaqan qofku ku dhegay oo la fal gala dhammaan hadalkiisa & ficilkiisa, hadaba qofka dabeecada wanaagan see lagu gartaa oo lagu xulan karaa? waa muhiim su'aashaan jawaabteedu.

Waxaa jira tilmaamo lagu garan karo qofka dabcigiisa wanaagsan waxaana ka mid ah: dad la socodka, miyirka, daganaanshaha, Af-gaabnida, Qanaacada, hogaansami, aaminaad & furfurnaan ama muuso & qaar kale oo badan waa inuu ku sifoobaa qofku.

Dad la socodka waa qof dadka ku dhex jira oo isku wadi kara, naxariis badan, dad & bulsho badan, aad loo jecalyahay markuu yimaado, markuu maqan yahayna la tabo, shaqadii loo dirana ka soo baxa oo si wanaagsan u qabta oo u maareeya oo aan dayicin amaan ka wehsan had & jeer wixii lagu aadiyo.

Miyir qab ayaa lagu gartaa qofka dabeecada leh & sida wacan ee uu howlaha u qabto una kala horumariyo, sidoo kale qofka dabciga leh oo miyirka qaba waxaa lagu gartaa sida uu uga jawaabo mashaakilaadka waaweyn ee uu la kulmo, Qofka aan miyirka lahayn wuxuu isku qasaa shaqooyinka uu haayo oo middii u damaysay ayuu soo hormariyaa ama fudayd ayaa dhaafinaya wixii uu qaban lahaa, wuxuuna ka dhiganyahay qof aan waxtar u lahayn naftiisa, ehelkiisa & bulshadiisaba, waana qof lagu qasaaray qofkaas.

Daganaanshaha waa tilmaamaha ugu wanaagsan ee qofka dabeecadda badan sii horumariya, qofka waxaa soo maraya warar ama dhacdo saamayn badan, wuxuu si dagan uga jawaabaa dhacdadaas isagoon ku fududaan, Qofka dhacdooyinka la wareera oo markiiba isagoon hubsan la booda inta badan wax buu haleeyaa oo sii xumeeyaa mana lahan daganaansho caadifadeed oo uu isku celiyo ama ku maareeyo dhacdooyinkaas ama sheekooyinkaas soo maray run & been waxay doonaan ha ahaadeene, sifada fudeydkana waa tilmaan

aad loo necebyahay oo aanan fiicnayn, marka dabeecada wanaagsan waxaa lagu yaqaan in wax la hubsado oo la fahmo intaan ficil la samayn ka hor.

Af-gaabnidu waa in qofku qabsado howshiisa, wuxuusan lahayna gacanta la galin, sidoo kale inaan hadalkaagu badan oo hadalka kiisa muhiimka ah ka raacdid, qofka afka-gaaban kama dhex galo hadalka dadka, mana ahan qof xiran oo waji macbuus ah oo aan dadka lahadlin oo geeri go'an ah oo meel ku xabisan, waa qof fahamsan inuu booskiisa ku filnaado oo qof kale howlihiisna aan galinoo shaqooyinkiisa yaqaan, sidoo kalana aan dhac dhac badnayn oo is ilaaliya.

Qaneecada waxay qofka ka dhigtaa qof dareensan dhammaan wuxuu samaynaayo & natiijadda ka dhalata, wuxuu qaataa qofku mas'uuliyaadkiisa, wuxuuna aaminsan yahay in uu gaari karo wuxuu ku haminaayo & wuxuu dareenkiisu doonaayo, qofka naftiisa ku qanacsan wuxuu buuxiyaa kaalinta uu bulshada ku leeyahay, wuxuu qabtaa shaqo uu ogyahay natiijada ka dhalanaysa, sidoo kale qofka naftiisa ku qanacsan wuxuu gaaraa guulo waawayn uusan gaarin qofka naftiisa liida oo aaminsan inaanan wax laqaban karin, qofka naftiisa ku qanacsan wuxuu ka mira dhaliyaa go'aamada & ujeedooyinka u dagsan isagoon ka caajisin, qofka naftiisa ku qanacsan waa

geesi aan gamban waana tusaale wanaagsan oo lagu daydo, waa halyeey lagu hirto oo loo soo hargalo.

qofka qanaacadu waxay u yeeshaa qab & han wayni uu ku qabto dhamaan shaqooyinka uu hayo, qaneecada nafta waxay ka mid tahay debeecadaha wanaagsan ee qofka, waa awood xoog badan oo soo saarta qiimaha qofka & noloshiisa, qanaacadu waxay raad fiican ku leedahay muqstaqbalka qofka & waxtarkiisa, waxayna ka mid tahay qodob ay caan ku yihiin dadkii dunnidda wax ku soo kordhiyay ama wax ka bedelay intii ay jirtay, waa dad dhibta dheef u arka markasta.

Hogaansanaanta waa mid kamid ah tilmaamaha wanaagsan ee lagu garanaayo qofka dabeecaadda badan, hadaba qofka dabeecada & dad la dhaqanka leh wuxuu u hogaansan yahay oo si dhab ah u fuliyaa awaamiirtaa Allaah (Sw) isagoo Sunada Suubanaha raacaayo, sidoo kale qofka dabeecadda badani waxa uu u hogaansanyahay dhamaan awaamiirta waalidiintiisa & dadka madaxdiisa ah isagoon iskala weyneyn midna, wuxuu kaloo u hogaansamaa ama talooyinkeeda maqlaa qofka dabeecadda badan xaaskiisa & dhamaan inta talooyinka wanaagsan siisa, aqoon kasta oo qofku leeyahay & darajo kasta oo uu dunidda ka gaaro, hadii qofku uusan cibaadada Eebe u hogaansamin qiimo ma lahan isagoona ku dambaya dhibaato & mustaqbal xumo, marka diin jacaylka & u hogaansamidda

Amarka Allaah (Sw) waxay ka mid tahay dabeecadaha wanaagsan ee qofka laga fiiriyo marka la qiimaynayo wanaagyadiisa oo dil, waana meelaha ugu horeeyaba.

Aaminaada waa tilmaamaha ugu qiimaha badan ee lagu yaqaano qofka akhlaaqda & dad ladhaqanka badan, qofku bulshada uu ku dhex noolyahay hadii aysan ku qanacsanayn amaanadiisa & dhowridda wixii dadku u dhiibtaan, waxaa ka luma sumcadda oo ah shey qaaliya oo aan si fudud lagu kasban karin, aaminaadu waxay ka mid tahay waxyaabaha shareecadu amaantay qofkii aamin noqon waaya wuxuu lakulmaa fadeexad, ceeb & ciqaab ka yimaada wax yaabahii lagu aaminay ee uu haayay qofkaasi.

Qofka caanka ku ah amaanada wuxuu bulshada dhexddeeda ku leeyahay maqaam sare & ixtiraam wayn oo gaarsiiya in loo soo xukun tago ama loo dhiibto wax qofku naftiisa uu ku aamini wayay, wuxuu qofkaasi saamayn weyn ku yeeshaa dhammaan dadka.

Fur-furnaantu waxay kamid tahay xirfadaha waawayn ee qofka dabeecadda leh lagu garto, diinteena shariifka ahna waxay na amraysaa inaan wajigeena furno markasta oo aan u muusoono (dhoolacadeyno) dhamaan dadka, caradeenana aan qarino markastaa.

Fur-furnaanta wajiga waa calaamad xoog badan oo soo jiidata dadka, Shiinuhuna waxay leeyihiin maah-maah

macnaheedu ayahy "qofkaan aqoon sida loo muusooda uma habboona inuu dukaan furto" sidaa daraadeed Fur-furnaanta wajiga & muusada ama dhoolacadeyntu waxay qofka galisaa caafimaad; waxayna xoojisaa fahamka & dareenka qofka, sidoo kale waxay abuurtaa jawi dagen oo qofku ku qiimeeyo xaaladda uu ku jiro, waxay baabi'isaa oo hoos u dhigtaa walaaca & calool xummadda isla markaana waxay qofka u samaysaa xirriir & saaxiibo badan oo aad u jeclaada isaga, ugu dambayn qofkasta oo ribix goob ah waxay soo galisaa faa'iido badan oo uusan ogayn in ay sabab u tahay fur furnaanta & muusada wajigiisa qiimaha badan.

Maah maah ayaa waxa ay ahayd "waji furan ayaa la galaa ee albaab furan lama galo" macnahuna waaxaa weeyaan markaad aragto qof faraxsan oo wajigiisu aad u nuurayo farxad darteed waxaad jeclaanaysaa inaad laqaybsato farxadaas oo aad lawadaagto, hadiise aad aragto qofka wajigiisa xirnaan & caro ka muuqato waxaad jeclaanaysa inaad ka durugto kuuna dhawaan.

Qofka fur-fururan oo muusoonaya waxaa laga soo dhaweeyaa meel kasta oo uu tago mana noqdo marti ama qof qariib ku noqda meesha uu jooga & meesha uu jecelyahay inuu tagaba, waayo waxa ka horeysa oo soo dhawaynaysa fur-furnaanta & muusada oo qofka ka hor mara intii maalin loo socdo oo kale, waana qof aad uga qiima badan, muxtarimna ah markasta.

7. **Talo-wadaaggu** waa furaha nagaadiga qoyska, waa xoojiyaha guriga waayo gurigii talo-wadaag uu ka jiro wuxuu ka muuqdaa dhaqankooda, carruurtooda & noloshooda dhamaan, meeshii talo wadaag laga waayana waxa u dambeysa kala tag & kala fogaansho saameeya dhamaan qoyska, marka hubi in aad dookhaaga ka ilaalisid kaligii talisnimo aan tiisa maahee tukale galin, ama gabar aan dhago lahayn oon waxba maqlayn oo teeda kaliya eegata.

   Guryaha talo-wadaag uu ka jiro ama lagu dhisay waxaa laga gartaa noloshooda, daganaantooda, farxadooda & sida ay u wada shaqaynayaan oo ay u kala talo qaataan had & jeer, waana wax muhiim ah.

   Guryaha aan talo-wadaaggu ka jirina waxaa laga gartaa dhaqankooda & carurtooda waxaana ka jira caruurtooda kala carar & kala fogaansho, marka ka fogow qof aan tiisa ma ahane talo kale galin.

   Sidoo kale gabar aan waxba maqlayn oo dhagaheedu xiran yihiin oo aanan qaadanayn taladaada waxba kuma anfacayso, waana inagii ku soo marnay qaybaha kale ee bug yaraheenna waxay ku dambaysay inantaas.

8. **Kalsoonidu** waa albabka laga galo reerka, hadii aysan jirin kalsooni qoys ma dhismo; waddana lama wada mari karo, xataa shaah lama wada cabi karo haddaan kalsooniyi jirin oo lamaanuhu kalsooni isku qabin.

Kalsoonidu waa wax la abuuro, la koriyo, lana hormariyo, waxaadna ogaataa Shaatiga ama diraca aad qabto hadii aadan ku kalsoonayn jirac aan jirin ayaa kaa qaniinaya markasta, hadaba ogoow qofkaad guursanaysana hadaadan kalsooni buuxda ku qabin ma la dhisi karo qoyskaasi ee hahabaabin.

Kalsooniddu waa shay aad muhiim ugu ah marka qoyska la dhisayo, hadii dhismaha ka dib ay kalsooni darro timaadana waxaa ku imaanaya qoyska bur-bur baahsan, hadaba kalsoonidu waa waxa kaliya ee lagu wada dhaqmi karo oo reerka lagu wada dhisi karo ama howlaha lagu maamuli karo, haddii kalsoonidu bur burto waxaa meesha ka baxaya dhamaan wixii isku xirayay reerka & labada qof ee qoyska cusub dhisaya.

Sidoo kalana waxaa imanaya walaac & walwal baahsan kaas oo sababa in reerku si dhaqsa badan u kala tago & cidkastooy wax isugu darsanaayeen, kalsooni xumida waxaa ka dhasha burbur aad u baahsan inuu yimaado.

kalsooni darada waxaa keena beenta & daacad darada, hadaan ku horeyno beenta waa waxaan jirin oo aad qofka u sheegto, waxaana lagu gartaa beenta waxaa kala duwanaada qofka qowlkiisa & ficilikiisa, tusaale wuxuu kuu sheegayaa inuu ku jecelyahay, hadana wuxuu kuula dhaqmayaa si ka duwan jacaylka uu kuu

sheeganaayo, beentaas waxay dumisaa kalsoonida, waxay sababtaa kala fogaansho labada qof ama qoyska, waxay keentaa niyad jab, qofka sheegana waxay u horseedaa mustaqbalka shalaay & nacayb ballaaran.

Daacad-daradu waa qodob kale oo aad u fool xun kana mid ah tilmaamaha aad ku garanayso qofka aan kalsoonida lahayn haba yaraatee, qofka aan daacada ahayn waxaad ku garan balantaan uguma imaanaysid oo ma fulinaayo waxaad ku wada hadashaan oo adiga & isaga gaarka idiin ah & ballankasta ee uu lagalo dadka kale, sidoo kale waxa uu faafinayaa wixii idiin gaarka ahaa oo waxaad ka maqlaysaa dad kale oo wixii aad isku ogaydeen ayaa meel kale kaa soo garaya, marka qofkaad ku aragto been & daacad darro rag & dumarba kalsooni kuuma hayaan ee ka tasho.

9. **Sabirku** waa adkeeyaha & xoojiyaha nolosha lamaaanaha, waana nuurka nolosha aadanaha oo idil, waa quruxda qoyska & qofkasta, waa wax uusan helin qofkasta ilaa qof nasiib weyn Allaah uu siiyay maahine, hadaba labada qof inta aysan guur galin ka hor waxaa soo wajaha caqabado & dhibaatooyin joogta ah oo la socda nolosha, dadka guurka ka sheekaysanayana waa inay aad isaga hubiyaan sabirka qof kasta ee iyaga ka mida uu leeyahay & waxyaabaha uu u dul-qaato & waxyaabaha uusan u dul-qaadan karin markasta.

Noloshaan dhamaanteed waa imitixaan, geeri ayaa dhacaysa, jiraa dhacaysa, gaajaa dhacaysa, marka sabirku waa u muhiim nolosha dhammaanteed, waxaadna ogaataa inta sabirkaagu dhan yahay ayaana guusha noloshaaduna ay dhan tahay guurdoon.

Sabirku wuxuu kuu suuragalinayaa inaad gaarto meesha aad u socotay, waxaad rabtidna aakhirka aad heshid, noloshaadana aad baraare ka dhigtid & barwaaqo, waxaana kuu horseedaya intaa waa sabirka.

Dhinca kale qofka muslimka ah sabirku waa ku qasban yahay, waayo waxa ilaahay u qoray waa inuu ku sabraa, haduuse ku sabri waayo dhibta gaadha ajar kama helayo kamana baxayo waligiis, marka sabir inaad yeelato waxaa ku jirta dantaada guurdoon.

Waxa lagu sabrayo waa inay tahay waxaad ogtahay inay culays kugu yihiin, waxaana dhici karta in arrin adiga kula fudud ay culays wayn ku tahay qofka kale, amaba la idiin kala waramo oo mushkilad la idin dhex dhigo adiga & qofka kale, sabir ayay u baahan tahay.

Haddaba hadii uusan jirin sabir ama qofkuba aqoon in la sabro waxay abuuraysa in dhibaato dhalato oo arrin fudud aan xal laga gaarin, ugu dambayntiina wada socodkii halkaa ku istaago, marka waa in aad la isaga hubiyaa heerka samirka ee qof kasta uu leeyahay intaan reer lawada dhisin oon guur lagu heshiinin.

10. **Jacaylku** waa abaalgud, abaal-gudkana waxaa la siiyaa qofkii u qalma ee la yimaada sabab & sifo lagu jeclaado, jacaylka aan aragnay ee ah waa kaa helay & anigaa kaa daran & guurka deg deg ah ee ka dambeeya waan aragnay meeshay na geeyeen & dhibaataday noo gaysteen, qof aanad garanayn diintiisa, dhaqankiisa, kalsoonidiisa, dabeecadiisa & caqabadaha noloshiisa ku hareeraysan hadaad dhahdo waan jeclaanaynaa ogow waxaa kugu qarxaya miinooyinka ka buuxa qofkaas oo ahayd inaad si aada iska baadhno intaadan isku dhiibin oo aad baaritaan badan ku samayso noloshiisa.

Jacaylku waa awood kaa xoog badan oo kuu jiidaysa qof kale, awoodaas inta aysan ku jiidan waad iska celin kartaa laakiin markii awoodaasi ku jiidato oo aad aqabasho waad is dhiibtay, hadaba su'aashaan waa inaad is weydiisaa guurdoon, qofka aad isku dhiibayso ma astaahilaa inaad u dhiibto naftaada qiimaha badan?

Jacaylka maanta jira ee ah waa ku arkay waana kaa daba dhacay oo maalmo ka dibna la isku soo urayo oo la is nacayoo la is haaraamayo jacayl ma ahan, gabadhuna ha qiimeyso marka jacaylka loo soo bandhigo sababta & sifaha uu ku jeclaaday wiilku waayo waa halaaggaaga ama horumarkaaga, waxayna u baahan tahay in aad si buuxda u fahamto jacaylka & ujeedooyinkiisa haddii kale waad ku khasaaraysaa.

Jacaylka waa in aad raadisaa ama aqbashaa markaad wax barato oo aad maskaxdaada dhisto, markaad kala saari karto sababta jacaylka keentay & sifaha aad ku jeclaatay qofka, markaad ugu yaraan naftaada maarayn karto oo aad wax soo saar leedahay, markaad qaadi karto culayska jacaylku wato ee hamiga & hurdo la'aanta ah, haddii kale waad dhibtoonee.

Soomalaidu waxay tiraahdaa "beer dhamaanteed tacbasho kuma wanaagsana" dad oo dhana jacayl kuma wanaagsana, halkaas waxaad ka fahmaysaa in aad ku xulato qofkaad jeclaanayso wanaag & wax-tar, aadna ogaato qofka wax ku tari kara & qofka ku turun tureynaya oo taakada kugu noqonaaya mustaqbalka.

Waxaa kaloo la yiri "qufaca & jacayl midna ma qarsoomo, adigu is ma ogid laakiin markii jacayl ku galo waa lagaa garanayaa, waana lagu ogaanayaa xaalad kasta ood ku sugan tahay markasta.

Jacaylku wuxuu kugu qasbayaa inaad aadid meesha uu joogo qofkaad jeceshahay waayo waxaa ku wada dareen kaa weyn oo kuu diidaya inaad meel ka dheer joogto qofkaad jeceshahay, hadaba xanib oo xakamee naftaada, kuna fikir inaadan is raacsiin qof bili'aadam ah, ha jcelaan inta uu ku jecelyahay ka badan, hubi inuu ku jecelyahay qofku sida aad u jeceshahay oo kale, is maaweeli oo masaafuri naftaada si uusan kuu jiidan

jacaylku ama uusan kuugu sababin inaad wajahdo duruufo adag & waxaan kuu cuntamin adiga.

Waxaan ku qancisaa naftaada qadarta & inaadan weyneyn wixii kuu qoran, Rabbigaa kaasho oo raalli gali isaga, jacaylkaaga dhabtaa waad ku dheefsan doontaa, jacaylka qofka aad u qaadeyso waa in aad ku salaysaa tilmaamihii & tusaalooyinkii qiima badanaa ee aan kaga soo hadalnay buugga intiisii badnayd, waa inaad xal u heshaa caqabadaha kaaga imaanaya jacaylka, sidoo kalana aad taqaanaa xal u helidiisa.

Ugu dambayn haddii qofka aad jeclaatay oo dareemi waayo jacaylka aad isaga u qaaday waa in aad dareensiisaa oodan ka baqan, hadaad muddo ka baqato marka dambe jacaylka ku haaya ayaa sababaya inaad dareensiiso oo aad u s heegato waxa ku haaya, laakiin waxaa dhici karta mararka qaar in qofkii aad jecleyd oo aad waliba u sheegatay inaad jeceshahay uu war moog iska dhigo, taasna waxaad uga gudbi kartaa ood ku dawayn kartaa inaad isbadal ku samayso naftaada.

Waa in aad is moogeysiisaa markaaga, waa in aad ka gaabisaa xiriirkiisa, waa in aad candhuuftaada dib u liqdaa oo aad sabir u yeelataa caqabadaha aan soo sheegnay ee uu sababo jacaylku, waa in aad laxisaabtantaa naftaada oo aad ku canaanataa dulqaad in ay latimaado & dadnimo, dareen dheerna waa in ay

u yeelataa naftaad caqabadaha & culeyska jacayku wato waayo waxaad mararka qaar uga tagaysaa qofkaad jeceshahay hurdo & harsiimo intaba.

Isbedelka aad samaysay waxaa dareemi doona qofkii aad jeclayd ee ku raaxaysanayay jacaylkaaga, wuxuuna isku dayi doonaa inuu kula soo xiriiro ama kuu yimaado si uu u hubiyo inaad ka xorowday hogaankii jacaylka ee uu kuu haayay, marna ha ogolaanin intaad qalbigaaga siiso qof aadan hubin waxa uu yahay & sida uu u qadarinaayo una qiimeynaayo qofnimadaada, sidoo kale marna haku daysanin qof ku xumeeyay oo xero cidlaa kuu ooday, ka roonaw oo saamax qofkaas.

Haddii qofkii aad jecleyd kuu soo laabto oo xiriir kaa soo yeesho oo jacaylku xargo ku soo qabto ee meeshii aad ka timid & meel ka fog isagoo joogo uu kuu yimaado go'aanka aad ka qaadanayso adigaa iska leh oo xor u ah, hadaad dadnimo ku ogayd iska dayso, hadaad doqonimo & damiir la'aan aad ku taqaanayna dabaqadda noloshaada ka saar oo danayso ku dheh wiilyahow isku dooq manihine oo day-dayo asaagaa.

Ogow jacayl aan dhugmo & dhiifooni ku imaan dhibaatadiisa waa dhabar-jabkaaga & dhaawac aan laga kacayn dhalinyaro, marka wax badan xeeriya.

F.G: waxaan halkaan ku soo gudbinayaa laba gabay oo aad u saamayn badan kuwaas oo ka hadlaaya guurka &

qiimisiisa, gabayaduna waa isku magac oo waxaa layiraa "guur aan ka la'aado" gabayga 1-aad waxaa tiriyay Allaah (Sw) ha u naxariistee Abwaan Yuusuf Maxamed Xirsi oo ku magac dheeraa "Aw Yuusuf Barre", gabaygu wuxuu tusaalaynayay kuna hal qabsanayay abwaanku laba nin oo midna ilmo adeero ahaayeen midna uu adeer u ahaa, lana kala odhan jiray Xasan Cabdi Cali (Gurey) & Cali Xasan Ibraahiim (Daroor), Nimankani waxay ahaayeen barbaar guur doon ah, abwaankuna wuxuu jeclaystay inuu tusaaleeyo gabadha guurka ku habboon & midda aan ku habboonayn sifaadka kala duwan ee lagu aqoonsado oo ladoonaayo in labarto.

Hadaba gabayaaga ayaa tilmaamay sifaadka uusan shaqsi ahaan jeclayn, Gurey & Daroorna wuxuu kula talinayaa in aysan guursan gabadhii calaamadahaa yeelata ama lagu tuhmo Wuxuu yidhi:

- Gureey & Darooroow arini, waygu gabileeye
- Wixii galayba waa uun galgalan, gu' & jiilaale
- Gilmi dhabadka waxa iigu wacan, hal igu gaarnaaye
- Garanna wayday meeshaan qalbiga, uga gufaacoone
- Guddigayga caawaba maqloo, geliya laabtiina
- Oo wada guntada xaajadaa, odaygu soo guurshay
- Gaashgaashka waa lagu lumaa, gole ka fuulka ahe
- Ha gudoonsan waa kii caqligu, gaan kugu ahaaye
- Gurri-bila ninkii doonayee, nacaya goonbaarta
- Ee guur ujeedoow i maqal, waan ku garansiine
- Guduud looma raacoo haween, gabalba waa cayne
- Bidhaan gebi ka laalaada waa, lagu gulaalmaaye

- Isu gaadhay gabadhaad tidhaa, meel un baa go'ane
- Gaboodleyda gaashidu kutaal, labada goonyoodba
- Ee maradu geyngeyman tahay, guur aan ka la'aado
- Ganbadh lagu fadhiistiyo midaan, gaadha fidineynin
- Ganuunka & xeedhyaha middaan, goor Allaba dhiibin
- Gadh-cadaayadii reer tolkeey taan, u gogol haynin
- Een geedka laga naadinayn, guur aan ka la'aado
- Gaadhgaadhka awrtiyo nirgaha, geela laga reebay
- Gurijoogta xoolaha midaan, goosanka u diidin
- Een garanin soo dheelan ee, guriga uun joogta
- Gudbantaan halkayguba galayn, guur aan ka la'aado
- Allow garawo giirka & afka & ganafka uun taageysa
- Oo qoolka uun kula galdi'i, magac waxay gaadho
- Gandihii miduu wada nacee, gacalka fiigaysay
- Gool boodadii laga samree, goysay ubadkeeda
- Intay dhiig isoo galin lahayd guur aan ka la'aado
- Geediga hayaanka ah midaan, gaadhin waligeedba
- Ee gabanta loo sido sidii, goodir noo curatay
- Waa geeri naagtaan ratiga, kuu gadh qabanayne
- Reerkoo gawaan degay dadkoo, gibbiladii waabtay
- Anoo galangalciyo oon la tuban, furayna gaadiidka
- Geedaha hadii lala dhexgalo, gudimo oodeeda
- Galoon badhaxa uma dhaamin karo, geedantada jaane
- Guul & cidleey igu waddaa, goox aan yuurure'e
- Gosha laga cabsooniyo xidhkeey, gooshu ka adeegi
- Gaade & inteey bahal isiin, guur aan ka la'aado
- Midda gaaban ee garabkiyo, guudku wada joogo
- Ee socodka uma gaatisee, gididiflaynaysa
- Ee gura ma laacdee ritiga juu, ku ganacgoysa
- Janbal gibin ah een golos ahayn, guur aan ka la'aado
- Carmal jeer hortay guursatoo, geeda soo shidatay

- Oo iga gu' wayn oo taqaan, gaadmo & dhuudmo
- Waxay gogosha ii saxartirtoo, ila xidh goysaaba
- Dhowr habayn markii lala golyoo, gaax lakala maalo
- Gadaal bey lasoo bixi dabaro, hor ugu gaarnaaye
- Intey galab i aynabi lahayd, guur aan ka la'aado
- Midaan cowska soo guran aqoon, garab ku boodhlayda
- Galgalin jiifta bacadka uun galgalan, gu' & jiilaalba
- Oo golaha qoyska & ninkaba, leexadu is goysay
- Ee giiryar baa cunay i odhan, guur aan ka la'aado
- Galbashada dharaartii midaan, gaadhka iga haynin
- Een garanin goortii wakhtiga, aanan gafayn reerka
- Een guurahaygii milshiyin, aar gudaan ahaye
- Anoo luga gorgoray taagnidii, gogosha oo laaban
- Intaan ciil la gow odhan lahaa, gaada iga haysa
- Amaan goor xun daydayan lahaa, guur aan ka la'aado
- Maradaan u gaday khayligaan, gugakan soo iibshay
- Garbasaar hadaan ugu dariyo, boqoro giirgiiran
- Gol maxidhato ganaca banayn, guur aan ka la'aado
- Galoolka & cowskay badhkood, guna ka gooyaane
- Garba duubantaan laga dayeyn, gala in ay laabto
- Waxay hooyadeed garab degtoo, la i gargaaraaba
- Mar hadaan ka guurana hadey, biidna garan waydo
- Gabad koban lahayn kuma gam'ee, guuraan ka la'aado
- Dumaal gaban leh gaayaa tufley, waa mas geed galaye
- Haddaan wiilka guulguulo, way igu guhaadoone
- Waa gool dhashii haysatee, guur aan ka la'aado
- Gabdhahoo ciyaar tuman raggoo, yara dul goocaaca
- Golostay ujeedeen haday, guluca soo saarto
- Waxay guuntu boodoo ciyaar, daba gablaysaaba
- Goobtii midii lagula hadhay, geedka dhiniciisa
- Garaclayda geelada irmaan, guur aan ka la'aado

- Gool weyn middii loo qaliyo, gogol lasoo dhoobay
- Gab hadey tidhaahdoo martidu, igu dul gowriirto
- Weelkeedu tuu gorof yaheen, laguba gaaraynin
- Nin guraar minkii loodhigeey, gobi la yaabtaaye
- Intaan ciil la gow odhan lahaa, guur aan ka la'aado
- Talaabada midaan gaw kasiin, gooray soconayso
- Oon gola baxayn oon xarago, gacanta saydhaynin
- Een dumarka gaasirin gidigii, guur aan ka la'aado
- Allow gaaridii loo xishiyo, gabadha loo aayo
- Raaliyo garaad badan midaan, iga guhaadaynin
- Adaan gacanta kuu hoorsadaye, ha i gafsiin caawa.

Waxaa intaa iiga eg gabaygii guur aan ka la'aado ee uu mariyay Abwaan Aw Yuusuf Barre; waxaana filayaa ragow inaad wax badan ka fahamteen gabayga abwaanka kaas oo kuu ifinaaya sida ugu qiimaha badan ee loo xusho marwo wanaagsan oo aad ku aaminto naftaada mustaqbalna aad lawadaagto, waxaa sidoo kale gabaygu cadeeyay in laga fogaado marwada aan laga helin tilmaahaas wanaagsan.

Waxaa jira gabay jawaab u ah gabayga guur aan la'aado kaas oo ay tirisay "Abwaanada Xaawa Bulxan Cali"gabaygaan jawaabtaa isaga naftiisa waxaa layiraa "guur aan ka la'aado" abwaanaddu waxa ay sheegtay in ay jiraan rag & dumar xun oo labadaba haboon tahay in laga gabyo oo laga digo guurkooda.

Waxay tilmaantay abwaanad Xaawa in ay muddo aad u dheer diyaarinaysay gabaygaan jawaabta ah oo

gabdhaha u qalbi dajinaaya tusinaayana in ay jiraan rag guurkooda khasaaro ay tahay sida abwaan Aw Yuusuf Barraba uu sheegay in ay jiraan gabdho guurkoodu aanu habooneyn oo la doonaayo in la iska jiro.

Waxaan arkay aniga oo magaalo maraya niman meel isugu yimid oo aad u farxaaya una qoslaaya, waan ku soo dhawaaday waxaan arkay iyagoo dhagaysanaya gabayga guur aan ka la'aado ee abwaan Aw Yuusuf Barre, waxaan lahadlay mid raggii ka mid ah oo waxaan ku iri makula tahay in gabaygaan jawaabtiisa qof dumar ah ay samayn doonto waqtigey doontaba ha ahaatee kaas oo sheegaaya dhaliilaha & ceebaha aad adinkuba leedihiin? Wuxuu igu yiri maba dhici karto naag in ay nala gabaydo ama ay noo jawaabtaba, waxaan ku iri waad arki doonta waqti ay ahaato inaan gabaygaas jawaabta ku haboon u keeno Insha Allaah.

Abwaanad Xaawa Bulxan Cali waxa ay tilmaantay in saddex u jeedo ay u samaysan gabaygaan jawaabta ah, ujeedada koowaad waa hiillo aan gabadhaha soomaaliyeed u hiilanaayo iyadoo laba abwaan ay isaga dambeeyeen oo midna uusan ka jawaabin; ujeedada labaad waa jawaab aan u jawaabaayo abwaanadii labada ahaa ee isaga dambeeyay gabaygii guur aan ka la'aado, tan saddexaadna waa in ay ogaadaan gabdhaha soomaaliyeed in ay gabyi karaan, gabaygiina abwaanad xaawo bulxanna waa kan:

Eeg bogga xiga

- Indhoweyd murtidii geyfanayd, waa anigaan geline
- Waatii aan gees maray naxwihii, Guulle ii qoraye
- Maantana rag baa igu gujeeyee, ma aanan goobeene

- Ruuxna gaar u may lahayn murtidu, waa qofkii garane
- Gabdhihii la caayee xumaha, gurada loo saaray
- Haddii aan gar eexaad la naqin, waa gef hadalkaase

- Idinkuba wax baad geleleftaan, ka la guraysaane
- Maxaa libin ku-geeraarka iyo, guusha idin siiyay?
- Guyaal iyo guyaal badan haddii, nala ku soo guuray

- Goor iyo ayaanba haddaan, ciil la galawlaynnay
- Caro gaamurtaan wada qabnaa, gebi ahaanteene
- Gacan bidix ayaad nagu waddeen, tan iyo goortaase

- Haddii ay gadoodaan habluhu, la ma guhaadsheene
- Gabyayaal inay noo kaceen, geliya laabtiinna
- Aqoonyahanno gaamuroo murtida, wada gorfaynaaya

- Inay maanta wada geyfan yiin, geliya laabtiina
- Markii aanse garaadsadiyo hadey, garashaday buuxdo
- Raggu waxay abid guranayeen, godob xumaanteene

- Garaadli'i ma haysee gabdhaha, jaaniskaa gabaye
- Guriga iyo intaan ubadka iyo, fool galangal caynaynay
- Nagu gaadde gabayada xunoo, gubaya jiirkeenna

- Gefkaad naga gasheen inuu ciqaab, idin geyaysiiyo
- Rabbina idin gargaarin oo nabsigu, idin ku soo guuro
- Guyaal baan sugaynnoo waqtigii, waa la soo galaye

- Guryihiyo haddaad naga jafteen, ubad gardaadsiinta
- Aan googaalaysannee ina ragow, goobta noo fidiya
- Guushuna kuway raacdo aan, wada guddoonsiinno

- Afartaa gorfeeyaye mid kale, aan giraangiriyo
- Geyriyo ufada soo dhacdiyo, yaare aan geliyo
- Gucummaale aar iyo sidii, goosha aan reemo

- Aan guul-guulo afarreey-guntaha, guushu waa aniye
- Gosha aan la baxo kaan naxwaha, garan ujeedkeede
- Xaajadana aan soo gambiyo, way gun weyn tahaye

- Aw-yuusuf gabayguu tirshiyo, gedihi uu sheegay
- Yamyam wuxuu ka gaaftee u yiri, guur aan ka la'aado
- Aniguba gaddaas oo kalaan, qayb ka gaabsadaye

- Na ma wada geyaan nimanku oo, qaar ayaa gurane
- Kuwa gogosha aan loo dhigayn goyn, aan ka higaadsho
- Dabaguraha gooraha xun jecel, gabar ardaa jiifta

- Gaatamaha tuugada u guda, goor dhexiyo leylka
- Gaajoonahaas aan dhergeyn, guur aan ka la'aado
- Midka giniga haystee ku xira, jeebka gudihiisa

- Een garanin reerkaaga geli, Guulle wuxuu keenay
- Intii aan galluubnaan lahaa rafaad, guur aan ka la'aado

- Marti geyre dhaxanliyo ku timid, guure iyo dheelmad
- Gogolkaan u soo qaadinoon, sooryo gelinaynnin
- Intii uu gacalkii hiifi laha, guur aan ka la'aado

- Midkaan geedka laga naadin oo, goobta laga sheegin
- Oon tirada soo gelin kolleey, saami wuu gabaye
- Intuu aniga ii guuxi laa, guur aan ka la'aado

- Midkaan ehelka garan oon wanaag, gacan uqaadaynnin
- Ilmadowda gaajoon midkaan, gelin qadaa siinnin
- Intay guriga ii ooyi layd, guur aan ka la'aado

- Midka gada dharkiisoo rahmada, waa gu' baaqsadaye
- Intuu qaad ku soo gadan laa, go'a sariirtayda
- I ma geyo nin qaawane midkaa, guur aan ka la'aado

- Kaan garan salaaddiyo waqtiga, Guulle faral yeelay
- Googoyska cibaadada gefee, geesta uga leexday
- Oon masaajid soo gelin waqiis, guur aan ka la'aado

- Midka guurka diidoo macsida, abidki goobaaya
- Een garan samaantee xumaha, daba guclaynaaya
- Saanigaa Ilaahay ka go'ay, guur aan ka la'aado

- Midka diinta garanaaya ee, gooyay dhaqankeeda
- Shareecada midkaa garab maree, gaalo dabaraacay
- Garaad-xumaa u geysee dulliga, guur aan ka la'aado

- Caasi ganaya hooyadi intuu, gumuc u soo qaato
- Ama cay ku gaacinahayoo, nabar ku guulaaya
- Gayaan ku ma habboonee midkaa, guur aan ka la'aado

- Garruun xaasidnimo loo tabcoon, garasho hoos oollin
- Gafuur-jabin midkaa i la rabeen, gacalo ii haynnin
- Intuu ii la gaatami laa ul weyn, guur aan ka la'aado

- Xilagube gasiin iyo aan bixin, maro is gaarsiisan
- Guudkana islaam uga egoo, gogosha ii jiifa
- Intii goor xun aan ooyi laa, guur aan ka la'aado

- Guullihii abuurtiyo midkaa, nabiga cayda ku la geyfan
- Gabood-falaha diintii gudbaye, dhaaraan ka la goynnin
- Gaalkaas Ilaahay ka go'ay, guur aan ka la'aado

- Gaarida wanaagga le midkaan, garan abaalkeeda
- Gafuur-buure aan ruuxna garan, wuxuu gollaynaayo
- Gujeeyaha gunuusee guryama, guur aan ka la'aado

- Kaan jikada galayn oo ilmaha, gelinna haynaynnin
- Oo aan garawshiyo lahayn, saacidee gabadha
- gacan kaan siinayn bugtada, guur aan ka la'aado

- Waalidkay midkaan gobonimiyo, sharaf ka goobaynnin
- Guuleed walaalkay ninkaan, gaar u magacaabin
- Ee xididka gooyee aan rabin, guur aan ka la'aado

- Gabagabo dagaal iyo markii cadaw la guulaayo
- Gantaalaha markii lays ku riday ee, geesi diriraayay
- Giiryaalaha gadaashayda maray, guur aan ka la'aado

- Midka Gaawadii oo dhashay iyo, Goodir dabajooga
- Galaxeeda caanaha midkaan, goommanaha siinnin
- Bakhayl gurigi loo ma soo hoydee, guur aan ka la'aado

- Mooryaanka gaajoon ee waddada, tuugadaw gelaya
- Googaradda dumarkiyo midkaan, garana dhaafeynnin
- Jidgooyaha islaamkii gambiyay, guur aan ka la'aado

- Qabqablaha gumaadee shacbiga, dhiiggi gadanaaya
- Dawlad gaamurtiyo kaan jeclayn, calan shan-geesooda
- Oo gaar kaligi nolol u raba, guur aan ka la'aado

- Balwad kay gagabisee fadhiya, cooshka laga guuray
- Qaadka iyo garaabada midkaa, guranayee jiifa
- Oo qiimihii nolosha gabay, guur aan ka la'aado

- Hinaasaha guryama ee shakigu, gebigi buux dhaafshay
- Gurigayga kii soo agmara, guullan ka-horgeyska
- Guufanayska waardiyaha gala, guur aan ka la'aado

- Guurbadane gabadhuu arkaba, meher la gaadaaya
- Xannaanada gurboodkana dayaca, gurina aan joogin
- Gododlaha cidlada iiga guday, guur aan ka la'aado

- Midka deriska guul-guula ee, gawnaxyada buura
- Intuu gaarka joogana Cambaro, gaabsatee cararto
- Xaawaleyda kaa gabawarana, guur aan ka la'aado

- Allow geesi deeqsiya halyey, diinta garanaaya
- Garaad badane gobannimiyo sharaf, looga gogol yeelay
- Adaan gacanta kuu hoorsadee, calafku ii geeyo

- Gabay ku ma idlayn karo raggaan, gacalo loo hayne
- Damiirkiisa-gade baa jiriyo, ceebta gurigeede
- Dumaroow garwaaqsada raggii, laga gol roonaaye

Labada abwaanba waxa ay tilmaameen sida aad ka garanaysaan gabayadooda sida ay u haboontahay in guurka & xulashadiisa aad looga fiirsado oo laga baaraan dago, waayo waxaa jira sida ay soo sheegeenba rag & dumar guurkooda aad looga digay.

Sida aan ka aragnayna gabayada abwaanadaas qiimaha badan waxa ay soo koobeen dhamaan wixii dhaliilo ahaa ee rag & dumarba ay lahaayeen, islamarkaasna waxaan ka fahmaynaa gabayada qofka ay haboontahay in la guursado wiil & gabarba, waxaana ka baran karnaa gabayadaan cashar aad u weyn & waayo aragnimo; taas oo noo fududaynaysa inaan haleelno mustaqbalka guur wanaagsan Insha Allaah.

Gunaanad & Guubaabo

Buug yarahaan waxay Guryosamo ku soo bandhigtay waxyaabo badan oo aan is leenahay waxay wax ka tari doonaan arrimaha laxiriira guurka & sida ugu wanaagsan oo ay tahay in loo abaaro guurka, maadaama uu yahay guurku halka ay ka tafiirmayaan dadku, si aan u helno bulsho caafimaad qabta oo ka soo dhex baxday qoys ku abuurmay hanaan is xulasho oo waafaqsan dhaqanka wanaagsan, kuna wada noolaaday is jacayl, is tixgalin, naxariis & is ixtiraam.

Guryosamo waxay ku guubaabinaysaa dhalinta guurdoonka ah wiilal & gabdhaba iney guursadaan ciddii awoodda sida diinteenuba nagu boorisay, oo ayna hagaajiyaan haabka is guursiga si loo sameeyo bulsho, is fahamsan, isku ujeeddo aoo isu dul qaata, si aan u helno qoys nidaamkaas wanaagsan ku bishay kuna barbaaray, qoyskaas oo aan rajaynayno iney noqdaan kuwo leh maskax & garaad caafimaad qaba.

Ugu dambayn Guryosamo waxay ka digaysaa dhaqan xumida baryahaan dambe guurka ku soo kordhay, ee loo bixiyay “Guurka Dahsoon” (Qudbo Siro), maxaa yeelay arrintaan waxay guurka ka dilaysaa macnaha, qiimaha & mustaqbalkaba, waana arrin halaynaysa dhalinyarada kuna hagaysa waddo sharci darro ah &

dhilaysigii oo la xeeladeynaayo, waxayna sumcaddii ka lumisay arrintaan gabdhaheennii qiimaha badnaa oo loo soo geed fariisan jiray, gabaatigana laga bixin jiray, dharaar cadna geed hoostii lagu wada bixin jiray iyadoo loo wada dhamaa, sidoo kale arrintaan foosha xun waxay murugo & uur ku taallo ku reebaysaa waalidkii qiimaha badnaa ee naf & maalba u soo huray gabdhahooda, kuna han waynaa iney helaan mustaqbal hagaagsan oo u horseeda hanuun Rabbi & horumar raaya oo ay ku caano maalaan aduun & aakharo intaba.

Qudbo Siro waxay waddo xun u fureysaa bulshada, waxayna hor istaagaysaa oo ay isbaaro casriyaysan u tahay taranka, waxay kaloo luminaysaa jacaylkii, midnimadii, naxariistii & dadnimadii qoysaskeenna.

Dadka dhalinyarada u badan oo arrintaas caadaystay waxay Guryosamo ku leedahay dib uga daga dhaqan xumidaas, gabdhuhuna waa inay dib u eegaan noloshooda & mustaqbalkooda guur, hana akhriyaan taariikhda kuwii ku dhacay dabinadaan fool xumadaa ee lagu gaaday laguna gowracay, waxaana oranaynaa gabdhaheena sharafta mudan “nimaan kuu furi doonin, yuusan kuu rarin” weedha ugu dambaysa ee Gurysosamo waa “yaan Allaah (Sw) laga fogaan bulshadana lafasahaadin, “Qoys dhis waa Qaran Dhis”.

Tixraaca Buugga

1. Kitaabka Qur'aanka Kariimka
2. Sunnada Suubanaha (S c w)
3. Axkaamta Guurka Islaamka

Dr. Cusmaan Cali Faarax

4. Muxaadaro Guurka

Sh. Max'ud Max'ed Shibilli

5. Muxaadaro Guurka

Sh. Max'ed Sh. Cumar Dirir

6. Barbaarinta Guurka

Dr. Max'ed Kheyr Ashicaal

7. Hidaha & Dhaqanka

Axmed Faarax Cali (Idaajaa)

8. Guurka & Sheekeeyinkiisa

C/qaadir Nuur Xuseen (Maax)

9. Xalka Qoyska

Cusmaan Sh. Axmed Jaamac


Xulashada Guurka
2018


Guryo
Samo



Somali Library

Buugaan iyo Buugaag kale ee

ku qoran Luqadaada Hooyo ee **Af-Soomaaliga**

waxaad ka heleysaa

Somali Library

Fadlan Booqo Boga Telegram-ka

https://t.me/Somalilibrary

liibaanwaasuge